Maareynta Xaaladaha Cudurka ee Bulshada

# Tilmaanta Tababaraha/Korjoogaha

*Ee Loogu Talogaley in Lagu Tababaro Shaqaalaha Caafimaadka Tuulada ee Soomaaliya*



Maareynta Xaaladaha Cudurka ee Bulshada

# Tilmaanta Tababaraha/Korjoogaha

*Ee Loogu Talogaley in Lagu Tababaro Shaqaalaha Caafimaadka Tuulada ee Soomaaliya*

# Tusmada buugga

GOGOLDHIG


Tilmaanta tababaraha/korjoogaha 9

**QAYBTA I:** Tababarka dhismaha jadwalka habka barista 11

1. **Tilmaanta casharada tababarka** 12
    *a. Tababarka Tababaraha/Korjoogah* 12
**2. Jadwalka tababaraha /hawlfududeeyaha** 13
    *b. Tababarka Adeegayaasha Caafimaadka ee Tuulada (ACT)* 16
**3. Jadwalka adeegayaasha caafimaad ee tuulada** 18
**4. Habka barista** 22
**5. Doorka tababaraha iyo waajibaadkiisa** 26
**6. Kalfadhiga bukaan socodka** 27
**7. Waajibaadka adeegaha caafimaad ee tuulada** 29
**8. Agabka iyo tilmaamaha sida loo korjoogteeyo act** 30
    *a. Waajibaadka* 30
    *b. Tilmaanta sida loo adeegsanayo liiska hubinta ee lagula soconayo daryeelka ay sameeyaan ACT* 30
    *c. Tilmaanta adeegsiga warbixinta billaha ah ee ACT* 34
**9. Waajibaadka adeegaha caafimaad ee tuulada** 37
**10.Waxa loo adeegsado qiimaynta imtixaanka u dambeeya ee act** 37
**11. Qiimeynta agabaka tababarka** 11

**QAYBTA II:** Qiimee oo kala saar ilmaha da'diisu u dhaxayso 2bilood ilaa 5sanno 43

**1. Hordhaca shaxanada** 44
**2. Hordhaca shaxanada** 46
**3. Foomka wax lagu qoro ee adeegaha caafiimaad ee tuulada** 56
**4. Barista qufaca iyo neefsiga oo adkaada adeegayaasha caafimaadka ee tuulooyinka:** 69
    *a. In la garto neefsiga dhakhsaha ah* 70
    *b. Cabiraadda dhakhsaha reefsiga* 70
    *c. Cabirka dhakhsaha neefsiga ee ilmaha* 71
*d. Barashada sida loo garto Feeraha oon kala bixin (Saab Qaad)* 76
**5. Barista shubanka iyo fuuqbaxa daran act yada.** 83
**6. Barista xumadda act yada** 96
**7. Change with ka eeg calaamado nafaqo daro ba' an** 112

**QAYBTA III:** Bar adeegayaasha caafimaadka ee tuulooyinka in ay daaweeyaan ilmaha jira inta ka dhaxaysa 2bilood ilaa 5 sanno sanduuqyada daweynta / warqada gudbinta. 117

**"SANDUUQ 1V"** BAR HOOYADA SIDA KANIINADA CUNUGA GURIGA LOOGU SIIYO 120
**"SANDUUQ 2V"** SIDA LOO QASO ORS 124
**"SANDUUQ 3V"** KANIINADA AMOXYCILLIN EE LOOGU TALA GALAY BUKAANADA XAALADOODU LIIDATO 126
**"SANDUUQ 4V"** KANIINADA AMOXYCILLIN EE LOOGU TALA GALAY CARUURTA QABA QAARJEEXA 136
**"SANDUUQ 5V"** QORSHE C: DAWEE FUUQBAXA DARAN 138
**"SANDUUQ 6V"** QORSHE B: T FUUQBAXA AAN AADKA AHAYN KU DAWEE GURIGA ADOO ISTICMAALAYA ORS 144
**"SANDUUQ 7V"** QORSHE A: SHUBANKA GURIGA KU DAWEE ADOO ISTICMAALAYA ORS 152
**"SANDUUQ 8V"** 20 MG. CUNUG KASTA OO SHUBAN UU KU DHACAY 158
**"SANDUUQ 9V"** U SII CUNUGA RECTAL ARTESUNATE SIDII DAAWO KA HOREYSA SII GUDBINTA 161
**"SANDUUQ 10V"** KANIINADA ARTESUNATE/SP SIDII DAAWO KA HOREYSA SII GUDBINTA 164
**"SANDUUQ 11V"** SII DAREERE LEH SOKOR AMA MALAB 171

**QAYBTA IV:** Waxa loo adeegsado qiimaynta imtixaanka u dambeeya ee act 173

# Dadka hagajijay daabicida labaad ee buugan

Buugaan waxaa hagajiyay oo bedelidiisa ku saleeyay Soomliya oo ay diyarisay Marwo Laura Masiello wuxuu kusaleysan yahay fududeyn la fududeeyay buuga : "Integrated Essential Child Health Care for Front line health Workers in south Sudan (IECHC)".
Labada dibu habbeyn ee buuga waxay ku saleysan yihiin dabacidii asalka ahayd ee IMCI (Integrated Management of Childhood Illness) mabda'iyan iyo nuxurba.

# Mahadnaq

Waxaa mahadnaq mudan kulli NGO - yadi ka geystay kaalmo buugan sida COSV iyo IRC gaar ahaan Dr Abdullahi Mohamed iyo Mrs Amina Issa Mohamud iyo Mrs. Fawziya A. Nur oo gacan weyn naga siiyaya habeynta, wanaajinta iyo u beddelidda buuga ee luqda Soomaaliga. Sidoo kale waxaa mahadsan Mr Peter Desloovere oo kalmo ka geystay dib u eegida iyo iyo dhameystirka DVD ICCM, tababarayasha iyo dadkii ka qeyb galay tababarka iyo Dr. Nevio Zagaria.
Waxaa mahad badan leh Dowladdaha Swiss iyo Spain oo naga kaalmeeyay sameynta ICCM Training Package.

Daabiciddii ugu dambeysay ee dib loo eegay, taariikhdi 23 ka janayo 2012

# Hordhac

Laga bilaabo bilihii hore ee sannadki 2011, Geeska Afrika waa soo foodsaartay abaarao aanan hore loo arkin. Abaarahas waxay aad u sii weynadeen bilihii Agosto iyo Setembar ee isla sannadkas 2011, iyagoo saameeyay in ka badan 13 milyan rux oo ku nool gobollada dhexe iyo konfur ee dadla Soomalia, dadkas oo horey u sameyeen abaaro, dagallo iyo xasillooni la'an 20 kii sanno ee la soo dhaafay. Dhumucda baaba'a dabiiciga ah waxaa hore ugu dhawaaqay Habka" Early warning system" sannaddii 2010 qeybtiisii dambe. Waxa habboneyd in dhibaatooyinkaas la sii shegay loo sameeyo gurmasho ku habbon iyo habab casri ah oo looga hortagi karo dhibaatooyinkas laga sii digay ee sameyay gobolladi hore u dhibboonaa.

Ujeedada ICCM,"Integrated Community Case Management of children under 5", waa in la xoojiyo dadka deggen gobollada dhexe iyo koonfur ee Somaliya si ay ula tacalaan cuduradda dilayaasha ah ee dadka tabarta yare. Tallabadan waxa loogu talagalay in bulshooyinkaas loo diyaariyo dad tababaran si ay awood ugu helaan in ay fahmaan daweyaan ama u diraan diri isbital ilmaha da'dooda ka yartahay 5 sanno oo qaba cuduradda aqarjeex, shubanka , dumada iyo nafaqa darrada.

Qalabka tababarka iyo qaabka tababarka waxaa lagu saleeyay xaaladda gobollada dhexe iyo konfureed, waxana lagu tarjumay luqadda Somaliga ah.
Dabaqidda iyo hagajinta qalabka tababarka waxaa aad loo sii hagaajiyay loona sii ballariyay intii la taba barayay tababarayaasha sare, tababarayasha dhexe iyo kormeerayasha. Dejinta iyo qorsheynta mashrucan waxaa ka qeyb galay hey'ado calami ah iyo NGOs, iyadoo ujeedada ahayd in la caddeeyo deegaanadda dhibka weyn ka jiro si loogu sameeyo tababar iyo kormeer/horjooge shaqalaha cafimadka tuulooyinka (VHW). Waxaa xusid mudan in muhimad la siiyo mustaqbalka in la sameeyo wada qorsheyn mashruucyada nafaqada (nutrition cluster) iyo ICCM si loo wada dooro meelaha ay dhibatada darran ka jirto, loogana howl galo. Qorsheyntas wada jirka ah ee labadas mashruuc ee nolol badbadiyayasha ah aya ogolan karta in la helo ilaalin ama kormeer culus ee dhibaatooyinka cuduradaas kenaan.

Ugu dambeyntii, tallaabada lagu xoojinaya laguna badbadinayo dadkas intusan dhibka dhicin iyo intuu dhibka jiro si ay u daryeelaan dadkooda aad nugul, aya ah habka keliya oo lagu xoojin karo awooda bulshada, laguna gaari karo istratejiyo lagu yareyn karo qatarta baaba'a guud oo inta badan anan ka tarjumin ama ka fog xaqiiq ah in dadweyne tira badan isku dayaya iney ka badbadaan raadadka dagallo iyo burbur dabiici ah.

# TILMAANTA TABABARAHA/KORJOOGA: QEEXID

## TILMANTA TABABARAHA/KORJOOGAHA

Tilmaantan TABABARAHA/KORJOOGUHA waxa loo dejiyay si Tababarayaashu u tababaraan hawl wadeenada caafimaadka ee tuulooyinka aadka uga fog cusbitaal, si ay u qiimeeyaaan, u kala saaraan una daaweeyaan carruurta da'doodu tahay 2 bilood iyo ilaa 5 sanno tahay.

**Tababarayaashu waxa ay ka heli doonaan tilmaamo dhawr ah oo ka caawin doona in ay agabkii u habboonaa u adeegsadaan tababarka adeegayaasha caafimaad ee tuulooyinka.**

Tilmaantani waxa ay ka koobantahay saddex qaybood:

## QAYBTA I: QAAB DHISMEEDKA TABABARKA IYO HABKA

**1. Tilmaanta tababarka/casharada**

Tababaruhu waxa uu xog ka heli doonaa sida uu tababarku u habaysan yahay.

**2. Habka barista**

Habka tababarka waxa loo tilmaamay si faahfaahsan si looga taageero in Tababaruhu u baro:

- Hawl wadeenada isaga oo adeegsanaya habab kala duwan;
- Barayaasha noocyo kala duwan oo barista ah iyo sida iyo goorta la adeegsado.

**3. Doorka tababaraha iyo waajibaadkiisa**

Cutubkani waxa auu ka koobanyahay tilmaan faahfaahsan oo ku saabsan Tababaraha doorkiisa iyo waxa ay tahay in uu qabto kahor iyo inta lagu guda jiro tababarka.

**4. Waajibaadka saaran Adeegayaasha caafimaad ee tuulada (ACT)**

Cutubkani waxa uu ka koobanyahay tilmaan faahfaahsan oo ku saabsan doorka iyo waajibaadka saaraan adeegaha caafimaadka ee tuulada ee ay tahay in uu tuulada ka qabto.

**5. Kalfadhiga bukaansocodka**

Tababaruhu waxa uu ka heli doonaa dhammaan hawlaha loo baahanyahay in la qabto si loo diyaariyo loona fuliyo hawlaha, kuwaasoo ay ku jirto hababka iyo agabku.

**6. Tilmaanta korjoogaha**

Waxa ay ka koobantahay dhammaan shaqada iyo hawlaha ay tahay in uu qabto korjooguhu si uu u qabto hawlaha korjoogtaynta.

**7. Imtixaan kama dambays ah: agabka iyo shuruudda qiimaynta**

Waxa ay ka koobantahay tilmaan faahfaahsan oo ku saabsan shuruudaha iyo sida loo qiimaynayo imtixaanka kama dambaysta ah.

**8. Jadwalka**

Waxa ay ka koobantahay laba Jadwal, ka hore waxa loogu talagalay tababarka Tababaraha, ka kalena hawlwadeenada caafimaadka ee tuulada.

## QAYBTA II: QIIMEE OO KALA SAAR ILMAHA DA'DIISU KA DHAXAYSO 2BILOOD ILAA 5SANNO

Qaybtan, tababaruhu waxa uu ka heli doonaa dhamaan waxyaalaha iyo layliyada uu ugu baahanyahay in uu ku tababaro adeegayaasha caafimaadka ee tuulada iyo waliba tilmaanta isku dubbaridka, maaraynta iyo qabashada kalfadhiyada bukaan-socodka.

## QAYBTA III: DAAWEE ILMAHA DA'DIISU KA DHAXAYSO 2BILOOD ILAA 5 SANO

Qaybtani waxa ay ka koobantahay dhammaan tilmaamaha iyo xogta ku saabsan barista sida loo daawaynayo ilmo da'diisu tahay inta ka dhaxaysa 2bilood ilaa 5sanno oo ay ku jiraan layliyo iyo sanduuqyada daawaynta.

## QAYBTA IV: WAXA LOO ADEEGSADO QIIMAYNTA IMTIXAANKA U DAMBEEYA EE ACT

Layligani waa kii u dambeeyey. Waxa uu taabanayaa dhamaan ciwaanadii xiriirka lalahaa qiimaynta, soocista iyo daawaaynta ee aad soo baratay intii tababarkani socday.

# QAYBTA I :

*QAAB DHISKA*
*IYO JADWALKA TABABARKA.*

# 1. Tilmaanta casharada tababarka

## a. Tababarka Tababaraha/Korjoogaha

Duruusta tababarkan waxa loogu talagalay in lagu baro Barayaasha/korjoogayaasha habka wax loo baro, agabka loo adeegsado barista adeegayaasha caafimaad ee tuulooyinka calaamadaha guud ee halista, qufaca ama neefsiga oo dhib noqda, shubanka, xummada, calaamadha nafaqo darrada ah, waxbarista iyo la talinta ilmaha hooyadii. Intaa waxa dheer in daruustani ay u suuro galinayso in baruhu uu wax baro barayaal kale.

**Ujeedada duruusta**
Ujeedada guud ee laga leeyahay duruustani waa in ay u suuro galiyaan Baraha in uu gudbiyo aqoontiisa iyo xog ku saabsan habka wax barista iyo agabka la adeegsad Barayaasha kale, si ay u abuuranto hab lookala dhaxlayo aqoonta.

**Qaabdhismeedka duruusta**
Duruustani waxa ay qaadanayaan 5cisho oo ka kooban kalfadiyo subax iyo galin dambe ah.
Kal fadhiga bukaan jiifka oo ah qayb muhiim ah oo ka tirsan tababarka, waxa iyada la bixin doonaa maalin kasta subaxdii. Layliyo daawasho (Video) ah ayaa ku jira habka barista waxaana la qaban doonaa galinka dambe.
Daruusta waxa maamuli doona hal tababare ama in ka badan, haddii ay suura galtahay iyo hadba xaaladda jirtaa sida ay tahay si waafaqsan.
Kal fadhi kastaa waxa u qaadan doonaa 45 daqiiqo oo ay u dhaxayso 10 daqiiqo oo biririf ah.
Waqtiga qadadu waxa uu qaadanayaa muddo 2saacadood (12:30 ilaa 14:30) ama si waafaqsan dhaqanka maxaliga ah.
Bilawga iyo dhamaaadka maalinkasta oo tababarka lagu jiro, 10-15 daqiiqo ayaa lagu qaadan doonaa in dib loo naqtiimo casharadii hore loo qaatay.
Marka tababarku dhamaado, ardayga waxa ay u fariisan doonaan imtixaan ka kooban laba qaybood: qaybta koobaad waxa ay ka koobantahay laylis qoraal ah halka qaybta labaadna ka koobantahay qayb lagu qaadanayo waaxda bukaan socodka.
Jadwal ayaa lasameeyey waxaana laga heli karaa cutubka 14.

**Habka duruusta loo marayo**
Waxabarashadani waxa ay ku salaysantahay habka ka qaybqaadashada firfircoon ee wax barista si ay uga taageerto ardayda in ay fahmaan xogta, xaliyaan mashaakilka aanay tijaabiyaan xirfaddooda.

**Agabka barista**
Tababarayaasha/korjoogayaasha waxa la siin doonaa agabkan soo socda:
Tilmaamaha Tababaraha/korjoogaha
Buuga sawirada
Buuga ardayga (ACT)
Habraaca Tusaha (ACT)
Sanduuqyada daawaynta (ACT)
Foomka wax lagu qoro (ACT)
Liiska hubinta ee lagula soconayo daryeelka uu bixiyo ACTgu
Warbixinta bishii ee korjoogaha
Cajalad fidiyow
Supervisor Monthly Report
ICCM DVD
DVD "How to do RDT for Malaria"

## 2. Jadwalka tababaraha /hawlfududeeyaha

| MUDDADA | XIISADDA | HABKA BARISTA |
|---|---|---|
| **Subax/ Galindambe** 6 saacadood, 45 daqiiqadood. | Hordhaca tababarka. | |
| | Hordhacahabka duruustal oo bixinayo. | |
| | Hordhaca agabka iyo tilmaamaha korjoogtaynta. | |
| | Introduction to the flowchart. | Tusaale. |
| | CHART 1 - Check for General Danger Signs: 1st GDS. | Casharka tababuruhu bixinayo. **Laylis 1, 2, 3.** |
| | 2nd CGQ. | Casharka tababuruhu bixinayo. |
| | 3rd CGQ. Baar Calaamahada Nafaqo darada Baan/Nafaqo Ma Qabo. | Casharka tababuruhu bixinayo. **Layli 4.** |
| | Dibu eegis: hubinta. CGQ | **Casharka tababuruhu bixinayo. Laylis 5, 6.** |
| | Qiimee oo kala saar Jirro aad u Daran. | Trainer's presentation. **Exercises 5, 6.** |
| | Hordhaca SANDUUQ: dhamaystir qiimaynta si dhakhso ahna ugu gudub shaxanka 2V, 3V, 4V, 5V, 6V. | Casharka tababuruhu bixinayo. |
| | Warbixinta Bilaha, kan Gudbinta iyo Kan Raadraac. | Tusaale. **Laylis 7, 8, 9.** |
| | "Ilmuhu ma qufacayaa ama neeftu ma ku adagtahay?" Cabiraada dhakhsaha neefsiga. Feeraha oon kala bixin. | Casharka tababuruhu bixinayo. **Layli 10. Layli fiidiye ah C- Qaybta 2. Layli 11 -** Drill. **Layli fiidiye ah C- Qaybta 3 - 4.** |

MAALINTA 1

| MUDDADA | XIISADDA | HABKA BARISTA |
|---|---|---|
| **Subax:**<br>2 saacadood | Bukaan socods – Qiimee oo kala saar **CGQ iyo Qufaca ama neefta o ku adag.** | |
| **Galindambe:**<br>6 saacadood | Qiimee oo kala saar oof wareen daran. | Casharka tababuruhu bixinayo. **Layli 12.** |
| | Qiimee oo kala saar oof wareen. | Casharka tababuruhu bixinayo. **Layli 13c.** |
| | Qiimee oo kala saar hadii aanu oof wareen jirin (qufaf ama duri). | Casharka tababuruhu bixinayo. **Layli 14.** |
| | "ilmuhu ma shubmayaa?". | Barista shubanka iyo fuuqbaxa daran act yada. |
| | Hubi oo ka eeg in calaamadihii fuuq baxa leeyahay ilmuhu. | Casharka tababuruhu bixinayo. |
| | Qiimee oo kala saar fuuq bax daran. | Casharka tababuruhu bixinayo **Layli 17, 18.** |
| | Qiimee oo kala saar haddii uu jiro **Fuuq bax xoogay ah.** | Cashar baruhu bixinayo.<br>**Layli 19, 20, 21.**<br>**Layli G**: fiidiyow iyo daraasadlagu samaynayo xaalad "Josh". |

MAALINTA 2

| MUDDADA | XIISADDA | HABKA BARISTA |
|---|---|---|
| **Subax:**<br>3 saacadood | Ilmuhu xummad ma leeyahay?<br>Qiimee oo kala saar haddii ilmuhu xummad leeyahay.<br><br>**Hordhaca RDT. Barashada qabashada RDT.** | Hordhaca xumadda. Cashar baruhu bixinayo.<br>**Layli L: fiidiyow**<br>Cashar baruhu bixinayo.<br>**Laylis 22, 23, 24, 25, 26, 27, 28.** |
| **Galindambe:**<br>3 saacadood,<br>30 daqiiqadood | **Barashada qabashada RDT.**<br><br>Ka raadi nafaqo darro dhex dhexaad ah iyo mid daran.<br>Garo nafaqodarada dhexdhexaadka ahiyo ta daran adiga oo adeegsanaya MUAC. | Layli ku sabsan.<br>RDT: **K-1, K-2.**<br>**Laylis: J – 1, J – 2.** |

MAALINTA 3

| MUDDADA | XIISADDA | HABKA BARISTA | |
|---|---|---|---|
| **Subax:**<br>3 saacadood | *Bukaansocod. Qiimee oo kala saar* dhammaan carruurta leh 5 xaaladood midkood. | | MAALINTA 4 |
| **Galabtii:**<br>3 saac iyo 30 daqiiqo | **Hordhaca SANDUUQa daawaynta iyo daawaynta afka ah.**<br><br>**SANDUUQ 1V:** Bar hooyada sida loogu siiyo carruurta kiniinka guriga.<br><br>**SANDUUQ 2V:** Sida loodiyaariyo ORS.<br><br>**SANDUUQ 3V:** kiniin amoxycillin ah sii carruurta xaaladdoodu darantahay**.**<br><br>**SANDUUQ 4V:** kiniin amoxycillin ah sii carruurta oof wareenka qabta.<br><br>**SANDUUQ 5V:** Qorshaha C – daawee fuuq baxa halista ah.<br><br>**SANDUUQ 6V: Qorshaha B:** ku daawee fuuq baxa xoogayga ah ORS guriga dhexdiisa. | Tusaalayaasha iyo casharka Tababaraha.<br><br>**Layli 1-2** Weydiin Furan.<br>**Layli 3.**<br>**Layli 4**: matalaad. **Laylis 5, 6**<br>**Layli 7.**<br>Casharka uu bixinayo tababaruruhu<br>**Layli 8**-Drill<br>**Layli 9-10-11**<br>**Casharka uu bixinayo tababaruhu.**<br>**Layli 12 - Weydiin Furan.**<br>**Layli 13 – matalaad, qaybta 1 & 2.** | |
| | **SANDUUQ 7V: Qorshaha A:** ku daawee shubanka guriga adoo adeegsanaya ORS. | Casharka tababaruhu bixinayo<br>**Laylis 14, 15.**<br>**Layli 16 - Layli 17 - Matalaad.** | |
| | **SANDUUQ 8V:** ku daawee zinc ilma kasta oo shuban hayo. | Casharka tababaruhu bixinayo iyo tusaalaha<br>**Laylis 18**<br>**Laylis 19-20-21.** | |
| | **SANDUUQ 9V:** ku daawee ilmaha Rectal Artesunate. | | |

| MUDDADA | XIISADDA | HABKA BARISTA |
|---|---|---|
| **Subax:** 3, 30 daqiiqadood saacadood | Liiska Hubinta Ee Lasocodka Daryeelka Caafimaad Ee Ay Bixiyaan Act.<br><br>Warbixinta Billaha Ah Ee Korjoogaha.<br><br>Supervisor Monthly Report (from Checklist into Monthly Report). | **Tusaalaha Tababaraha. Laylis** |
| **Galindambe:** 3 saacadood, 30 daqiiqadood | Wadida layliyada la xiriiro tilmamaha korjoogtaynta.<br><br>Imtixaanka kama dambaysta ah, jawaabta imtiixaanka iyo falanqaynta. | **Layli 22–imtixaan kama dambays: qybta 1: Layli qoran; Part 2: kalfadhiga bukaan socodka.** |



## *b. Tababarka Adeegayaasha Caafimaadka ee Tuulada (ACT)*

Tababarkan waxa loogu tala galay in lagu tababaro adeegayaasha caafimaadka ee tuulooyinka somaliya iyada oo lagu tababarayo calaamadaha guud ee halistta, qufaca ama neefsiga oo adkaada, shubanka, kaneecada, in ay lala taliyo oo wax la baro hooyada ilmaha.

### Ujeedada tababarka

Ujeedada guud ee laga leeyahay duruurstani waa in lagu tababaro shaqaalaha caafimaadka ee ka shaqeeyaha tuulooyinka fog fog si ay u qiimeeyaan, u kala saaraan una daaweeyaan carruurta da'doodu ka dhaxayso 2bilood ilaa 5sanno si ay uga hor tagaann una yareeyaan dhimashada caruurta ka yar 5 sano.

### Qaab dhismeedka tababarka

Duruursta adeegayaasha caafimaadka ee tuuloyinku waxa ay ku dhamaanayaan 8cisho. Kal fadhiga bukaan socodkaa oo ah qayb muhiim ah oo ka tirsan tababarka, waxa isaga la bixin doonaa maalin kasta subaxdii. Layliyo daawasho (Video) ah ayaa ku jira habka barista waxaana la samayn doonaa galinka dambe. Daruusta waxa maamuli doona hal tababare ama in ka badan, haddii ay suura galtahay iyo hadba xaaladda jirtaa sida ay tahay iyada oo la eegayo. Kal fadhi kastaa waxa u qaadan doonaa 45 daqiiqo oo ay u dhaxayso 10 daqiiqo oo biririf ah. Waqtiga qadadu waxa uu qaadanayaa muddo 2saacadood (12:30 ilaa 14:30) ama si waafaqsan dhaqanka maxaliga ah.
Bilawga iyo dhamaaada maalinkasta oo tababarka lagu jiro, 10-15 daqiiqo ayaa lagu isticmaali doonaa in dib loo naqtiimo casharadii hore loo qaatay. Marka tababarku dhamaado, ardaydu waxa ay u fariisan doonaan imtixaan ka kooban laba qaybood: qaybta koobaad waxa ay ka koobantahay laylis qoraal ah halka qaybta labaadna ka koobantahay qayb lagu qaadanayo waaxda bukaan socodka.
Jadwal ayaa la sameeyay waxaana laga heli karaa cutubka 12iyo 13.

## Habka loo marayo tababarka

Waxabarashadani waxa ay ku salaysantahay habka ka qaybqaadashada firfircoon ee wax barista si ay uga taageerto ardaydu in ay fahmaan xogta, xaliyaan mashaakilka aanay tijaabiyaan xirfaddooda.

## Agabka tababarka

Adeegayaasha caafimaadka ee tuulooyinka waxa la siin doonaa agabka soo socda:
Buugga ardayga (ACT)
Tusayasha taxan (ACT)
Sanduuqa daawaynta (ACTs)
Foomka waxa lagu qoro (ACT).

# 3. Jadwalka Adeegayaasha Caafimaad ee tuulada

| WAKHTIGA | XIISADDA | HABKA BARISTA | |
|---|---|---|---|
| **Morning/ Afternoon:** 6 hours, 45 minutes | **Hordhaca tababarka.** | | MAALINTA 1 |
| | **Hordhaca ku saaHabraaca taxan.** | **Jaantus – Tusaale.** | |
| | Habraac 1Hubi Calaamadaha Guud ee Qatarta ah CGQ. 1. | Casharka Tababaruhu bixinayo. **Layliyada 1, 2 iyo 3.** | |
| | 2nd CGQ. | Casharka Tababaruhu bixinayo. | |
| | 3rd CGQ.<br>Baar Calaamahada Nafaqo darada.<br>Baan/Nafaqo Ma Qabo. | Casharka Tababaruhu bixinayo. **Layliga 4**. | |
| | Dib u eeg: Hubi Calaamadaha Guud ee Qatarta ah. | Layilga fiidiyaha<br>**C- QAYBTA 1.** | |
| | Qiimee oo kala saar Jirro aad u daran. | Casharka Tababaruhu bixinayo. **Layliyada 5, 6.** | |
| | Foomka qoraalka. | Tusaalaha Tababaraha. **Layliyada 7, 8, 9.** | |

| WAKHTIGA | XIISADDA | HABKA BARISTA | |
|---|---|---|---|
| **Subaxdii:** 3 Saacadood | **Bukaan socod –** Qiimee oo kala saaris u samee Calaamadaha Guud ee Qatarta ah. | | MAALINTA 2 |
| **Galindambe:** 3 saacadood iyo 30 daqiiqo | Hordhaca sanduuqa:<br>**Dhamistir qiimaynta oo u gudub Tusaha Habraaca 2C, 3C, 4C.** | **Layliga 9.** | |
| | "Does the child have cough or difficult breathing?"<br>Measuring breathing rate. | Trainer's presentation.<br>**Exercise** - Drill 10<br>**Video exercise C- PART 2**<br>**Exercise 11** – Drill. | |
| | Qiimee oo kala saar Oof wareen daran. | Casharka Tababaruhu bixinayo. **Layliga 12.** | |
| | Qiimee oo kala saar Oof wareen daran. | Casharka Tababaruhu bixinayo. **Layliga 13v.** | |
| | Qiimee oo kala saar haddii aanu Oof wareen daran jirin (duray caadi ah). | Casharka Tababaruhu bixinayo. **Layliga 14.** | |

**MAALINTA 3**

| WAKHTIGA | XIISADDA | HABKA BARISTA |
|---|---|---|
| **Subaxdii:**<br>3 saacadood | **Bukaan socod –** Qiimee oo kala saaris u samee Calaamadaha Guud ee Qatarta ah iyoQufaca ama neefsiga oo adkaaday. | |
| **Galindambe:**<br>3 saacadood<br>iyo 30 daqiiqo | "ilmuhu ma shubmayaa?"<br>Hubi oo ka eeg calaamadaha fuq baxa. | Hordhaca Shubanka. |
| | Qiimee oo kala saar fuuqbaxa daran. | Casharka Tababaruhu bixinayo. **Layliga 17, 18.** |
| | Qiimee oo kala saar fuuqbaxa xoogay ah. | Casharka Tababaruhu bixinayo. **Layliga 19, 20.** |
| | Qiimee oo kala saar marka aanu jirin Fuuq bax. | Casharka Tababaruhu bixinayo. **Layliga 21.**<br>**Layilga fiidiyaha G:**<br>and Case Study. |

**MAALINTA 4**

| WAKHTIGA | XIISADDA | HABKA BARISTA |
|---|---|---|
| **Subaxdii :**<br>3 saacadood | "ilmuhu xummad ma leeyahay?"<br>Qiimee haddii ilmuhu xumad leyaha ama qoortu adkaato.<br><br>Hordhaca RDTga.<br>**Bilow barashada samaynta RDT.** | Hordhaca Xumadda Casharka Tababaruhu bixinayo.<br>**Layilga fiidiyaha L**<br>Casharka Tababaruhu bixinayo.<br>**Layliyada 22, 23, 24, 25, 26, 27, 28.**<br>Hordhaca RDT. Ku barbarashada sida loo sameeyo RDTga. |
| **Galinka dabmbe:**<br>3 saacadood<br>iyo 30 daqiiqo | Sii wad barashada RDT<br>Ka eeg nafaqo darro dhexdhexaad ah ama daran.<br>Sooc nafaqadarad daran iyo ta dhex dhexaadka ah adiga oo adeegsanaya MUAC. | **Layliyada : K-1, K-2.**<br><br>**Layliyada : J -1, J- 2.** |

MAALINTA 5

| MUDDADA | XIISADDA | HABKA BARISTA |
|---|---|---|
| **Subaxdii:** 3 saacadood | **Bukaan socod –** qiimee oo kala saar carruurta qabta mid ka mid ah sadexda xaaladood. | |
| **Galinka dambe:** 3 saacadoodiyo 30 daqiiqadood | **Dibu Eegis.** **Hordhaca daawooyinka afkalaga qaato iyo sanduuqyada daawaynta.** **SANDUUQ 1/V:** Bar hooyada sida loo siiyo kiniinka guriga dhexdiisa. **SANDUUQ 2/V:** Sida loo diyaariyo ORSta. | Casharka Tababaruhu bixinayo iyo tusaalaha. |
| | **SANDUUQ 3/V:** kiniin amoxycillin oo loo qadanayo xaaladaha daran. **SANDUUQ 4/V:** kiniin amoxycillin ah oo la siinayo carruurta qabta oof wareenka. | **layli 1-2** Drill. **layliyga 3.** **layliga 4:** *Matalaad.* **layliyada 5, 6.** **ayli 7 –** Drill. |

MAALINTA 6

| MUDDADA | XIISADDA | HABKA BARISTA |
|---|---|---|
| **Subax:** 3 saacadood | **Bukaan socod –** Qiimee, kala saar oo daawee dhammaan carruurta. Carruurta lagu arko CHG, Qufac iyo neefsiga oo ku adkaada iyo xummad. | |
| **Galindambe:** 3 saacadoodiyo 30 daqiiqadood | **DIBU EEGIS** **SANDUUQ 5/V Qorshaha C:** Daawee fuuq laaanta daran. | Casharka Tababaruhu bixinayo iyo tusaalaha. **layliyada 8** – Drill. **layliyada 9, 10, 11.** |
| | **SANDUUQ 6/V Qorshaha B:** Treat some dehydration at home with ORS. | **layliyada 12 -** Drill. **layliyada 13 - Matalaad, qaybaha 1& 2.** |
| | **SANDUUQ 7/V Qorshaha C:** shubanka ku daawee ORS adoo guriga jooga. | Casharka Tababaruhu bixinayo iyo tusaalaha. **Layliyada 14, 15.** **Layliyada 16** - Drill. **layliga 17** – Matalaad. |
| | **SANDUUQ 8/V:** Ku daawee Zinxw ilmaha shubanka qaba. | Casharka Tababaruhu bixinayo iyo tusaalaha. **Layliga 18** - Drill. |

| MUDDADA | XIISADDA | HABKA BARISTA | |
|---|---|---|---|
| **Subax:** 3 saacadood | **Bukaan socodka** – qiimee, kala saar oo daawee carruurta. | | MAALINTA 7 |
| **Galindambe:** 3 saacadood, 30 daqiiqadood | **DIBU EEGIS KU SAMEE**<br>**SANDUUQ 9V:** Ku daawee ilmaha Rectal Artesunate.<br><br>**SANDUUQ 10V:** ku daawee ilmaha Artesunate/SP tablets.<br><br>**SANDUUQ 11/V:** Sii dareere leh sonkor ama malab. | Casharka Tababaruhu bixinayo iyo tusaalaha.<br><br>**Layliga 19, 20**- Drill.<br>**Layliyada 21.** | |

| MUDDADA | XIISADDA | HABKA BARISTA | |
|---|---|---|---|
| **Subax:** 3 saacadood | Imtixaanka kama dambaysta ah iy falanqaynta.<br>Qaybinta daawooyinka iyo xirista. | Final Tests: **Layli 22**<br>1st phase: written Layli;<br>2nd phase: outpatient session. | MAALINTA 8 |

# 4. Habka barista

Qaybtani waxa ay tilmaamaysaa habka barista ee la adeegsanayo inta lagu gudo jiro duruustan.

**Matalaad**
Iska dhigista macnaheedu waa in aad qaadato doorkii qofkale lahaa xaalad gaar ah – matalid. laylisyada Iska dhigistu waa qaar muhiim ah marka la barayo cid xiriirka iyo xirfadaha go'aan qaadashada. Waxa loo adeegsadaa in la isku tusiyo xaalado si qofkastaaba u fahmo dareenka iyo falcelinta.

- Iskadhigistu waa in ay yeelataa ujeedo cad waxaanay u baahantahay in si taxadar leh loo qorsheeyo;
- Abuur xaalad fudud oo leh laba ilaa afar qof oo matala;
- Dadka matalaya waxa la siinaya tilmaan ku saabsan kuwa ay yihiin iyo xaaladda. Sii wakhti ay ku diyaar garoobaan;
- Faahfaahinta oo fara badataa waxa ay keeni kartaa in dadka matalaya ay ku adkaato In ay raacaan tilmaamaha; Explain to the learners what they should look for during role play;
- Tababaraayashu waa in ay u sharxaan fasalka doorka uu qaadanayo qofkasta oo ka qayb qaadanaya matalaada iyo xaaladda;
- Usharax ardayda waxa ay ka filan karaan inta matalaadu socoto;
- Hubi in xogta la sheegay ay sax tahay iyo xirfadda xiriir ee la adeegsaday;Xaaladda waxa matalay dadka matalaya;
- Xaaladda waxa matalay dadka matalaya;
- Matalaadu iskeed haw dhamaato ama tababaraha ayaa go'aansan kara in ay inbadan socotay oo ku filan in wax lagu barto oo joogin kara;
- Marka ay matalaadu dhammaato, Tababaruhu waxa uu hagayaa falanqaynta si uu xoogga u saaro meelaha u muhiimka ah waxbarashada iyo in uu soo koobo kalfadhiga. Tababaruhu waa in uu su'aalo waydiiyaa halkii uu jawaabo ka bixin lahaa.

**Falanqayn fasalka dhexdiisa**
In fasalka dhexdiisa wax lagu falanqeeyaa waxa ay siisaa ardayda fursad ay ku muujin karaan fikradahooda ku aadan hadba waxa laga hadlayo.

- Tababaraha ayaa hagaya falanqaynta;
- Habkan waxa loo adeegsan karaa arimaha adag ee casharka ku jira ama marka waxa laga hadlayaa dhamaadaan si loo naqtiimo;
- Falanqaynta fasalka dhexdiisu waa qaar laba geesood ah oo dhex mara Tababaraha iyo ardayda;
- Waa hab ay ka qaybgalayaashu dib u eegis ugu samayn karaan waaya aragnimadooda kuna xoojin karaan wixii ay barteen;
- Habka su aalaha loo waydiinayo ardayda inta falanqayntu socotaa waa mid muhiim ah. Waxa si aad ah loogu talinayaa in la adeegsado su'aalo xiran sida "ma ku raacsantahay wixii hadda la yiri" halkii aad ka oran lahayd "sideed u aragtaa aritnaas";
- Hab dhakhso ah oo lagu ogaan karo waxa fasalku fahmay ama xasuusan karo, iyo in laga faaloodo fikradaha ama lasaxo khaladka; During the discussion, all the learners should be able to see everyone else's face and be close enough to hear each other comfortably.
- Inta falanqayntu socoto, araday kastaa waa in uu arki karo wajiyada ardayda kale una dhawaan karaa si ay isu maqli karaan si wanaagsan.

**Wada shaqayn**

Ardayda waxa loo qaybinayaa kooxo shaqo oo yaryar kuwaasoo ka kooban 5-10 qof. Koox kastaa waxa ay falanqaynaysaa waxa laga hadlayo haddii ay suura galtahayna waxa ay xalinaysaa mushkilad. Barista noocan ah waxa loo adeegsan karaa in lagu gaaro ujeedooyin badan.

- Adeegso waxyaalo hore loosoo bartay, waxyaalo aan cusbayn;
- Si falanqayntu u noqoto mid wanaagsan, waa in koox kastaa qorto go'aamada ama fikradaha oo kooban;
- Dhiiri gali in arday kastaa si firfircoon uga qayb qaato;
- Kuwa aan hadlayn su'aalo waydii, kuwa hadlaya inbadan u sheeg in ay sugaan inta kuwa kale ka helayaan fursada ay ku hadlaan;
- Qorshee goorta la joojinayo;
- Isu keen fasalka oo falanqee waa kooxdu qortay;
- Waydii ardayda in faaladoodu tahay xaqiiyo iyo in ay tahay fikrad uun;
- Sax khaladaadka laga galayo xaqaaiqa goorta ay dhacaan;
- Diiradda saar fikradda dhextaalka u ah falanqaynta;
- Matalaadu iskeed haw dhamaato ama tababaraha ayaa go'aansan kara in ay inbadan socotay oo ku filan in wax lagu barto oo joogin kara.

**Layli**

Inta lagu jiro duruustan, layli ayaa la adeegsan doonaa marka la bartay kadib xaddi habboon iyo jadwalka daawada. Tani waxa ay u sahlaysaa ardaydu in ay isku dayaan in ay xusuustaan xogta adeegayaasha caafimaadku u baahanyihiin marka ay daawaynayaan carruurta bukta.

***Si loo sameeyo layligal:***

- Isu soo uruuri ardayda una sheeg in layli la samayn doono;
- U sharax habka layliga;
- Usheeg ardayda in aanay tani imtixaan ahayn;
- Ugu yeer ardayda hal hal si ay uga jawaabaan su aalaha, si nidaamsan ugu yeer, iyaga oo miis ku wareegaya. Haddii arday ka jawaabi kari waayo su aal, ka kuxiga u yeer oo waydii su'aasha marlabaad;
- Ardaydu waa in ay sugtaa in loo yeero una diyaar garawdaa in ay ka jawaabaan su aalaha si dhakhso ah. Tani waxa ay gacan ka gaysanaysaa in layligu noqdo mid la xiiseeyo;
- Waydiii ardayda in ay wax su aal ah ka qabaan habka layliga;
- U ogolow ardaydu in ay dib u eegis ku sameeyaan tallaabooyinka daawaynta daqiiqadao yar ka hor inta aanu bilabmin layligu. Ardaydu waa in ay eegaan sexaaradaha daawaynta si ay dib u eegis ugu sameeyaan tallaabooyinka. Ardaydu waa in ay eegaan sexaaradaha daawaynta inta layligu socdo, hase ahaatee waa in ay isku dayaan in ay ka jawaabaan su aalaha iyaga o aan eegayn;
- Ku bilaw layliga adiga oo ka jawaabaya su aasha koobaad.

**Tusaalayaasha Tababaraha**
Tababaruhu waxa uu tusaale ka bixin doonaa sida loo qabanayo waxyaalaha qaar, sida tusaale ahaan loo qaybinayo kiniinka ama loo burburinayo, loo diyaarinayo milanka ORS, iwm.
Tusaalaha Tababaraha waxa inta badan loo adeegsadaa in lagu barto xirfado.

**Tababaruhu waxa uu tusaale ku bixinayaa waxyaalah hadhow ardaygu samayn doono.**

Go'aan ka gaar xirfadda ay tahay in la barto, iyo tallaabooyinka ay tahay in la qaado.

- Tusaaluhu waa in uu intii suura gal ah u dhawaadaa xaqiiqada, waxa wanaagsan in uu tusaaluhu noqdo xaqiiqada lafteeda;
- Tusaaluhu waa in uu noqdaa mid ay wada arkayaan dhammaan ardaydu (kooxo ka dhig ardayda tusaalena u samee koox kasta);
- U sharax waxii la sameeyey iyo sababta loo sameeyey marka tallaabo walba la muujinayo;
- Arday kasta waa in uu tijaabiyo xirfadda kasta, haddii ay suuro gal tahay, ilaa inta xirfadda laga wada baranayo;
- Waydii su aalo si loo hubiyo in xirfadda la bartay.

## CAAWIMO KU SOCOTA TABABARAHA

- Qorshee casharka diyaarina agabka loo baahanyahay maalin ka hor inta aan casharka la bixin;
- Ha fariisan gadaasha miiska wax lagu qorayo;
- Adeegso erayo fudud oo aan mugdi ku jirin;
- Marka aad adeegsanayso sawirada, waraaqaha wax lagu sawiro tus inta wali laga hadlayo wixii markaa laga hadlayo;
- Dhammaan tababarayaashu waa in ay si firfircoon uga qayb qaataan qayb kasta, si ay gacan usiiyaan Tababaraha kale ee darsiga bixinaya;
- Dhagayso su aalaha ardayda iyo codsiyadooda;
- Keen su aalo cadayn kara ujeedada;
- Si togan uga jawaab su aalaha, tusaale ahaan, "Haa, waan fahamsanay waxa aad u jeedo" ama "Taasi waa su aal wanaagsan";
- Hadalka ha badin, ka hadashii ardayda;
- Haku helaan dhiiri galina ardayda si ay kuugu yimaadaan marka ay su aal qabaan iyo marka ay u baahan yihiin in aad wax ka faalooto;
- Goorta kalfadhigu dhammaado, sii ardayda faallooyin togan oo ku saabsan shaqada ay qabteen;
- Shaqo kale ha qaban inta darsigu socdo.

## XUSUUSIYAAAL KU SOCDA TABABARAYAASHA

### Barista iyo barashada

| BARIS |
| --- |
| *Baristu waa isdhexgal ay sameeyaan ardayda iyo macalinku.* |
| Ujeedada laga leeyahay baristu waa in laga caawiyo in ardaydu:<br>• Bartaan, weeleeyaan isla markaana adeegsadaan aqoonta;<br>• Fahmaan, lafa guraan iyo in ay qiimeeyaan;<br>• In ay xirfad helaan;<br>• In dhaqan fiican ay yeeshaan;<br>• Diirad caafimaad qabta nolosha ku eegaan. |

Si aad wax u barto ardayda, waxa aad u baahantahay in aad xiriir la samayso.
Ma fududa ini xiriir guulaysan kara la sameeyo hase ahaatee xiriir wax ku ool ahi waxa auu wax ka badali kara hab dhaqanka dadka iyo sida ay wax u arkaan.

**BARASHO**

*Barashadu waa hab u ogolaada in dadku ay weeleeyaan xog u hogaamin karta in aragtidooda iyo dhaqankoodu is badalo.*

Barashadu waa hab u ogolaada in dadku ay weeleeyaan xog u hogaamin karta in aragtidooda iyo dhaqankoodu is badalo.

- In si qunyarqunyar ah loo badalo dhaqanka ardayga iyada oo taa loo marayo ficil, ku celcelin iyo waaya aragnimo;
- Inta badan ma aha wax si toos ah loo arki karo.

**XUSUUSNOW**

*Doorka Tababaruhu waa in uu hago isla markaana fudaydiyo barashada iyo in uu ka kaalmeeyo ardayda in ay ka masuul noqdaan waxyaalaha ay sameeyaan.*

# 5. Doorka tababaraha iyo waajibaadkiisa

Doorka iyo xilka Tababaraha ee hoos lagu tilmaamay waa qaar ay ka simanyihiin sadexda nooc ee kala duwan ee tababaradu.

**Waxyaalah ay tahay in la qabto tababarka ka hor:**
Tababaraha ay tahay in uu soo qabanqaabiyo daruustu waxa uu u baahanayahay in uu qabto waxyaalahan:

- Dooro qof ka masuul ah qorshaynta:
  - Halka ay seexanayaan ardayda iyo Tababarayaashu;
  - Goobta waxbarashada;
  - Keydinta iyo qaybtinta agabka waxbarasho.
- Qor liiska agabka loogu baahanyahay waxbarashadan dalabna agabkan;
- Soo qaban qaabi kulan lala yeesho hogaamiyayaasha degaanka si aad ugala hadasho duruusta, ku casuun in ay furaan, kana codso in ay idinka caawiyaan hawlaha degaanka;
- Dooro cunto kariye diyaarin kara cuntooyinka inta duruustu socoto;
- Ku wargali ardayda iyo Tababarahaba goorta ay bilaabmayaa duruustu maalmo ka hor inta aanay bilaabmin duruustu;
- Qorshee sidii ay u iman lahaayeen ardayda iyo Tababarayaashu goobta waxbarashada maalin ka hor inta aanay bilaabmin duruustu;
- Tus halka ay seexanayaan iyo halka ay waxbarashadu ka dhacayso;
- Usheeg ardaydu in ay is diwaan galiso;
- La kulan Tababarayaasha iyo/ ama hawl fududeeyayaasha si aad ugu qaybiso hawlaha loona diyaariyo agabka waxbarashada.

**Waajibaadka Tababaraha inta duruurstu socoto:**

- Hubi in aad haysato agabka loogu baahanyahay casharka;
- U habee in ay u fariistaan ardaydu qaab goobo-bar ah  si ay dhammaan isu arki karaan;
- Ka hor inta aadan bilaabin darsiga, isu sheeg ardayda magacaagana ku qor sabuuradda ama warqadda gidaarka ku dhajisan;
- Usheeg ardayduna in ay is bartaan;
- **SII ACT  KASTA TIRO TAYSARO (waxa ay ku adeegsan doonaa foomka qoraalka);**
- Usheeg ardayda qayb kasta, habka aad wax u barayso iyo ujeedada waxbarashadan;
- Hubi in arday kastaa fahmay waxa laga hadlayo inta darsigu socdo;
- Sii xog haddii ardaybgu wareero;
- Hogaami hawlaha kooxaha si aad u hubiso in ujeedadii waxbarashada la gaaray;
- Dhiiri gali ardayda adiga oo ku amaanaya jawaabaha saxda ah ee ay bixiyaan iyo horumarka ay sameeyaan.

# 6. Kalfadhiga bukaan socodka

Layli ah kulan lala yeesha dadka bukaan socodka ah ayaa qayb muhiim ah ka ah tababarkan. Tababarkani waxa uu bixiyaa layli maalinle ah iyada oo la adeegsanayo xirfadda maaraynta xaaladaha si ardaydu ay si wanaagsan ugu qaban karaan marka ay ku guryo noqdaan tuulooyinkoodii.

Aradydu waxa ay baranayaan xirfado marka ay akhriyaan qaybaha buugyaraha ACT ama ay daawadaan tusaalayaasha cajaladaha fiidiyaha.  Waxa ay adeegsadaan xogta iyaga oo markaa qabanaya layliyo qoran ama daraasado ku saabsan xaalado. Ugu dambayntii, oo ahna ta ugu muhiimsan, layligan caafimaad, ardaydu waxa ay la kulmayaan carruur dhab u bukta/jiran.

**Ogow:**
*waa in uu jiro hal hawlfududeeye koox kasta oo ka kooban laba ilaa lix arday.*

Kalfadhiyada bukaan socodku wax ay ka dhacayaan goobaha bukaan socodka lagu daaweeyo. Ardayda waxa loo qaybinayaa laba kooxood. Koox kasta oo arday ahna waxa korjoogtaynaya hawl fududeeyayaasha. Kalfadhiyada bukaan socodku waxa diiiradda saarayaan sidii loo bari lahaa ardayda sida loo maareeyo xaaladaha carruurta jiran.

Kalfadhiyada bukaan socodka, ardaydu waxa ay:

- Arki doonaan carruur bukta oo waalidkood xarunta caafimaadka keeneen;
- Waxa ay baran doonaa sida loo qiimeeyo looguna kala saaro carruurta jiran hab ku salaysan  habraaca Tusaha.
- Waxa ay baran doonaan sida loogu daaweeyo carruurta hab waafaqsan sanduuqa daawaynta;
- Waxa ay baran doonaa sida loogala taliyo hooyooyinka cuntada, dareerayaasha, iyo goorta lasoo noqdo;
- Waxa ay baran doonaan habka loo adeegsado xirfadaha xiriirka marka wax la qiimaynayo, la daawaynayo iyo marka la dardaarayo hooyada dhashay ilmaha jiran.

**Doorka hawl fududeeyaha inta kalfadhiga bukaansocodka lagu jir:**
Doorka hawl fududeeyuha inta kalfadhigu socdaa waa:

- In uu si taxdar leh u diyaariyo kalfadhiga bukaan socodka;
- In uu u sharxo kalfadhiga ujeedooyinka iyo in uu hubiyo in ardaydu garanayso waxa la samaynayo inta lagu guda jiro kalfadhiga bukaan socod kasta;
- muujiyo xirfadaha maaraynta xaaladaha ee ku muujisan shaxanada;
- u muujiyo xirfadaha sida ay tahay in ay wax u sameeyaan ardaydu marka ay ku noqdaan xarumahoodii caafimaadka;
- lasocdaan horumarka ardaydu samaynayso inta lagu jiro kalfadhiyada bukaan socodka iyo in ay tilmaanta iyo warbixinta loo baahdo hadba bixiyaan;
- in la heli karo si ay uga jawaabaan su'aalaha;
- hogaamiyaan falanqaynta si ay u soo koobaan ulana socdaan waxqabadka ardayga;
- Adeegsadaan liiska hubinta si ay ula socdaan adeegayaasha caafimaadka ee tuulooyinku si ay u qoraan waxqabadaka ardayga iyo xaaladda hadba la maareeyey.

**Ka hor inta aanu kalfadhiga bukaan socodku bilaabmin**

1. Soo booqo halka aad ku qaban doonto kalfadhiga bukaansocodka. Ujeedada booqashadani waa in aad is barto xarunta adiga iyo cidda gacan kaa siinaysa hawlfududaynta iyo in aad hubiso in dhammaan waxyaalihii loo baahnaa la qabtay.

2. La kulan shaqaalaha caafimaadk si aad u hubiso in dhammaan wixii maamulka iyo tas-hiilaad loo baahnaa la sameeyey.

3. Hubi in shaqaale caafimaad oo caadi ah sida kalkaaliye loo qoondeeyey in ay ka caawiso hawlaha layliga caafimaadka. Kalkaalisadu waaa:
   - In ay soo soocdo carruurta ku habboon kalfadhiga caafimaad marka ay yimaadaan waaxda bukaan socodka;
   - U diyara garaysaa in ilmaha iyo hooyadii ka baxaan kuyuuga caadiga ah oo ay arkaan ardaydu;
   - Ku celisaa ilmaha goobta ku haboon ee uu ka heli karo daawayn iyo daryeel.

4. Hubi in bukaanka la eegay inta lagu guda jiro kalfadhiga bukaan socodku ay heleen daawaynta ay u baahanyihiin. Go aami hadii hawl fududeeyayaasha ama ardaydu ay siin karaan daawo hooyaada ayna siin karaan xadiga u horeeya, ama haddii bukaanka loo gudbinayo shaqaalaha caadiga ah ee xarunta caafimaadka si ay u daaweeyaan.

5. Hubi in shaqaalaha lagala hadlay waxa ardaydu qaban doonto inta kalfadhigalayliga ahi socoto.

6. Hubi in Habraaca Tusahat, Saxaaradaha daawaynta iyo agabka diwaangalintu in ay diyaar yihiin.

7. Marka aad soo booqanayso marka kobaad, hubi in goobta caafimaadka laga heli karo daawooyinka iyo agabka kale e loo baahanyahay si loo qabto hawlaha carbiska.

**Waxa lagula soconayo kalfadhiga bukaan socodka**
Liiska wax laga hubinayo marka la rabo in lala socdo daryeelka caafimaad ayaa ay adeegsan doonaan hawl fududeeyayaasha iyo Tababarayaashu si ay u qiimeyaan xirfadaha ardayda ee la adeegsaday markii lala tacaalayay xaaladaha dhabta ah waaxda bukaan socodka.

Tababarayasha iyo hawl fududeeyayaashu waxa ay raaci doonaan tilmaamaha hoos ku qoran:

- La soco sida ardaydu u maaraynayaan ilmaha;
- Sax khalad kasta (iskuday in aad ku kaliftto in uu raaco ardaygu dariiqa saxa ah, halkii aad uga sheegi lahayd waxa uu samaynayo);
- Ka jawaab su aal kasta mugdigana kasaar wixii madmadaw galo;
- U buuxi waxyaalaha ay tahay in la buuxiyo si tallaabo tallaabo ah iyo adiga oo raacaya sida ay u kala horeeyaan;
- Qor wixii aad aragto iyo faalooyinkaba;
- Ka sii war-celin dhakhso ah ardayga, ku ammaan wixii uu si wanaagsan u qabtay tilmaanna waxyaalaha anu ku fiicnayn sidoo kale.

Faahfaahino dheeraad ah oo ku saabsan sida loo adeegsado waxyaalaha wax lagu qoro ayaa laga heli karaa bogga kan xiga.

# 7. Waajibaadka adeegaha caafimaad ee tuulada

Adeegayaasha caafimaadka ee tuuladu waxa ay samayn doonaan waxyaalaha soo socda:

- Kusoo booqo ilmaha guriga;
- Qiimee, kala saar adiga oo isla markaana daawaynaya carruurta da'doodu ka dhaxayso 2bilood ilaa 5sanno adiga oo markaa adeegsanaya Habraaca Tusaha, iyo sexaaradaha daawaynta;
- Kula tali hooyada daawaynta guriga, goorta ay soo noqonayso si loo eego marlabaad ilmaha, sida ay ku garanayso calaamadaha xaaladaha halista ah si ay hore ugu soo laabato;
- Keydi dhammaan xogta ku taal foomamka wax lagu qoro;
- La soco ilamaha adiga oo adeegsanaya qaybta foomka xogta lagu qoro ee xiriirka la leh lasocoshada;
- Gudbi caruurta xaaladdoodu aadka u darantahay, lana socodsii in hooyada ay soo wargeliso ACT marka ay soo laabato.
- Give the mother the Referral/Back Form and advise her to return to you when the child will be back from the health facility;
- Haddii in dhakhtar loo diraa aanay suuro gal ahayn, la soco xaaladda ilmaha lixdii saacadood ee kasta, haddii ay suuro gal tahay.

# 8. Agabka iyo tilmaamaha sida loo kormeero act

## a. Waajibaadka

Korjooguhu waa qofka dabagalka kusameeya hawlaha adeegayaasha caafimaadka ee tuulooyinka meelaha tuulooyinka ah. Isaga/iyadu waa qofka muhiimka ah ee bixiya taageerada farsamo, talada iyo sharaxaadaha dheeriga ah iyo xogta si ay uga caawiyaan in adeegayaasha caafimaadku hagaajiyaan tahayada waxqabadkooda.

Waajibaadka korjooguhu waa:

- Deji qorshe booqasho oo aad ugu tagayso adeegayaaasha caafimaadka ee tuulooyinka goobahooda todobaadkiiba hal mar ama labadii todobaadba mar;
- Sii wargali guddoomiyaha iyo adeegayaasha caafimaadkaba booqashada kuu qorshaysan;
- Eeg sida adeegayaashu qiimaynta u samaynayaan, ukala saarayaan, u daawaynayaan carruurta talooyinna usiinayaan hooyooyinka;
- U adeetso liistada hubinta si aad u qorto dhammaan xogta, adiga oo raacayaa tallaabooyinka ku liistaysan;
- Ku ammaan adeegayaasha waxa ay sida wanaagsan u sameeyaan;
- Sax wixii khalad ah, cadee wixii madmadaw ku jiro kana jawaab wixii su aalo ah;
- Buuxi liistada hubinta;
- U sheeg adeegayaasha caafimaadka wixii ka soo baxay korjoogtayntaas.

## b. Tilmaanta sida loo adeegsanayo warbixinta bilaha ee lagula soconayo daryeelka ay sameeyaan ACT

Tan waxa loogu talagalay in korjooguhu u adeegsado la socoshada iyo qiimaynta waxqabadka adeegaha caafimaad ee tuulada.

Korjooguhu waxa uu u adeegsan doonaa liiskan in uu:

- Ka warbixiyo dhammaan xaaladaha uu ku qoray adeegaha caafimaad ee tuuladu foomka  wax lagu qoro iyo/ama.
- Qor dhammaan xogta ku saabsan sida loo arko waxqabadka adeegayaasha caafiamaad ee tulada in korjoogtayntu socoto.

Korjooguhu waxa uu u buuxin doona liiska hubinta sidan soo socota:

Eeg xagga sare ee liiskaaga hubinta adiga oo ka bilaabaya dhanka bidixna waxa aad qortaa:

- **Taariikhda:** malinta/bisha/sannadka;
- **Magaca adeegaha:** magaca adeegaha caafimaad;
- **Tirada adeegaha :** tirada loo qoondeeyey ardayga markii uu tababaruku bilaabmayay. Waxa loo tixgalinkaraa tirada aqoonsiga ahaan;
- **Magaca tuulada:** magaca tuulada uu adeegaha caafimaadku ka shaqaynayo;
- **korjoogaha:** magaca korjoogaha;

- Korjoogtaynta waxa la sameeyey iyada oo si toos ah loola socanayay carruur tiradoodu dhantahay: ____: qor wadarta tirada carruurta adeegaha caafimaadku soo booqMAALIN inta aad korjoogtaysay;
- **Tirada ardayda safka koobaad fadhiya:** tiro hore loosii daabacay (sii qoran) oo ka turjumaysa kala hormarintii ay raaceen shaqaalaha caafimadku goortii ay soo booqanayeen carruurta. Tusaale ahaan: ilmaha 1aad waa ilmihii koobaad ee la soo eegay. Korjooguhu waxa uu tiradan ku qorayaa foomka wax lagu qoro;
- **Safka labaad, da'da ilmaha oo bilo ah:** kaga warbixi da'da ilmaya yar adiga oo bilo adeegsanaya;
- Taxa(liiska) hubintu waxa uu ka koobanyahay xariiqo jiifa iyo qaar taagan, waxa lagu daabacaa labada dhinac (A iyo B) waxaanu u qorshaysan yahay sidan soo socota;
- Joog u taxa koobaad waxa aad ka helaysaa dhammaan calaamadaha ay tahay in uu eego oo uu waydiyana si uu u qiimeeyo ilmaha, kala saaro, u daaweeyo ulana taliyo.

**DHINACA A:**

- Adiga oo ka bilaabaya joogu taxa 2aad ilaa laga gaaro ka 13aad waxa aad arki doontaa in joog utax kastaa tiro leeyahay (1-12). Tiro kastaa waxa ay u taagantahay hal ilm;
- Joog u taxa u dambeeya waxa loogu talagalay qorista wadarta tirada kalasaaridaha, kiniinada amoxicillin, Artesunate/SP iyo xirmooyinka ORSta ah;
- Ku samee calaamadda (v) calaamad kasta oo uu ku qoray adeegaha caafimaadku meeshii ku haboonayd l, adiga oo kucalaamadinaya xarafka : - **"Q"** (Qalad) soocid kasta oo qaldan iyo daawo iyo adiga oo "S" ku calaamadinaya soocis kasta oo saxa iyo daawayn. **Goobaabo gali kala saarista dhabta ah ee saxan (xattaa hadii ACT calaamadiyay tii qaldanayd);**
- Xaga hoose ee joog u taxa koobaad waxa aad ku arki kartaa liiska daawaynta iyo liiska waxa laqabtay. Waxa aad warbixinta ku qori joog u taxa ku habboon tirada kiniinka ah ama xirmooyinka ORS ta ah ee la siiyay;
- Waxa aad ka warbixin doontaa tirada carruur ah ee ee la gudbiyay iyo haddii taasi suuro gali wayd., inta dhimataya iyo inta caafimaaday;
- Gabagabada korjoogtaynta, xisaabi wadarta tirada kala saarisaha saxa iyo kuwa qaladka ah , iyo walibta wadarta tirada kiniink ah ama ORS ta ah ee la bixiyay.

**DHINACA B:**

- Sidaa aad arki karto, ma jiro wax farqi ah oo u dhaxeeya labada dhinac A iyo B.,ilma kasta waxa uu leeyahay hal number.

# LIISKA HUBINTA EE LASOCODKA DARYEELKA CAAFIMAAD EE AY BIXIYAAN ACT A

Taariikhda__________ Magaca ACT ________________________________ Tirada ACT°____________ Magaca tuulada__________ Korjoogaha ______________

| Tirada Ilmaha | | | | | | | | | | | | | Tot S | Tot Q |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| Da'da ilmaha oo bilo ah | | | | | | | | | | | | | | |
| Jinsige carrurta ( R) (D) | | | | | | | | | | | | | | |
| **AAN AWOODIN IN UU WAX CABBO AMA NAASKA NUUGO** | | | | | | | | | | | | | | |
| Aan awoodin in uu wax cabbo ama naaska nuugo | | | | | | | | | | | | | | |
| Wuu Matagayaa Wax kasta Oo La Siiyo | | | | | | | | | | | | | | |
| Qalal | | | | | | | | | | | | | | |
| Si aan caadi ahayn u hurdaysan ama aan toosi Karin | | | | | | | | | | | | | | |
| **CUDUR AAD UDARAN** | | | | | | | | | | | | | | |
| **MALAHA CALAAMAD QATAR GUUD** | | | | | | | | | | | | | | |
| **MIYUU CUNUGU QABAA QUFCAC AMA NEEFSASHADU KU ADAG TAHAY?** Waydii" muddo intee leeg?" | | | | | | | | | | | | | | |
| Feeraha oon kala bixin? | | | | | | | | | | | | | | |
| Miyuu neef tuurayaa? | | | | | | | | | | | | | | |
| **OOF WAREEN DARRAN** | | | | | | | | | | | | | | |
| **OOF WAREEN** | | | | | | | | | | | | | | |
| **QUFAC AMA DURI** | | | | | | | | | | | | | | |
| **MIYUU CUNUGU SHUBMAYAA?** Muddo intee dhan? | | | | | | | | | | | | | | |
| Saxarada oo Dhiig leh | | | | | | | | | | | | | | |
| Miyay haysaa hurdo aan caadi ahayn ama ay adagta-hay sidii lagu kicin lahaa | | | | | | | | | | | | | | |
| Il go' | | | | | | | | | | | | | | |
| Uusan awoodin inuu cabbo ama uu wax yar cabbi karaa | | | | | | | | | | | | | | |
| U cabbaya si aad ah | | | | | | | | | | | | | | |
| Uusan nasanayn ama uu caraysan yahay | | | | | | | | | | | | | | |
| Aad tartiib u ah (ka badan laba ilbiriqsi | | | | | | | | | | | | | | |
| Tartiib (kan yar laba ilbiriqsi) | | | | | | | | | | | | | | |
| **FUUQ BAX DARAN** | | | | | | | | | | | | | | |
| **XOOGAY FUUQ BAX AH** | | | | | | | | | | | | | | |
| **MA JIRTO FUUQ BAX** | | | | | | | | | | | | | | |
| **ILMUHU MA LEEYAHAY QANDHO?** Muddo intee leeg? | | | | | | | | | | | | | | |
| **QOORTU OO ADKAATA AG** | | | | | | | | | | | | | | |
| **CADUR QANDHO DARAN LEH** | | | | | | | | | | | | | | |
| **MALARIA** | | | | | | | | | | | | | | |
| **MALARIA MAJIRTO** | | | | | | | | | | | | | | |
| **RDT:** POS. | | | | | | | | | | | | | | |
| **RDT:** NEG. | | | | | | | | | | | | | | |
| **RDT:** INV. | | | | | | | | | | | | | | |
| **NAFAQO DAROO BA'AN** | | | | | | | | | | | | | | |
| **MA QABO NAFAQO DARRO BA'AN** | | | | | | | | | | | | | | |
| **TREATMENT** | | | | | | | | | | | | | | |
| AMOXYCILLIN TAB. LASIIYAY | | | | | | | | | | | | | | |
| ORS LASIIYAY | | | | | | | | | | | | | | |
| ZINC TAB. GIVEN | | | | | | | | | | | | | | |
| RECTAL ARTESUNATE SUPP> | | | | | | | | | | | | | | |
| ARTESUNATE 50 MG. BASE TAB. SP 25 MG | | | | | | | | | | | | | | |
| **Tirada carruur ah ee la gudbiyay** | | | | | | | | | | | | | | |
| **Tirada carruur ah aysan suura gelin in la gudbiyo** | | | | | | | | | | | | | | |
| **Tirada caruurta caafimaaday** | | | | | | | | | | | | | | |
| **Tirada caruurta ee dhimatay** | | | | | | | | | | | | | | |
| **TALASIINTA HOOYADA** | | | | | | | | | | | | | | |
| CARUURTA LA GUDBINAYO | | | | | | | | | | | | | | |
| DAAWEYNTA GURIGA /NAFQEYNTA GURIGA | | | | | | | | | | | | | | |
| XAALADA DEGDEG LOOGU SOO CELINAYO | | | | | | | | | | | | | | |

# LIISKA HUBINTA EE LASOCODKA  DARYEELKA CAAFIMAAD EE AY BIXIYAAN ACT  <u>B</u>

Taariikhda __________ Magaca AC T ______________________________ Tirada ACT° __________ Magaca tuulada __________ Korjoogaha __________

| Tirada Ilmaha | | | | | | | | | | | | | Total W | Total R |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| Da'da ilmaha oo bilo ah | | | | | | | | | | | | | | |
| Jinsige carrurta | | | | | | | | | | | | | | |
| **CALAAMADAHA  GUUD EE QATARTA AH** | | | | | | | | | | | | | | |
| Aan awoodin in uu wax cabbo ama naaska nuugo | | | | | | | | | | | | | | |
| Wuu Matagayaa Wax kasta Oo La Siiyo | | | | | | | | | | | | | | |
| Qalal | | | | | | | | | | | | | | |
| Si aan caadi ahayn u hurdaysan ama aan toosi Karin | | | | | | | | | | | | | | |
| **CUDUR AAD UDARAN** | | | | | | | | | | | | | | |
| Kala Saaridii Hore ee Ilmaha ee uu sameeyay ACT: | | |
| Xaalada Ilamaha marka La Geeyay Xarunta Caafimaadka: | | |
| Daawda La Siiyay: | | |
| Talada La Siiyay ACT kana timid Xarunta Caafimaadka: | | |
| Waqtiga la rabo in dib loo celiyo haddii loo baahdo: | Magaca Daaweeyaha: | |

**Warqada Gudbinta iyo Soo Noqoshada**

Sida loo isticmalo referral iyo

**U sheeg ardayda:**
Foomkan waa in la isticmalaa markad u gudbineyso isbital ama rug kalo caafimad ilma aad u dara.

Buuxi fomka meelihiisa la hareeyay, waxaadna siineysa hooyada ilmaha dhashay, adigoo u sharxaya iney siiso meesha ilmaha loo gudbinayo, ka dibna kuu soo celiso adiga, asagoo ay soo buux buuxiyeen shaqalaha rugta caafimaadka markii cunuga laga soo saaro isbtitalka.

**Qofka tababaraha ah**
**Tus fomka ardayda, una sharax leyn leyn sida loo buuxinaayo. U sheeg in fomka u qeyb sanyahay 3 qeybood.**

**Act Foomka diridda iyo soo celinta.**

Qebta kowaad ee fomka diridda waa inuu buuxiyaa adeegaha caafimadka una hayaa.

Qeybta labaad ee fomka diridda waa inuu buuxiyaa adeegaha caafimaadka , kaasoo siinaya hooyada cunugga si ay iyadana u siiso shaqalaha caafimadka ee cisbitalka ama rugta caafimaadka.

Qeybta seddexad ee fomka diridda waxa buuxinaya shaqalaha cafimadka ee cisbitalka ama rugta cafimadka waxayna siinayaan hooyada markii cunuga laga saaraayo cisbitalka.

# FOOMKA QORAALKA

# FOOMKA QORAALKA – BOOQASHADA KOOBAAD

Taariikh ______ Magaca Tuulada ______ Magaca VHW's ______ Nambarka VHW ______

NAMBARKA CUNUGA ______ Magaca Cunuga ______ Jinsi ______ Da'da ______

**Waa maxay dhibka cunuga haysta** ______

| 1st QIIMEE (Sax dhammaan calaamadaha muuqda) | 2nd KALA SAAR (Sax kala saarida adigoo ka tix raacaya calaamadaha) | 3rd DAWEE | 4th WAANI HOOYADA (Sax Waanooyinka oo Dhan) |
|---|---|---|---|
| **WEYDII HOOYADA BAL IN CUNUGU :**<br>WAX MA CABI KARO NAASNA MA JAQI KARO Haa Maya<br>WUU MATAGAYAA WAX kasta Oo La Siiyo? Haa Maya<br>MIYUU QALAL U WEHELIYAA XANUUNKAAN Haa Maya<br>**AY HAYSO HURDO AAN CAADI AHAYN AMA AY ADAGTAHAY SIDA LAGU SOO KICIYO:** Haa Maya<br>**MIYUU CUNUGU LEEYAHAY WAX CALAAMADO QATAR GUUD AH?** Haa Maya<br>**Cunuga mala gudbiyay** Haa No **WEYDII** | **Cudur Aad Udaran** ☐<br>**Malaha Calaamad Qatar Guud** ☐ | **amoxycillin:** ______<br>**Kaniin.**<br>2 jeer maalintii 5 maalmood.<br>Rectal Artesunate supp. ______<br>**(haddey qandho jirto calaamado guud ee Qatar)** | **SII GUDBI CUNUGA**<br>**Sii daawo ka horeysa gudbinta** ☐<br>**Ku waani hooyada kuuro ah daawo ah oo loogu talo galay safarka.** ☐<br>**Sii warqad gudbin ah** ☐<br>**HADII GUDBIN AYSAN MACQUUL AHAYN**<br>**Kula tali guriga in lagu daaweeyo.** ☐<br>**Ayadoo quudinta loo sii wadayo.** ☐<br>**Sii dareere dheeraad ah.** ☐<br>**La soco muddo 6 saacadood ah** ☐<br>**Marka ay tahay in la soo celiyo 6 guda-hood** ☐<br>**Marka ay tahay in la soo celiyo muddo 2 maalmood ah** ☐<br>**Ilmaha Caafimaaday** Haa Maya<br>**Ilmaha Dhintay** Haa Maya |
| **MIYUU CUNUGU QABAA QUFAC AMA NEEFSASHADU KU ADAG TAHAY?** Haa Maya<br>Muddo intee dhan? ______<br>**Tiri inta neefsi halkii daqiiqo.**<br>Meeqa neefsi daqiiqadiiba: ______<br>Miyuu neef tuurayaa? Haa Maya<br>**Feerha oon kala bixin?** Haa Maya **WEYDII** | **Oof wareen daran** ☐<br>**Oof wareen** ☐<br>**Majiro oof wareen** ☐ | **amoxycillin:** ______<br>**Kaniin.**<br>2 jeer maalintii 5 maalmood. | |
| **MIYUU CUNUGU SHUBMAYAA?** Haa Maya<br>Muddo intee dhan? ______<br>**saxarada oo dhiig leh ?** Haa Maya<br>**Eeg bal in cunugu:**<br>Miyay haysaa hurdo aan caadi ahayn ama ay adagtahay sidii lagu kicin lahaa Haa Maya<br>**Eeg bal in cunugu leeyahay: - il go'** Haa Maya<br>**Sii cunuga xogaa dareere ah. Miyuu cunugu:** Haa Maya<br>Uusan awoodin inuu cabbo ama uu wax yar cabbi karaa?<br>- Drinking very thirstily? Haa Maya<br>**Eeg bal in cunugu :**<br>- Uusan nasanayn ama uu caraysan yahay Haa Maya<br>**Eeg bal in cunugu :**<br>- Aad tartiibu ah (ka badan laba ilbiriqsi)? Haa Maya<br>- Tartiib (kan yar laba ilbiriqsi)? Haa Maya **WEYDII** | **Fuuqbax Daran** ☐<br>**Xoogaa Fuuqbax ah** ☐<br>**Fuuqbax Majiro** ☐ | **zinc** ______<br>**Kaniiniyaal.**<br>Maalin walba 10 maalmood<br>**Qorshe C:** Tirada baakadaha ORS<br>**Qorshe B:** Tirada baakada-ha ORS ______<br>**Qorshe A:** Tirada baakada-ha ORS ______ | |
| **MIYUU CUNUGU HORAY U QABI JIRAY QAN-DHO AMA KULAYL UU DAREEMI JIRAY?** Haa Maya<br>Muddo intee dhan? ______<br>**MIYUU CUNUGU LEEYAHAY CALAAMADAHA QATARTA guud** Haa Maya<br>**ARKIDA AMA DAREEMIDA LUQUNTA OO ADAG:**<br>- Miyaa qoortu adag tahay cunuga? Haa Maya<br>**RDT:** Wuu qabaa ☐ **RDT:** Ma qabo ☐<br>**RDT:** : Ma soconayso ☐<br>**MUAC LEH:** casaan Haa Maya<br>**MUAC LEH:** jaale Haa Maya<br>**LABADA cagood oo bararsan** Haa Maya<br>**MUAC LEH CAGAAR:** Haa Maya | **Cudur Qandho Daran Leh** ☐<br>**Malaria** ☐<br>**Malaria Majirto** ☐<br>**Nafaqo Darro ba'an** ☐<br>**Ma qabo Nafaqo darro ba'an** ☐ | **amoxycillin:** ______<br>**Kaniini.**<br>2 jeer maalintii 5 maalmood<br>**Rectal Artesunate sup.** ______<br>**Artesunate S/P**<br>**Maalinta .** ____ **Kaniin. M.1** ____<br>**Maalinta 2:** ____ **Kaniin.**<br>**Maalinta 3:** ____ **Kaniin.n** | |

# FOOMKA QORAALKA – BOOQASHADA KA WARHAYNTA AH

Taariikh ________ Magaca Tuulada ________ Magaca VHW's ________ Nambarka VHW ____

NAMBARKA CUNUGA ________ Magaca Cunuga ________ Jinsi ________ Da'da ____

**Waa maxay dhibka cunuga haysta** ________

| 1st column - QIIMEE<br>(Sax dhammaan calaamadaha muuqda) | | 2nd column - KALA SAAR<br>(Sax kala saarida adigoo ka tix raacaya calaamadaha) | 3rd column - DAWEE | 4th column<br>WAANI HOOYADA (Sax Waanooyinka oo Dhan ) |
|---|---|---|---|---|
| **WEYDII HOOYADA BAL IN CUNUGU :**<br>WAX MA CABI KARO NAASNA MA JAQI KARO Haa Maya<br>WUU MATAGAYAA WAX KASTA OO LA SIIYO Haa Maya<br>MIYUU QALAL U WEHELIYAA XANUUNKAAN Haa Maya | **AY HAYSO HURDO AAN CAADI AHAYN AMA AY ADAGTAHAY SIDA LAGU SOO KICIYO** Haa Maya<br>**MIYUU CUNUGU LEEYAHAY WAX CALAAMADO QATAR GUUD AH?** Haa Maya<br>**Cunuga mala gudbiyay** Haa Maya<br>WEYDII | **Cudur Aad Udaran** ☐<br>**Malaha Calaamad Qatar Guud** ☐ | **amoxicillin:** ____ **Tab.**<br>2 times per day for 5 days.<br>Rectal Artesunate supp. ____<br>**(if fever and GDS)** ____ | **SII GUDBI CUNUGA**<br>**SSii daawo ka horeysa gudbinta** ☐<br>**Ku waani hooyada kuuro ah daawo ah oo loogu talo galay safarka.** ☐ |
| **MIYUU CUNUGU QABAA QUFAC AMA NEEFSASHADU KU ADAG TAHAY?** Haa Maya<br>Muddo intee dhan? ____<br>**TIRI INTA NEEFSI HALKII DAQIIQO**<br>Meeqa neefsi daqiiqadiiba: ____<br>Miyuu neef tuurayaa? Haa Maya<br>**Feerha oon kala bixin** Haa Maya<br>WEYDII | | **Oof wareen daran** ☐<br>**Oof wareen** ☐<br>**Majiro oof wareen** ☐ | **amoxicillin:** **Tab.**<br>2 times per day for 5 days. | **Sii warqad gudbin ah** ☐<br>**Ayadoo quudinta loo sii wadayo.** ☐<br>**HADII GUDBIN AYSAN MACQUUL AHAYN** |
| **MIYUU CUNUGU SHUBMAYAA?** Haa Maya<br>Muddo intee dhan? ____<br>**saxarada oo dhiig leh ?** Haa Maya<br>**Eeg bal in cunugu:**<br>- Miyay haysaa hurdo aan caadi ahayn ama ay adagtahay sidii lagu kicin lahaa Haa Maya<br>**Eeg bal in cunugu leeyahay:** Haa Maya<br>- il go'<br>**Sii cunuga xogaa dareere ah.** Miyuu cunugu:<br>- Uusan awoodin inuu cabbo ama uu wax yar cabbi karaa? Haa Maya | - U cabbaya si aad ah? Haa Maya<br>**Eeg bal in cunugu :**<br>- Uusan nasanayn ama uu caraysan yahay Haa Maya<br>**Qanjaruufo maqaarka caloosha ,** dib ayuu u noqonayaa:<br>- Aad tartiib u ah (ka badan laba ilbiriqsi)? Haa Maya<br>- Tartiib (kan yar laba ilbiriqsi)? Haa Maya<br>WEYDII | **Fuuqbax Daran** ☐<br>**Xoogaa Fuuqbax ah** ☐<br>**Fuuqbax Majiro** ☐ | **zinc** ____ **Tabs.**<br>daily for 10 days<br>**Plan C:** No. of ORS sachets ____<br>**Plan B:** No. of ORS sachets ____<br>**Plan A:** No. of ORS sachets ____ | **Kula tali guriga in lagu daaweeyo.** ☐<br>**Ayadoo quudinta loo sii wadayo.** ☐<br>**Sii dareere dheeraad ah.** ☐<br>**La soco muddo 6 saacadood ah** ☐<br>**Marka ay tahay in la soo celiyo 6 gudahood** ☐<br>**Marka ay tahay in la soo celiyo muddo 2 maalmood ah** ☐ |
| **MIYUU CUNUGU HORAY U QABI JIRAY QANDHO AMA KULAYL UU DAREEMI JIRAY?** Haa Maya<br>Muddo intee dhan? ____<br>**MIYUU CUNUGU LEEYAHAY CALAAMADA-HA QATARTA guud** Haa Maya<br>**ARKIDA AMA DAREEMIDA LUQUNTA OO ADAG:** Haa Maya<br>-Miyaa qoortu adag tahay cunuga?<br>**RDT:Wuu qabaa** ☐ **RDT:** Ma qabo ☐<br>**RDT:** Ma soconayso ☐<br>**Muac Leh: CASAAN** Haa Maya **LABADA cago-od oo bararsan** Haa Maya<br>**Muac Leh: JAALE** Haa Maya **Muac Leh Cagaar** Haa Maya | **Cudur Qandho Daran Leh** ☐<br>**Malaria** ☐<br>**Malaria Majirto** ☐<br>**Nafaqo Darro ba'an** ☐<br>**Ma qabo Nafaqo darro ba'an** ☐ | | **amoxycillin:** ____<br>**Kaniini.**<br>2 jeer maalintii 5 maalmood<br>**Rectal Artesunate sup.** ____<br>**Artesunate** **S/P**<br>**Maalinta .** ____ **Kaniin. M.1** ____<br>**Maalinta 2:** ____ **Kaniin.**<br>**Maalinta 3:** ____ **Kaniin.n** | **Ilmaha Caafimaaday** Haa Maya<br>**Ilmaha Dhintay** Haa Maya |

**Tababarayaasha**

Tusaalaha ka dib, waydii ardayda haddii ay wax su aal ah qabaan. Haddii jawaabtu haa tahay, ka jawaab su aalaha. Haddii aanay wax su aala ah oo dheeraadii jirin hore ugu soco layliga 7: Grace, adeegsiga Foomka wax lagu qoro. Marka layligu dhammaado, la falanqee jawaabaha fasalka.

## LAYLIS ku saabsan adeegsiga buugga diwaanak iyo foomka la buuxbuuxiyo

*U sheeg ardaydu in ay ku qoraan dhammaan xogta buugga Diwaanka/ Foomka wax lagu qoro.*

## Layli 7: Sadia

Sadia waxa ay jirtaa 6 bilood. Waxma jaqi karto waxna ma cabi karto.
Malahayn wax qalal ah intii jiradani jirta.
Sadia uma hurdoonayso si aan caadi ahayn ama kuma adka in ay toosto.
**Sooc Sadia.**

*Intaa ka dib, waydii su aalaha: Sideed u soocaysaa ilmaha?*

### Jawaabta Layli 7: Sadia

Sadia ma awoodo in ay wax cabto, malaha qalal umana hurdaysna si aan caadi ahayn kumana adka in ay toostaa.

Sadia waxa loo aqoonsaMAALIN in ay qabto JIRRO AAD U DARAN.

## Layliga 8: Hassan

Hassan waa ilma 4 jir ah. Waa awoodaa in uu wax cabo?”. HASSAN ma laha wax qalal ah intii jiradu haysay. Ilmuhu uma hurdo si aan caadi ahayn kumana adka in uu toosaa.
**Sooc Hassan**

*Intaa ka dib, waydii ardayda: Sidee ayaad u soocday ilmaha?*

### Jawaabta layliga 8: Hassan

Hassan waa awoodaa in u wax cabo, ma qabo wax qalal ah umana hurdoonayo si aan caadi ahayn kumana adka in uu toosaa.

Hassan waxa loo soocay in anu lahayn CALAAMADAHA GUUD EE QATARTA AH.

**U sheeg ardayda :**
Marka aad aad hubiso calaamadaha halista, waa inaad go aansataa waxa aad rabto in aad samayso marka xiga.

Ka jawaab suaasha ku jirta sanduuqa **"Ilmuhu ma leeyahay inna Calaamadaha guud ee halista?"** sidii aan hore u soo sheegnay, sidii aan hore u sheegnay, haddii ilmuhu uu ugu yaraan leeyahay mid ka **mid** ah calaamadaha halista, jawaabtu waxa ay noqonaysaa **HAA**, waana inaad raacdaa jidka **HAA** da si aad u gaarto sanduuqa xiga ee hoose.

Haddii ilmuhu aanu lahayn calaamadaha halista sida ay u dhan yihiin, jawaabta su aashu: **"Ilmuhu ma leeyahay inna Calaamadaha Guud ee Qatarta ah?"** waa **MAYA**. Raac jidka **MAYA**da ee kugu hogaaminaya sanduuqa kuu sheegaya in aad aaddo AAD SAWIRKA 2V, si aad u soo wado qiimaynta ilmaha ee calaamadaha waawayn (qufac ama neefsiga oo kkugu adkaada, shuban iyo xummad).

Waxaan arki doonaa sida tani u shaqayso inaga oo eegayna xaaladda Amina.

Sii ardayga xogtantan. Waydii hal arMAALIN in uu sida loo adeegsado xogta si loo raaco sawirka. Intaaka dhib la falanqee kooxda.

## Layliga 9: Ayan

Ayan wa ilmo 8 bilood jirta. Wax waa cabbi kartaa. Malahayn wax qalal ah intii jiradu jirtay. Waa ay u dhoola caMAALINnaysaa adeegayaasha caafimaadka umana muuqan in ay jiro qabto.
**Ayaan go aan ka gaar**

Intaa ka dib, waydii ardayga : Sideed Amina u soocMAALIN? Maxuu samaynayaa adeegaha caafimaad intaa ka dib?

### Jawaabta layliga 9: Ayan

Ayan MALAHA calaamado halis ah.

Adeegaha caafimaadku waa in uu raaco jidka MAYADA dhanka midig intaa kadibna waa in la dhamaystiro qiimaynta, adiga oo waydiinaya hooyada calaamadaha waawayn.

**Kalfadhiga bukaansocodka: calaamadaha guud ee qatarta ah**

**Usheege Ardaygia:** waxa hadda aad ku jirtaa gababada maalintii koobaad ee tababarka sidii lagu sii qorsheeyey jadwalkana, kalfadhiga barri waxa lagu qaadan doonaa waaxda bukaan socodka.

Si aan uga dhigno shaqadaada mid fudud, waxa aan habaynay shaxano xogta lagu soo koobo maalin kasta si aan u qabano kalfadhiyada bukaan socodka. Waxa aad ka heli kartaa shaxanada lagu soo koobo xogta dhammaadka cutubkasta.

Shaxanka hoose waa in loo adeegsado labadaba adeegayaasha caafimaadka ee tuulada.

Shaxanada xogtu waxa ay tilmaamaan ujeedada ka qaybgalaha iyo habka uu u marayo hawlfududeeyuhu qabashada bukaan socodka. Waxaa loogu talagalay in ay noqdaan gundhigyo hal bog ah si ay u fududaato tixraacoodu marka aad qorshaynayso ee aad qabanayso kalfadhiga bukaan socodka.

Marka aad qorshaynayso kalfadhi kasta, tax waxyaalaha aad u baahantahay in aad usoo qaadato xarunta caafimaadka maalin kasta (haddii aanad hubin in aad ka helayso xarunta) iyo waxyaalaha ad si gaar ah ugu sii baahantahay.

| SHAXANKA WARKA URURSAN | |
|---|---|
| Diyaargaraw | • Waydii ka qaybgalayaashu in ay soo qaataan bugaagtooda o ay ku jiraan diiwaano iyo foomamka wax lagu qoro.<br>• Hubi inay heystaan ka qaybgalayaashu saacado. |
| Ujeedada ka qaybgalayaasha | • Hubi in ay jiraan calaamadihii halista ee guud<br>• Ku barbaro isticmaalka buugga diwaangalinta iyo foomamka wax lagu qoro goobaha bukaan socodka.<br>• Adeegso xirfad xiriir oo wanaagsan: salaan hooyada, si taxadar leh u dhagayso, ku hadal luqad la fahmi karo, adeegsona erayo hooyadu fahmi karto. |
| Habka hawl fududeeyaha | • Dooro carruur jirro uuni hayso noocay doonto ha ahaato. Bar xarunta caafimaadka iyo ACT, tilmaan habka loo maro bukaan socodka, tilmaanna halka agabku yaalo.<br>• Tilmaan sida loo qiimeeyo loona sooco ilmaha.<br>• U qoondee bukaanka ka qayb galayaasha.<br>• La soco ka qaybgale kasta marka uu shaqaynayo. Haddii aanad arki karin, u sheeg ka qayb galuhu in uu soo bandhigo xaalad ama eeg diiwaanka ama foomka uu wax ku qoray.<br>• Adeegso aaladaha korjoogtaynta si waafaqsan cidda aad hadba tababarayso.<br>• Sii warcelin iy tilmaan sida hadba loogu baahdo.<br>• Ku celi ilmaha xarunta caafimaad isaga oo uu lasocdo warqad ku saabsan daawada, ama u daawee si waafaqsan heshiiskii. |
| Marka kal fadhigu dhammaado | • Hogaami falanqaynta si aad usoo uruuriso kalfadhiga una bixiso warcelin ku saabsan xirfadaha la tijaabiyay maanta.<br>• Sii warcelin ardayda. |

# 4. Barista qufaca iyo neefsiga oo adkaada adeegayaasha caafimaadka ee tuulooyinka

**Usheeg ardayda:**
Hadda, waxa aan baranaynaa calaamadda koobaad ee wayn: "Qufac ama Neefsiga oo Adkaada".
Ugu horayn, waxa aan wax ka baran doonaa jirradan iyo sida ay muhiimka u tahay.

Xogta soo socotaa waxa ay kusaabsantahay waxa ardaygu baahanyahay. Sii xogtan inta falanqayntu socoto, adiga oo ka caawinaya in waxa aad sheegayso ay la xiriiriyaan waaya aragnimado.

**Oof wareen** (falan qee erayga degaanka loogayaqaan oof wareenka kuna isticmaal casharada) **waa caabuq ku dhaca sambabada. Oof wareenku waxa uu sababaa dhimashada hal afartii dhimasho ee carruurta. Qufac ama neefsiga o ku adkaada (adeegso erayga deegaanka looga yaqaan neefsiga oo ku adkaada) waxa uu noqon karaa calaamad oof wareen. Carruurta inteeda badan ee qufaca leh ama neefsigu ku adagyahay ma qabaan oof wareen. Hase ahaatee waa in aad baratаa sida lagu garto carruurta qufaca leh ama neefsigu ku adagtahay ee qaba oof wareenka, si aad u daawayso.**

**Waydii ardayda:**
*Ma ka warqabtaa ilmo tuuladaada ugu dhinta oof wareen?*

Hubi in arMAALINgu aqoonsan yahay muhiimadda oof wareenka oo uu garanayo ugu dhawaan inta dhimasho ee ku iman karta qoysaska ay daryeelaan. Qiyaas ahaan, 100 guriba waxa jiraya 20 xaaladood oo oofwareen carruureed ah iyo haldhimasho oo la xariirta oof wareenkaas sanadkiiba.

*Muxuu yahay qufucu ama neefsiga oo adkaadaa?*

**"Neefsiga oo adkaada"** "macnaheedu waxa weeye" neefsi aan caadi ahayn". Hooyooyinku waxa laga yaabaa in ay isticmaalaan erayo sida neefsasho "sharqan leh", "dhakhso ah" ama "kala go go'an" marka ay tilmaamayaan neefsi adag. Isla falanqeeya tan ilaa inta aad ka hubsanayso in qof kastaa isku si u fahmay erayga.

QODOBO MUHIIM AH

- Oof wareen caabuq sanbabada ah;
- Oof wareenku waxa uu sababaa dhimashada carruurta;
- Carruurta inteeda badan ee qufaca lihi ama neefsigu ku adag yahay kaliya waxa ay qabaan duri ama qufac;
- Carruurta tiro yar oo qufac ama neefsigu ku adagyahay ayaa qaba oof wareen.

## a. In la garto neefsiga dhakhsaha ah

**Usheeg ardayda:**
Waxa aan ka hadalay waxa oof wareenku yahay iyo waxa aan uga jeedno " neefsi adag ". hadda, waxa aad baran doon sida loo baaro oof wareenka. Si aan sidan u samayso waa in aad barataa sida loo garto calaamad cusub oo kale **"Neefsi dhakhso ah "**.

## b. Cabiraadda dhakhsaha neefsiga

Kalfadhigani waxa uu ka dhacayaa fasalka dhexdiisa waxaana lagu baranayaa hab isyeel yeel ah si loo baro ardayda sida loo cabiro dhakhsaha neefsiga.

### Barashada sida loo tiriyo neefsiga:

**Ujeedada barashada:**

- Waxa uu ogaan doonaa in ay muhiim tahay in la tiriyo dhakhsaha neefsiga – in la qiyaaso ama la maleeyaa kuma filla;
- Waxa uu awoodi doonaa tirinta tirada neefsiga ee uu sameeyey Tababaruhu halkii daqiiqo (marka ardayda loo sheego goorta la bilaabayo iyo marka la joojinayo tirinta);
- Waxauu awoodi doonaa in uu cabiro dhakhsaha neefsiga ee Tababaraha isaga oo adeegsanaya saacad;
- Waxa uu awoodi doonaa in uu cabiro dhakhsaha neefsiga ilamaha isaga oo adeegsanaya saacad;
- Waxa uu ogaan doonaa xaaladaha lama huraanka u ah cabiraadda dhakhsaha neefsiga;
- Waxa uu awoodi doonaa in uu u kala saaro xaaladaha "neefsi dhakhso ah" ama "neefsi aan dhakhso ahayn".

**Barashada sida loo tiriyo neefsiga:**

**Usheeg ardayda:**
Waxa aad rabaa in aad si qoto leh u neefsado hase ahaatee ah dhakhso caadi ah idina waxa aad tirin doontaan tirada inta neefsi ee aan qaato hal kii daqiiqo. Waxa aan idiin sheegi doonaa goorta daqiiqaddu bilaabanto iyo marka ay dhammaato. Waxa aa qabanaysaa waa in aad tirisaan. Tiri markasta oo aan neef jiido.

Tilmaan waxa neefsi buuxaa yahay.

Bilaw in aad u neefsato si qoto leh dhakhsahaaga caadiga ah (kaasoo ah sida caadiga ah 15 neefsi daqiiqaddii) wadna ilaa layligu ka dhamaanayo. Tababaraha kale waa in uu diyaariyo tirinta hal daqiiqo isaga oo adeegsanaya saacad. Tababaruhu waa in uu yiraahdaa " bilaw hadda", iyada oo marka saacadddu qaylisana oranaya " jooji tirinta". Waa in uu la socdaa ardayda oo uu ka warqabaa haddii ay jiraan qar ay wax ku adagyihiin. Waa in aad tiriso dhakhsaha neefsigaaga.

Marka daqiiqadi dhamaato, u sheeg in ardaydu ay qoraan tirada neefsiga ee ay tiriyaan, intaa kadiban hubi waxa ay qoreen. Haddii qaar ka mid ah ardayda ay ku adagtahayin ay qoraan, ku dhex wareeg kooxda qof qofna u waydii inta neefsi ee ay tiriyeen. U samee sidan si aamusnaan ah si aanay ardayda kale u maqal jawaabta.

AWaydii MAALIN kasta tirada uu qoray. Usheeg inta neefsi eed tirisay adigu lana falanqee farqiga iyo sababaha suura galka ah.

Ku celi tallaabooyinka kore ilaa inta dhammaan ardaydu si saxauga jawaabayaan (laba neefsi oo aad adigu tiriso gudahood waa in tani ku dhacdo).

**Barashada sida loo isticmaalo saacadda si loo tiriyo dhakhsaha neefsiga:**

U sheeg ardayda sida loo tiriyo dhakhsaha neefta iyada oo la adeegsanayo saacad. Tus saacadda una ogolow in ay riixaan badhanka si ay u fahmaan sida ay u shaqayso.

**U sheeg bartayaasha:**

1. **U fiirso dhaqdhaqaaqa neefsiga meelkasta oo ka mid ah laabta iyo caloosha tababaraha** (waa in ay awoodaan in ay arkaan dhaqdhaqaaqa neefsiga xattaa haddii Tababaruhu gashan yahay dhar). Bilaw in aad tiriso marka aad hubto in ay ku cad u arki karaan in aad neefsanayso.
2. **Riix badhanka saacadda oo bilaw in aad tiriso, jooji marka saacaddu qayliso** (60 ilbiriqsi kadib).

Hubi in dhammaan ardaydu garanayso waxa ay tahay in ay sameeyaan.intaa ka dibn u sheeg in ay bilaabaan tirinta makra ay diyaar yihiin, iyo in ay tiriyaan muddo hal daqiiqo ah.

**Tababaraha:**

- Ku neefso dhakhsahaaga caadiga ah (hase ahaatee si ka qoto dheer sida caadiga ah) adiga oo sii wadaya ilaa ardaydu ka dhamaystirayaan tirinta. Tiri dhakhsahaaga neefsiga;

- Waydii ardaydu in ay qorto tirada neefsiga ee ay tiriyeen mudadii daqiiqada ahayd;

- Hubi jawaabaha ardaydana la wadaag sida aad u aragto sida kor ku xusan;

- Sii wad layligan ilaa inta dhammaan ardaydu ay jawaab kusiinayaan laba neefood o aad adigu tirisay gudahood.

*c. Cabirka dhakhsaha neefsiga ee ilmaha:*

Arrange for a co-operative child and his mother to come to the classroom. The child should be healthy and about 3 years old. Make sure he stays calm and quiet.

U diyaari in ilmo ku ogol iyo hooyadii yimaadaan fasalka. Ilmuhu waa in uu caafimaad qabo oo uu yahay ilaa 3 jir.  Hubi in uu si dagan iyo aamusni ku joogo.

U sheeg in ardaydu tirin doonto neefsiga ilmaha si lamid ah sidii ay u tirinayeen neefsigaaga, iyaga oo adeegsanaya saacad.

- Waa in ay ka eegaan dhaqdhaqaaqa neefsi meel kasta oo ka mid ah laabta ilmaha ama caloosha;
- Sida caadiga ah waxa ay ka arki doonaan si caadi ah neefsiga ilmaha xattaa haddii ilmuhu dhar gashanyahay, hase ahaatee haddii aanay arki karin dhaqdhaqaaqa si fudu, ka codso in hooyadu kor u qaado maryaha ilmaha;
- Haddii aanay hubin tirada neefsashada ee ay tiriyeen, tusaale ahaan, haddii ilmuhu dhaqaaqay ama ay adkayd in la arko dhaqdhaqaaqa, waa in ay  sugaan in muddo ah oo ay hadana dib u bilaabaan tirinta.

Sidii hore oo kale, ku celi layliga, iyaga oo ardaydu wakhtiga u qabsanayaan tirintooda, ilaa inta heshiis laga gaarayo dhakhsaha.

**Go aaminta in dhakhsaha neefsigu yahay mid dhakhso ah:**

**Usheeg ardayda:**

- Tirada neefsiyada halkii daqiiqo ayaa la yiraa "dhakhsaha neefsiga";
- Ilmo 2 bilood ilaa 12 bilood jira oo dhakshaha neefsigiisu ka badanyahay 50 daqiiqaddii ayaa la yiraa "Dhakhso ayuu u neefsanayaa";
- Ilmo 12bilood ilaa 5sanno jira oo dhaksaha neefsigiisu  40  ama kabadan ayaa layiraa "Neefsigiisu waa dhakhso";
- Waa in aad tirisaa dhakhsaha neefsiga kaliya marka ilmuhu xasilan yahay. Haddii kale, sug wax yar.

## Layli 10: - Go'aaminta in neefsigu dhakhso yahay

**U sheeg ardayda:**
Hadda waxa aan idin waydiinayaa haddii carruurta aan magacaabi doonaa leeyihiin
**I neefsi dhakhso ah** ama **neefsi caadiah.**

Haddii arday sheego  jawaabtii saxa ahaynd, ku dheh:  "Haa, taasi waa sax", ama wax la mid ah. Haddii arday bixiyay jaxaab khalad ah, isku day in aad fahamto sababta una sharax ta saxa ah. Hadii ay lama huraan noqoto,  kooxda isla falanqeeya si aad u hubiso in qofkastaa fahmay.

U sheeg in ardaydu ku siiyaan jawaab afka ah

**Note:**
*waxa muhiim ah in lagu celiyo layliga marar door ah inta tababarku socdo, iyada oo la isticmaalayo carruur ka timid xarunta.*

Tallaabooyinka kore oo kale raac marka aad ka jawaabayso kuwan hoose:

**OGAYSIIS KU SOCDA TABABARAHA:** U adeegso layligan hoose kaliya ACT oo qudha

| DA'DA | DHAKHSAHA | DHAKHSO AMA CAADI |
|---|---|---|
| 3 s | 55 | DH |
| 2 s | 45 | DH |
| 4 s | 53 | DH |
| 18 b | 49 | DH |
| 5 s | 52 | DH |
| 10 b | 56 | DH |
| 11 b | 60 | DH |
| 3 b | 48 | C |
| 9 b | 40 | C |
| 3 s | 42 | DH |

## Layli C: - Qaybta 2

**Layli fiidiye ah -- "Ilmuhu ma qufacayaa ama neefsigu maku adagyahay?"**

**Si aad u qabato layligan:**

- U sheeg ardayda in inta fiidiyahani socdo:
- Waxa ay baran doonaan tirinta tirada neefsiga ee ilmaha yari qaato halkii daqiiqo iyo go' aaminta haddii Neefsi Dhakhso ahi jiro iyo haddii kale.

Bilaw cajalada fiidiyaha.

Hubi in ardaydau ay dhamaantood ku dhaw yihiin shaashadda fiidiyaha si ay ugu arkaan carruurta si cad.

Bilaw cajalada fiidiyaha mar kale adiga oo tusaya tusaalayaasha, layliyada iyo daraasadda xaaladaha ku saabsan Neefsiga Dhakhsaha ah.

Hadii mid ka mid ah ardayda ay ku adagtahay In uu arko neefsiga ilmaha ama in uu u tiriyo si sax ah, dib ugu soo celi cajaladda meeshaa u fahmi waayay kuna cali tusaalaha. Tus ardayda halka ay tahay in ay eegaan marlabaadna tiri neefsiga.

Ilma kastaa wa inuu ka jawaabo su aasha, "ilmaha neeftiisu ma dhakhsaa?". Arday kastaa waa in uu go aan qaataa oo qoraa isaga oo aan la hadlayn qofka ag fadhiya ka hor inta aan jawaabta la bixin ee aan la falanqayn.

*Jawaabta Layli C - Qaybta 2*

| ILMO | DA'DA | INTA GOOR EE UU NEEFSADAY DAQIIQADDII | ILMAHA NEEFSIGIISU DHAKHSO MA YAHAY ? | |
|---|---|---|---|---|
| | | | HAA | MAy |
| **Child 1** | 4 sanno | 65 | √ | |
| **Child 2** | 6 bilood | 66 | √ | |

Marka cajaladu dhamaato, samee falanqayn kooban oo ku saabsan dhibaatooyinka ay la kulmeen ardaydu.

Xoogga saar muhiimadda ay leedahay in isha lagu hayo hal bar oo ku taal laabta ama caloosha, iyo in la hubiyo in ilmuhu xasilan yahay ka hor inta aan la bilaabin tirinta.

## Layli ll: ka go aan qaadashada Neefsiga Dhakhsaha ah ee carruurta

Samee layligan markasta oo ay kula haboonaato wixii ka dambeeya halkan inta lagu guda jiro qaybtan. Tusaale ahaan, qorshee in aad qabato layligan marka ka qayb galayaashu ka soo noqdaan biririfta. In la sameeyo layli wakhtigaasi waxa uu ka caawinayaa ka qayb galayaashu in ay diiradda saaraan iyo in ay isu diyaariyaan in ay hawsha halkii ka sii wadaan.

**Qabashada layliga:**
Majiro agab gaar ah oo loo baahanyahay marka la samynayo layligan. Si kastaba ha ahaatee, ka hor inta aanad bilaabin, ka caawi ardayda in ay dib u eegis ku sameeyaan qaybta ku saabsan go aaminta dhakhsaha neefsiga. Waydii hal arday in uu kooxda u sheego qaybta ku saabsan Neefsashada dhakhsaha ah.

Ku bilaw layliga adiga oo waydiinaya su aasha koobaad. Kolba mid u yeer ka qayb galayaasha. Haddii mid ka mid ahi aanu ka jawaabi karin ama jawaab qaldan bixiyo, u gudub ka xiga.

Marka kooxdu diyaar noqoto, bilaw layliga adiga oo waydiinaya su aasha koobaad ee hoos ku qoran:

Ogaysiin ku socota tababaraha: U adeegso layliga hoose e kaliya ACTyada

*Ilmaha neefsigiisu dhakhso ma yahay?*

| DA'DA | DAQIIQADDA INTA GOOR EE UU NEEFSADAY | HAA AMA MAYA |
|---|---|---|
| 3 b | 52 | H |
| 3 s | 38 | M |
| 4 s | 48 | H |
| 4 b | 58 | H |
| 5 s | 42 | H |
| 6 b | 37 | M |
| 2 b | 64 | H |
| 18 b | 45 | H |
| 2 s | 42 | H |
| 3 s | 55 | H |
| 2 s | 49 | H |
| 21 b | 38 | M |
| 5 s | 48 | H |
| 6 b | 45 | M |
| 2 s | 50 | H |
| 5 b | 60 | H |
| 8 b | 55 | H |

**Bilaabidda adeegsiga Habraaca Tusaha 2V: Ilmuhu ma leeyahay "Qufac ama neefta oo ku adag?"**

**U sheeg ardayda:**
Adeegso sanduuqa hoose si aad dib u eegis ugu samayso una xasuusiso ardayda waxa uu yahay Neefsiga Dhakhsaha ahi:

QODOBO MUHIIM AH

1. ilmo da'dii tahay 2bilood- 12bilood 50neefsi iyo ka badani = neefsi dhakhso ah
Ilmo 12bilood - 5sanno 40 neefsi iyo ka badan = neefsi dhakhso ah.

2. Si aad u tirso inta goor ee la neefsaday daqiiqaddii, u isticmaal saacad sida soo socota:

- Ka eeg dhaqdhaqaaqa neefsiga meel uun ka mid ah laabta ama caloosha ilmaha (waa in aad arki kartaa dhaqdhaqaaqa neefsiga xataa haddii ilmuhu maryo gashanyahay). hadii aanad u arki karin dhaqdhaqaaqa si fudud, waydii hooyadu in ay maryaha ka qaado ilmaha.

- Bilow tirinta mrka aad hubto in aad u arki karto neefsiga si cad,
Push the button in the middle of the timer and start counting, stop when the timer rings (after exactly 60 seconds).

- Riix badhanka badhtanka kaga yaal saacadda bilawna tirinta, jooji mrka jalasku dhaco (60 ilbiriqsi ka dib). Crying, repeat the count.

## d. Barashada sida loo garto Feeraha oon kala bixin (Saab Qaad)

Calaamadahaan waxay u baahanyiin in si wanaagsan loo eego lana barto.waxaad calaamadaha waxaad ku baran doontaa layliyada muqaalaka aha, sawirrada iyo booqashada xarumaha caafimaad adoo baaraya ilamaha jiran.

Ilamaha waxa ay qabi karan qufac ama duray taana waxaa sababto tahay qoyaanka oo dib ugu laabta sanaka una gudba dhunnta .Ilmo qaba qufac ama duray ma aha ilmo qabo xanuun darran.

*Ka baar ilmaha jiran oo dhan feeraha oon kal bixin. Fiiro gaar ah sii ilamaha qabo qufaca amaduray ama haddii ay dhib ku tahay neefsiga.*

Baaritaanka feeraha oon kala bixin, ilamaha waa in ay degan yihiin, naas aan la nuujin, ku fiican in uu hurdo, huradana aan laga toosin.

Warso xanaaneeyaha ilmaha inuu dharka ka bixiyo. Fiiri feerihiisa hoose in ay kala baxayaan.

Fiiri in feeraha oon kala baxeyn marka uu neefta Qaadanayo. Marka uu neefta qaadanayo, feeraha iyo calooshaba waa in ay wada dhaqaaqaan.

Ilamaha feeraha aan kala bixin waxaa dhaceysa in ay feeraha dib u laabtaa halkii laga rabay in ay banaanka u soo baxaan. Sababatuna waxa ay tahay hawo kala bixisa feeraha ma soo galeyso.

Sawirka hoos ku yaala, ilmaha midigta feeraha ma kala baxaayaan, fiiri xariiqmaha ku yaala feerahiisa marka uu neefsanayo. Feerahiisa hoose dib ayay u laabanayaan halkii laga rabay in ay banaanka u soo baxaan. Ilmaha waxa ay leeyihiin feeraha oo kala bixin hadii marka uu neefsanayo feerha ay dib u laabtaan.




Feeraha oo aan kala bixin lahama arki karo haddii uu caadi u neefsanayo ilmaha. Sawirka ilamaha bidix feeraha wey kala baxayaan. Marka la baaryo kala baxa feeraha waa in ilmuhu neefta qaadanayaan si fiicana loo arki karaa.
Hadii aada hubin in ilmahu uusan qabin kala baxa feeraha, dib u fiiri. Warso ACTs in ay garan karaan calaamda.

## Jawaabta Layli C - Qaybta 3 : Saab Qaad

| Ilmo | Saab Qaad ? | |
|---|---|---|
| | Haa | Maya |
| Ilmo 1 | | |
| Ilmo 2 | | |
| Ilmo 3 | | |
| Ilmo 4 | | |
| Ilmo 5 | | |

## Jawaabta Layli C - Qaybta 4 : Feeraha oon kala bixin

| Ilmo | Saab Qaad ? | |
|---|---|---|
| | Haa | Maya |
| Ilmo 1 | | |
| Ilmo 2 | | |
| Ilmo 3 | | |
| Ilmo 4 | | |
| Ilmo 5 | | |
| Ilmo 6 | | |
| Ilmo 7 | | |

**U sheeg ardayda:**
Hadda waxa aad garanaysaa sida loo tiriyo neefsashada loona qiimeeyo in ay dhakhso tahay iyo in kale,Feeraha oon dib u laabmin sidaa daraadeed hadda dib ayaan ugu noqon doonaa habaraaca Tusaha 2. waxaanan eegi doonaa sida loo adeegsanayo xogtan.

**Waydii marka hore: Ilmuhu ma leeyahay "Qufac ama neefta oo ku adag"?**

Adeegso erayo ay hooyadu fahmi karto marka laga hadlayo qufaca iyo neefsiga oo adkaada.

Haddii jawaabta su aashani HAA tahay, waydii, muddo intee leeg? Waxa aad u baahantahay in aad ka raadiso calaamado kale oo dheeraad ah mararka qaar hooyooyinku waxa laga yaabaa in aanay dareemin in carruurtooda neefsigu ku adagyahay, sidaa daraadeed fiiri ilmaha oo adigu go aanso haddii ilmuhu leeyahay calaamado waawayn.

Haddii jawaabtu MAYA tahay (qufac malaha neeftuna ma hayso) tag tusaha 3 si aad usii wado qiimaynta ilmahana u soocdo.

Eeg tusaha. Su aasha ugu horaysa ee kujirta sanduuqa ee ay tahay in laga jawaabaa waa: **"Ilmuhu maleeyahay inna Calaamadihii Guud ee Qatarata ah?"**. Hadda mar haddaad ka eegtay calaamadihii guud ee halista waxa aad ku jawaabi kartaa HAA ama Maya. Haddii jawaabtu HAA tahay, tiri neefsiga, **haddii ilmuhu si Dhakhso ah u neefsanayo, raac wadada HAA da adiga oo aadaya sanduuqa hoose.**

Waxa aad ogaataa in xattaa haddii ilmuhu uu leeyahay soocid daran, adeegaha caafimaadka waxa ku WAAJIB ah in uu dhamaystiro qiimaynta iyo eegista calaamadaha waawayn ka hor inta aanu daawo u qorin ama aanu u DIRIN cusbitaal.

## HABRAACA 2V

**WARSO HOOYADAA:**
"Warso ilamaha ma qufacayaa ama neefsigu ma dhibayaa?"

**HAA**

**Warso ilaa intee ayuu qufacayay?**

Haddii ay badan tahay 3 asbuuc
Sii wada baaritaanka ilamaha gudbina

**HAA**

**Fiiri Feeraha oon kala bixini**

**MIYUU CUNUGU LEEYAHAYQAAR KA FEERAHA OON KALA BIXINI MIYUU CUNUGU LEEYAHAY WAX CALAAMADO QATAR GUUD AH?**

**HAA**

**Qaarjeex daran**

**GUDUB**

**GUDBI ILMAHA**
Haddii ilmuhu qabao xanuun daran
Waa in aan daaweynta lagia daahin

- U gudub habraaca 3V iyo 4V
- Sii daawada**:**
  - **Cadada ugu horeysa amoxycilline** haddii uu yahay xanuu daran *(fiiri sanduuqa 3V)*
  - **Sii ORS** Haddii loo baahdo
  - **Biyo iyo sokor** *(fiiri sanduuqa 11V)*

**HADDII GUDBIN AY SUURA GAL AHYN**

- Daawe ilamaha dabagalna ku samee
- talo sii hooyada fiiri sanduuqa *(fiiri sanduuqa 1V and 2V)*

**MAYA**

U Gudub Habraaca 3V

**NO**

Count the breaths in 1 minute

- Age 2 months up to 12 months: 50 bpm or more
- Age 2 months up to 5 years: 40 bpm or more

**HAA**

**Qaarjeex**

**GUDUB**

- Sii amoxycilline *(fiiri sanduuqa 4V)*
- Talo sii hooyada *(fiiri sanduuqa 1V iyo box 2V)*

**MAYA**

**Ma qabo qaarjeex**

**GUDUB**

Haddii Ilamhu qabo HERGEB

- Talo sii hooyada *(fiiri sanduuqa 1V iyo box 2V)*
- Haddii qufaca ka badan yahay 3 asbuuc GUDIBI SI DHAQSO AH haddii ay suura gal tahay

**Aad Habraaca 3V**

## Layli 12: Abdinor

**U sheeg ardayda:**
Laylgan dhexdiisa, waxa aan ku baran doonaa sida loo qoro calaamadaha la xiriira qufaca ama neefsiga oo adkaada. Si layligan loo sameeyo, eeg Tusahaaga taxan.
Qor xogta ioy calamadaha adiga oo isticmaalaya Buugaaga diwaanka/Foomka wax lagu

qoro marka aan akhriyo.

**Abdinor** waa ilmo 8bilood jira waanu qufacayaa.

Wax ma liqi karo waxna ma jaqi karo. Ma lahayn wax qalal ah intii jiradani haysay.

**Abdinor** ma eego adeegaha caafimaadka ama waalidkiis marka ay hadlayaan, waxa uu u hurdaysan yahay si aan caadi ahayn.

Sooc Abdinor.

Abdinor waa qufacayaa muddo 3cisho ah waxaana ku adag neefsiga, neefsigiisana waa dhaqso.

Sooc Abdinor.

*Intaa ka dib waydii ardayda: Sideed u soocdeen ilmaha ?*

### Jawaabta to Layli 12: Abdinor

Adeegaha caafimaadku waxa uu u soocay Abdinor in uu qabo OOFWAREEN DARAN iyo JIRRO AAD u DARAN.

**Qiimaynta iyo soocidda oof wareenka**

**U sheeg ardayda:**
Hadda waxa aad baran doontaa sida loo qiimeeyo loona sooco ilmaha qufacaya neeftuna ku adagtahay ee leh calaamadaha oofwareenka.

Sanduuqa koobaad ee qufaca **"qufaca ama neefsiga oo ku adag",** ka jawaab su aasha ah **" ilmuhu ma leeyahay inna wax ka mid ah calaamadihii guud ee halista?"** haddii jawaabtu HAA tahay, raac jidka HAA da, sidii aan yeeshay markii Abdinor.

Haddii jawaabtu MAYA tahay , raac jidka Mayada ilaa aad ka gaarto sanduuqa ay ku qorantahay **"tiri neefsiga muddo haldaqiiqo ah. Ilmuhu ma u neefsanayaa si dhakhso ah?".**

Tiri inta goor ee ilmuhu neefsanayo halkii daqiiqo. Neefsigu waa dhakhso haddii ilmuhu neefsanayo 50 goor iyo ka badan halkii daqiiqo.

Intaa ka dib, ka jawaab su aasha **"neefsigu dhakhso ma ayahay ?"** haddii jawaabtu HAA tahay, raac jidka haada ilaa aad ka gaarto sanduuqa ka hadlaya **"oof wareenka"**.

Ilmaha loo sooco in uu qabo OOFWAREEN waxa uu u baahanyahay in lagu daaweeyo amoxycillin. Waxa aad wax badan ka sii barandoontaa daawaynta oof wareenka marka dambe (eeg Qaybta III).

Haddii aanu neefsigu dhakhso ahayn, jawaabtu waa MAYA. Haddii jawaabtu maya tahay, raac jidka mayada ilaa aad ka gaarto sanduuqa ay ku qorantahay **"OOF WAREEN MA QABO".**

Ilmuhu waxa uu qabi karaa hargab caadi ah umana baahna antibiotics, hase ahaatee waa in aad kala talisaa hooyada daawaynta guriga.

U sheeg ardaydu in ay fiiriyaan tusaha oo idil si ay u arki karaan meelaha jidadka HAAda iyo MAYA du ku dambeeyaan.

Bar habka qiimaynta iyo kala saarista inta lagu guda jiro falanqaynta, adiga oo xusuusanaya in aad ka bilawdo barta bilawga (marka hore waydii hooyada: "maxay yihiin dhibaatooyinka ilmaha haystaa?").

Marka ay kuula muuqato in ay fikrad fiican ka haystaan tusaha, hore ugu sii soco labada layli ee kale ee ku xiga.

**Tababaraha:**
Marka ay diyaar noqdaan, u akhri xogta ku sugan xaaladda koobaad.

Marka aad hubto in ay qoreen xogtii oo dhan, waydii in ay gaar gaar uga shaqeeyaan si ay uga go aan qaataan kala soocidda. U daa iskood haw sameeyaane haddii aanad arag qaar aan fahmin.

Marka ay dhameeyaan xaaladda koobaad, tababuruhu wa in uu mid mid u siiyaa warbixin ku saabsan shaqada ay qabteen.

Marka ay dhammaan la falan qeeyeen xaaladda tababaraha, u gudub xaaladda labaad:

## Layli 13 v: Xuseen

Xuseen waxa uu jiraa 6bilood. Hooyadii waxa ay tiri waxa uu leeyahay qufac mudao laba maalmood ah.

Xuseen waa jaqi karaa naaska. Malahayn wax qalal ah. Manasse uma hurdaysna si aan caadi ahayn kumana adka in uu toosaa.

**Sooc Xuseen.**

Ilmuhu waxa uu qufacayay labadii cisho ee u dambeeyey. Adeegaha caafimaadku waxa uu ka tiriyay neefsiga ilmaha 58 neefsi daqiiqaddii.

**Sooc Xuseen.**

*Intaa ka dib waydii ardayda: Sideed u soocday Xuseen?*

Jawaabta Layli 13 v: Xuseen

Manasse MALAHA CALAAMADIHII HALISTA EE GUUD iyo OOFWAREEN midna.

## Layli 14: Maxamed

**U sheeg ardayda: in ay adeegsadaan Tusaha taxan.**

Mohamed waa ilmo jira 18 bilood. Waa cabi karaa wax. Malaha wax qalal ah. Si aan caadi ahayn uma hurdaysna toosidduna kuma adka.

**Sooc Maxamed.**

Waxa uu qufacayay muddo sadex cisho ah. Adeegaha caafimaadku waxa uu ka tiriyay neefsigiisa 38/daqiiqaddii.

**Sooc Maxamed.**

*Intaa kadib, waydii ardaydas:Sideed usoocday ilmaha?*

Jawaabta Layli 14: Maxamed

**MALAHA CALAAMADIHII GUUD EE HALISTA iyo OOFWAREEN midna.**

**Xusuusnow:**

Adeegso shaxanka adiga oo ka bilaabaya bilawga. Adeegso shaxanka ku saabsan **"Calaamadaha Guud ee qatarta ah"**iyo sidoo kale shaxanka ku saabsan **"Qufaca ama Neefta oo qabata".**

Adeegso layligii hore si aad u tusmayso dibna ugu naqtiinto. Arday ama ka badan u qoondee in ay raacaan tusaha xaaladdiiba.

**U sheeg ardayda:**
Waxa aynu mar labaad ku noqon doonaa shaxanka 2C/2V inaga oo raacayna jidka HAA iyo MAYA si aan dibu eegis ugu samayno calaamadaha "qufac ama neefta oo adkaata". Tani waxa ay kaa caawinaysaa in aad hubto sida aad u adeegsanayso shaxanka/tusaha.

**Kalfadhiga bukaansocodka: Qofac ama Neef Qabatin**

**Baraha waa inuu xasuusnaadaar:** waxa aad hadda ku jirtaa dhamaadkii maalintii labaad ee tababarka waxaanay wax u socdaan si waafaqsan jadwalka, kalfadhiga barri subax waxa lagu qaban doonaa waaxda bukaan socodka.

Si shaqada laguugu fududeeyo, waxa aan habaynay shaxano koobaya habka loo qabanayo kalfadhiyada bukaan socodka maalin kasta. Waxa aad ka heli kartaa shaxanadan warka koobani ku qoran yahay dhammaadka cutubkasta.
Shaxanka hoose waa in loo adeeg sadaa kaliya ACT oo qudha.

| SHAXANKA GUNDHIGA AH | |
|---|---|
| ***Diyaar garow*** | • *Waydii ardaydu in ay soo qaataan bugaagtooda oo ay ku jiraan nuqulo ka mid ah buugga diiwaan galinta iyo foomamka wax lagu qoro.*<br>• *Soo qaad ama hubi in ardaydu haystaan saacado.* |
| **Ujeedada ka qaybgalayaasha** | • Qiimee oou kala saar carruurta labadii xaaladood ee la bartay.<br>• Baro sida loo adeegsado buugga diiwaanka ama foomamka wax lagu qoro meelaha bukaan socodka.<br>• Adeegso hab wada xiriir oo wanaagsan: salaan hooyada, u dhagayso si taxadar leh, ku hadal luqad la fahmi karo, adeegsona erayo hooyado fahmayso. |
| **Habka hawl fududeeyuhu marayo** | • Dooro carruur jirro uuni hayso.<br>• Bar ACTr shaqaalaha caafimaadka iyo xarunta, u sharax habka guud ee loo maareeyo bukaan socodka, una tilmaan halka alaabatu taalo.<br>• Tus sida loo qiimeeyo loona sooco ilmaha.<br>• U qaybi bukaanka ardayda.<br>• Lasoco sida arday kastaa ula shaqaynayo bukaanka. Haddii aanad arki karin, waydii in ardaydu ay soo bandhigaan xaalad ama eeg buuga diiwaanka ama foomka ay wax ku qoreen.<br>• Adeegso agab kaaga korjoogtaynta si aad u ogaato habka ACT ula dhaqmayo ilmaha.<br>• Usii war iyo tilmaan hadba sida loogu baahdo.<br>• U celi ilmaha xarunta caafimaadka adiga oo raacinaya qoraal ku saabsan daawaynta, ama u sii daawo si waafaqsan qorshaha. |
| **Gababada kalfadhiga** | • Hoggaami falanqaynta si loo soo koobo kalfadhiga adigoo islamarkaana war kasiinaya xirfadihii lagu tababartay maalintaa.<br>• Sii warcelin ardayda. |

# 5. Barista shubanka iyo fuuqbaxa daran actyada

Waydii ardayda fikradda ay ka haystaan shubanku waxa uu yahay. Intaa ka dib u sharax kuwan soo socda:

Ilmo waxa uu qabaa shuban marka uu sadex goor saxaroodo maalin gudaheed saxaradaa oo ka kooban biyo ka badan inta caadiga ah.

Adeegso sanduuqa hoose si aad u sharaxdo macnaha shubanka.

QODOBO MUHIIM AH

- Si joogto ah oo loo dhigo saxaro caadi ahi maaha shuban;
- Shubanka waxa lagu qeexaa sadex iyo ka badan oo saxaro biyobiyo ah muddo 24-saacaddood gudahood ah;
- Tirada saxaradee ilmuhu maalintii sameeyaa waxa ay ku xirantahay waxa ilmuhu maalintii cunayo iyo da'diisa.

**U sheeg ardayda:**
Marka aad dhamayso qiimaynta iyo kala saarista calaamadaha halista ah , qufaca iyo neefsiga oo adkaata, tallaabada xigta ee CARRUURTA OO DHAMMI, waa in la waydiiyo shubanka.

Ugu horayn, waydii hooyada: **"Ilmuhu ma shubmayaa?"**
Adeegso eray shuban u taagan oo hooyadu fahmi karto.

Haddii jawaabtu MAYA tahay aad tusaha 4V (Xummad).

Haddii jawaabtu HAA tahay, waydii: **muddo intoo leeg? Haddii shubanku qaatay muddo ka badan 2 todobaad**, raac tilmamaha ku saabsan qiimaynta ee tusaha ku yaal una dir ilmaha cusbital. Warso: Ilamaha saxaradooda dhiig ma ku aragatay? Haa hadii ay tahay baar ,dhaqsana u gudbi.

| KA HUBI CALAAMADAHAN SOO SOCDA: |
| --- |
| • Si aan caadi ahayn u hurdaysan ama ay ku adagtahay in uu toosaa;<br>• Indhaha oo gota;<br>• Aan awoodin inuu wax cabbo ama aan waxbadan cabayn (sii ilamah dareere);<br>• Maqaarku marka la jiido si aad u qunyar ah ayuu dib ugu noqonayaa (2 ilbiriqsi iyo ka badan). |
| **ILMUHU MA LEEYAHAY LABA IYO KA BADAN OO CALAAMADAHAN AH?** |

**U sheeg ardayda:**
Hadda waxa aan isla eegi doonaa calaamad kasta oo ay tahay in aad raadiso marka aad qiimaynayso ilmaha leh shubanka.

Marka ilmuhu shuban qabo, waxa ka luma dareere. Haddii uu lumiyo dareere badan, waxa uu noqonayaa mid fuuq baxay. Waxa muhiim ah in la ogaado hadii ilmuhu fuuqbaxay si loo daaweeyo. Waa in aad ka eeegtaa calaamadihii fuuqbaxa dhammaan carruurta shubmaysa.
Now you will learn how to recognize the signs of dehydration.
Hadda waxa aad baran doontaa sida loo aqoonsado calaamadaha fuuqbaxa.

**KA HUBI CALAAMADIHII IN ILMUHU FUUQ BAXAY**

**Usheeg ardayda:**
Marka ilmuhu noqdo mid fuuqbaxay, waxa laga yaabaa in uu baaxaa dago oo caro dhawaado. Haddii uu sii wado luminta dareeraha, waxa laga yaabaa in uu noqdo mid u hurdaysan si aan caadi ahayn ama ay adagtahay in uu toosaa.

Marka ilmaha jirkiisu lumiyo dareere, indhihiisu waxa ay noqonayaan qaar gota.
Marka maqaarkiisa la soo jiidona, maqaarku si qunyar ah ayuu dib ugu noqonayaa.

Indhaha mari calaamadaha mid mid, adiga oo hubinaya in ardaydu fahmaan.
Ka warso ardayda waaya aragnimadooda carruur shuban ku dhacay.

**U sheeg ardyada:**
**FIIRI xaaladda guud ee ilmaha.**

Ilmuhu ma u hurdaysan yahay si aan caadi ahayn ama maku adagtahay in uu toosaa?

Marka aad ka eegtay calaamadaha guud ee halista, waxa aad eegtay in uu ilmuhu u hurdaysanayahay si aan caadi ahayn ama ay ku adagtahay toosiddu.
Waxa aad adeegsan doontaa isla calaamadahaa marka aad qiimaynayso fuuq baxa.

**Ilmuhu ma yahay "mid baaxaa dagaya oo caro dhaw"?**

Ilmo ayaad ku aragtay calaamadda "baaxaa deg iyo caro dhawi" haddii uu baaxaa dagayo oo caro dhawyahay markasta ama markasta oo la taabto ama laga shaqaynayo.

Haddii ilmuhu xasilan yahay marka naaska la nuujinayo hase ahaatee uu baaxaa dagayo ama caro dhawaanayo marka laga joojiyo naaska, waxa uu qabaa calaamaddii "baaxaa dagaya oo caro dhaw".

Carruur badan ayaa ka muraara dilaacda imaatinka goobaha caafimaadka.
Inta badan carruurtan waa la dejin karaa. Malaha calaamaddii "baaxaa dega iyo carada".

**KA EEG in indhuhu goteen.**

Indhaha ilmaha fuuqbaxay waxa ay u muuqan karaan qaar godan. Go aanso hadii aad u malaynayso in indhuhu goteen. Intaa ka dib waydii hooyada in indhuhu sii goteen intii uu shubanka yeeshay. Tani waa muhiim haddii ilmaha nafaqo darro hayso, waayo carruurta nafaqo daradu hayso indhahoodu waa gotaan mana kala garan kartid in godashada indhaha ay sababtay nafaqo daradu iyo in ay sababtay shubanku.

**SII ilmaha dareere.**

Ilmuhu ma awoodo in uu wax cabo ama cabidiisu ma fiicna? Waxa uu wax u cabayaa si u heelan cabidda ama haraadan?
Waydii hooyada in ay ilmaha ku siiso biyo koob ama malgacad. Eeg sida ilmuhu u cabayo.

Ilmuhu "ma awoodo in uu wax cabo" haddii aanu karayn in uu wax cabo ama nuugo ama liqo marka la siiyo cabitaan. Haddii aad ilmaha biyo afka uga shubto, waa ay ka soo daadanayaan mar kale . ilmaha waxa laga yaabaa in aanu awoodin in uu wax cabbo iyada oo sababtuna tahay in uu u hurdaysan yahay ama ay ku adagtahay in uu toosaa.

Ilmaha "cabitaankiisu ma fiicna" haddii uu tabar daranyahay oo aanu wax cabi karin taageero la'aan. Waxa laga yaabaa in uu wax liqi karo haddii dareere afka looga shubo.
A child has the sign "drinking eagerly, thirsty " if it is obvious that he wants to take a drink.

Ilmo ayaa qaba calaamadda "si u heelan ayaa uu wax u cabayaa, ama si haraad ka muuqdo" " haddii ay iska cadahay in uu rabo in uu wax cabbaa"

Fiiri si aad u aragto in ilmuhu qaadanayo koobka ama mulgaacadda marka aad biyaha ku siinayso. Marka aad biyaha ka celiso eeg in ilmuhu caroonayo, in uu rabo in uu cabo biyo badan awgeed.

Haddii ilmuhu ku qaadanayo cabidda marka lagu dhiiri galiyo oo qudha oo aanu rabin in uu cabo biyo badan, malaha calaamaddii "waxa uu u cabayaa biyaha si heelani ka muuqato, haraadan".

**QANJIIDHI maqaarka caloosha.**

Ma u noqonayaa si "Aad u qunyar ah" (2ilbiriqsi ama ka badan)?

Waydii hooyadu in ay jiifiso ilmaha sariir ama miis si uu ugu oolli kari si jiif ah oo gacmihiisuna ay labada dhinac ka hareero yaaliin (aanay madixiisa saarayn) lugahiisuna ay fidsanyihiin. Ama u sheeg hooyadu in ay ku qabato dhabta ugu qabato ilmaha si kala baxsan.

Hel barta u dhaxaysa xuddunta iyo dhinaca caloosha ilmaha.

Si aad u jiido maqaarka, adeegso suulka iyo farta koobaad (murdisoda). Ha adeegsan cidiyaha in ay sababi karaan xanuun awgeed.

Gacantaada u dhig qaab marka aad qanjaruufato maqaarka, sida uu maqaarka u laabmayo uu u noqda qaab kor iyo hoos ula socda jirka ilmaha ee aanu u noqon mid gudud ah.

Si adag u soo qabo lakabada maqaarka iyo nudayaasha ka hooseeya. Yara hay hal ilbiriqsi intaa kadibna sii daa.

Marka aad sii dayso maqaarka, eeg sida uu dib ugu noqdo (tiri hal, laba iyo ka badan oo ilbiriqsiyo ah in ay ku qaadato in uu dib ugu noqdo maqaarku).

**U sheeg ardayda:**
Hadda waxa aad baran doontaan sida loo qiimeeyo ilmo leh xumad.

Ilmo ayaa leh calaamadaha waawayn ee xumada haddii:

- Ay hooyadu tiraa ilmuhu xumad ayuu leeyahay ama xumad ayuu lahaa intii uu jiradan qabay;

AMA
- ilmuhu kulayl dareemayo.

Inta aad ka hubisay calaamadihii halista ee guud ee aad ka warsatay in "ilmuhu qufac leeyahay ama neefsigu ku adagyahay" iyo "shuban" kadib, waxa aad waydiin doontaa hooyada in ilmuhu xumad leeyahay.

**U sheeg tababaraha :**
Adeegso qodobadan soo socda ee muhiimka ah si ay kuugu kala cadaadaan iyo si aad u naqtiinto calaamadaha fuuq baxa:

QODOBO MUHIIM AH

- **Indhaha oo gota**
  Haddii aanad hubin in ilmuhu leeyahay indho godan, waydii hooyada in ilmaha indhihiisu intii caadiga ahayd ka godan yihiin.

  **Jiidistsa/qanjiidhinta maqaarka**

- Eeg in maqaarka calooshu, In marka la qanjiidhiyo uu dib ugu noqonayo si **qunyar ah ama aad u qunyar ah.**

- Isticmaal suulkaaga iyo murdisadaada, kor u jiid dhammaan lakabyada maqaarka iyo nudaha ka hooseeya, jiid maqaarka muddo hal ilbiriqsi ah intaa kadibna sii daa.

- Marka aad sii dayso maqaarka, eeg in maqaarku si qunyar ah ama aad u qunyar ah dibu ugu noqdo.

  **In si hammuun leh wax loo cabo, haraadan**
  Sii ilmaha biyo. Hadii aanu rabin ama qaadanayo inyar oonu isku dayin in uu inbadan ka qaato, uma cabayo si hammuun leh ama ooman.

**Fiiro gaar ah:**
*Sida loo sooco Fuuq buxu waxa uu inyar ka duwanyahay ka Qufaca ama Neefsiga oo adkaada.*

*Ardaydu waxa laga yaabaa in ay su aal ka qabaan sababta laba ama ka badan oo calaamado ah loogu baahanyahay si loogu aqoonsado in ilmuhu qabo fuuq bax halka looga baahanyahay kaliya hal calaamad si loogu aqoonsado in ilmaha Qufac hayo ama neefsigu ku adag yahay.*

*Jawaabtu waxa ay xiriir la leedahay gaarnimada iyo xasaasinimada calaamadaha, sidoo kale waxa suuro gal ah in aad sababto wareer hadii aad iskudaydo in aad sharaxdo. Waxa wanaagsan in aad ka caaw iso in ardaygu u aqbalo habkan sida uu yahay isaga oo aan sharax u raadin.*

## HABRAACA 3V

**WARSO HOOYADAA:**
"Ilmuhu inuu shubmayo?"

**HAA** ↓

**Ilaa Intee?**
**Saxarada oo dhiig leh?**

Haddii uu shubanka ka badan yahay 2 asbuuc, dhiig ayaa saxarada ku jiira, baar gudbina ilmaha

**GUDUB** ↓

### Ka baar calaamadahaan

- Huradada oo ka xumaata ama la toosin waayo
- Indhahoo gota
- Biyaha uusan cabeyn ama wax yar cabayo (ku day wax yar oo biyo ah)
- Soo jiiditaanka maqaarka **aad ma u daahaa** (2 il briqsi ka badan)

**ILAMAHU MA LEEYAHAY CALAAMADAHAAN QATARTA AH?**

**MAYA** ↓

Aad Habraaca 4V

**NO** →

### Check for these signs

- Restless and irritable
- Sunken eyes
- Child drinks thirstily (offer the child some fluid)
- Skin pinch goes back **slowly** (less then 2 seconds)

**DOES THE CHILD HAVE TWO OR MORE OF THESE SIGNS?**

**HAA** ↓ (Ka baar calaamadahaan)

**Fuuq bax daran**

**GUDUB** ↓

**Ku daawee qorshaha** *(fiiri sanduuqa 5V)*

- **Gudbi Ilamaha**
  - Haddii uu wax cabayo sii koop ORS
  - Talo sii hooyada marka la gubinayo
- **Haddii ay gudbin suura gal ahyn**
  - Sii cabitaan ORS ah haddii uu cabayo dabagaina ku samee
  - Sii cadada hore ee kaniiniga zinc 6 saac ka dib marka aad ku billowdo daaweynta ORS *(fiiri sanduuqa 8V)*
  - Talo sii hooyada iyo in ay si dhaqso u soo celiso haddii uu darsado *(fiiri sanduuqa 1V iyo 2V)*

**HAA** ↓ (Check for these signs)

**Fuuq bax dhexe**

**GUDUB** ↓

**Ku daawee qorshaha B**
*(fiiri sanduuqa 6V)*

- Sii koopka ugu horeeyo ee ORS
- Sii hooyada 2 packet oo ORS
- Sii kaniiniga Zinc
- Talo siinta hooyada iyo xaaladaha lagu soo celinaayo *(fiiri sanduuqa 1V, 2V iyo 8V)*

**Aad Habraaca 4V** ↓

**MAYA** ↓ (Check for these signs)

**Ma jiro fuuq bax**

**GUDUB** ↓

**Ku daawee qorshaha A**
*(fiiri sanduuqa 7V)*

- Sii kaniiniga Zinc tab
- Talo sii hooyada iyo xaaladaha ay ku soo celinayso *(fiiri sanduuqa 1V iyo 2V)*

Waxa aan idiin akhrin doonaa daraasad xaaladeed oo ku saabsan ilmo qaba shuban. Qor xogta adiga oo adeegsanaya buugga diwaan galinta. Intaa kadibna sooc ilmaha adiga oo adeegsanaya tusaha.

## Layli 15: Aden

Aden waa ilmo 2sanno jira. Hassan wax waa cabi karaa. Malahayn wax qalal ah ilmuhuna uma hurdaysna si aan caadi ahayn amaba kuma adka in uu toosaa. Aden malaha qufac ama neefta oo ku adkaatay.

**SoocAden.**

Ilmuhu waxa uu lahaa shuban muddo 2 cisho ah. Saxaradiisa wax dhiig ahi lama socdo. Indhihiisu waxa ay ka godan yhiin intii caadiga ahayd. Wax cabiddiisu ma wanaagsana. Maqaarkiisuna marka la jiido si qunyar ah ayuu dib ugu noqonayaa.

**Sooc Aden.**

*Intaa kadib waydii ardayda: Sidee ayaydun usooci Aden?*

### Jawaabta Layli 15: Aden

Aden waxa loo gartay in aanu LAHAYN CALAAMADIHII GUUD EE HALISTA iyo FUUQ BAX HALIS AH toona.

## Layli 16: Medina

Medina waa ilmo 5bilood jirta.

Adeegaha caafimaadku waxa uu hubinayaa sidoo kalena ka eegayaa Calaamadaha Guud ee Qatarta ah.

Medina waxa ay cabaysaa wax ka yar intii caadiga ahayd hase ahaatee wax waa cabi karaysaa.

Waxa ay lahayd qalal sadex bilood ka hor.

**Sooc Medina.**

Medina a waxa ay lahayd shuban muddo 3 cisho ah, ma baaxaa dagayso manay caro badan. Indhaheedu waa godan yhiih maqaarkeeduna marka la jiido si aad u qunyar ah ayuu dibu ugu noqonayaa.

**Sooc Medina.**

*Then ask to the learners: How did you classify Medina?*

### Jawaabta Layli 16: Medina

Medina waxa loo gartay in AANAY LAHAYN CALAAMADIHII GUUD EE HALISTA, SHUBAN IYO FUUQ BAX DARAN toona.
**Soocida ilmaha qaba shuban iyo Xoogay Fuuqbaxa.**

**U sheeg ardayda:**
Imika marhaddii aad ka eegtay calaamadihii fuuqbaxa, waad ka jawaabi kartaa su aalaha ku jira sanduuqa koobaad: **"ilmuhu ma leeyahay laba iyo kabadan oo calaamadahan ah?".** Haddii jawaabtu HAA tahay raac jidka HAAda si aad u aaddo sanduuqa FUUQ BAXA DARAN.

Haddii jawaabta su aasha sanduuqa koobaaad ku jirta **"ilmuhu ma leeyahay laba iyo ka badan oo calaamadaha soo socda ah?"** ay tahay **MAYA**, raac jidka MAYA da ilaa aad ka gaarto sanduuqa dhanka midig. Sanduuqani waxa uu kuu sheegayaa calaamadaha ay tahay n aad adeegsato si aad u samayso soocidda FUUQBAX XOOGAY AH.

Ogow in calaamadaha ku yaala sanduuqa dhanka midig ay ka duwan yihiin kuwa ku yaala sanduuqa dhanka bidix, marka laga reebo " indhaha godan", kuwaasoo ku jira labada sanduuqba.

**U sheeg ardayda :**
Marka aad ka gudubto jidka MAYAda ee aad gaarto sanduuqa labaad (ku tilmaan tusaha guudkiisa), hubi in ilmuhu leeyahay calaamadaha lagu taxay sanduuqa dhexdiisa.

Waxa aad ilmaha ka eegtay calaamadahan oo dhan. Ka jawaab su' aaasha ah **"ilmuhu ma leeyahay LABA iy ka badan oo calaamadahan ah ?".**

Haddii ilmuhu leeyahay laba ka mid ah calaamadahan ku jiran sanduuqa, jawaabtu waxa ay noqonaysaa HAA waxaanad raacaysaa jidka HAA ilaa aad ka gaarto sanduuqa FUUQBAX XOOGAY AH.

Ilmaha fuuq bax xoogay ah lihi waxa uu u baahanyahay daawayn. Waxa aad baran doontaa daawayntan marka aad gaarto qaybta III.

**Tababaraha:**
La falanqee waxa sanduuqa ku jira ardayda. Hubi in ay fahmaan farqiga u dhaxeeya calaamadaha ku jira labada sanduuq ee qiimaynta iyo in ay muhiim tahay inla helo LABA CALAAMADOOD ama KA BADAN si loo sameeyo soocidda. Haddii ilmuhu leeyahay ka yar laba calaamadood kuwa sanduuqa ku jira, MALAHA soocidda sanduuqu khuseeyo.

## Layli: Jaantus

U adeegso layligan si aad uga caawiso ardaydu in sameeyaan qiimaynta iyo kala soocidda SHUBANKA iyo FUUQ BAXA.

Waydii ardaydu in ay dhagaysato taariikhda marka aad akhriyayso iyo in ay qoraan xogta iyaga oo adeegsanaya buugga diwaanka.

## Layli 17: Hassan

Hassan waa ilmo 3 jir ah waanu shubmayay muddo shan maalmood ah.

Hassan waxa uu wax u cabayaa si ka badan intii caadiga ahayd. Malahayn wax qalal ah intii jiradani haysay. Uma hurdaysna si aan caadi ahayn kumana adka in uu toosaa.

**Note:**
*si kastaba ha ahaatee, mar haddii aanu adeegaha caafimaadku isticmaali doonin dareere xadidka laga siiyo, waxa badbaado badan in loo sooco carruurta shubanka leh in ay yihiin qaar si aad ah uga fuuqbax san sida ay u muuqdaan. Haddii ay ku adkaato in ay go aamiyaan in ilmuhu fuuqbaxay iyo inkale, waa in ay u tixgaliyaan in uu fuuq baxay. Isla goortaa, waxa u wanaagsan in ay sameeyaan soocidda saxa ah.*

**Sooc Hassan**

Hassan waa qufacayay muddo laba cisho ah. Adeegaha caafimaadka ee bulshadu waxa uu tiriyay neeftiisa waxaa u neefsigisu noqday 38 daqiiqadii.

**Sooc Hassan**

Hassan has had diarrhea for five days. Hassan is restless and irritable and his eyes are sunken. The child drinks eagerly.  Skin pinches it goes back slowly.

**Sooc Hassan**

*Intaa ka dib waydii ardayda: sidee ayaad u soocday Hassan?*

Jawaabta Layli 17: Hassan

Hassan MALAHA CALAAMADIHII GUUD EE HALISTA, MA QABO OOF WAREEN iyo SHUBAN XOOGAY FUUQBAXA LEH.

## Layli 18: Medina

Medina waxay jirtaa 7 billood.

Hooyadeed waxay tiri ilamahu wuu shubmayaa.

Ilmahu ma qabo calaamadaha Qatarta Ah.

**Sooc Medina**

Ilmuhu waxa uu qabay Qufac muddo 3 dex berri ah waxeyna u ekeyde qof leh neef gur ACT waxa uu tiriyay 52 neefsi daqiiqadii.

**Sooc Medina.**

Medina waxay qabtay shuaban 7 berri ah .Medina ma caryesna waana degan tahay laakiin waxa ay leedahay il g'o,biyahana aad ayay u cabeysaa.Maqaarka marka la soo jiido wuu daahayaa dib ayuu u noqonayo in ka yar 2 ilbiriqsi.

*Warso tababaraha:Sidee u Sooceysaa Medina?*

Jawaabta Layli 18: Medina

Medina ma laha Calaamadaha Qatarta ah.
Medina waxay leedahay neef gur ka badan 50 daqiiqadii.
Adeegaha caafimaadka Tuulada waxa uu ku tilmaamay in uu qabo: QAARJEEX, SHUBAN IYO XOOGAA FUUQ BAX AH.

## Layli 19: Mariam

Mariam waxa ay jirtaa 2 sano.Mariam waxa waa cabi kartaa, Qalalna ma qabto intii ay jiraneyde. Mariam Huradeeda waa wanaagsantahay waana la kicin karaa.

**Sooc Mariam.**

Mariam waxa ay qabatay Qufac 7 cisho ah, neefsigeedu waxa uu ahaa 38 daqiiqadii.

**Sooc Mariam.**

Mariam waxa ay qabatay Shuban mudoo 3 berri ah.Mariam ma careysna waana deggan tahay.Mariam ma il G'ona si caadi ahna waxa waa u cabeysaa.Mariam maqaarkeeda marka la soo jiido si dhaqso ah ayuu dib u laabanayaa.

**Sooc Mariam.**

*Warso Tababraha: Sidee u sooceysaa Mariam?*

Jawaabta Layli 19: Mariam

Mariam MA LAHA CALAAMADAHA QATARTA AH AMA QAARJEEX .Mariam ma laha Neefgur. Sidaa awgeed Mariam waxa ay qabtaa QUFAC ama DURAY, SHUBAN, FUUQ BAXNA MA LAHA.

**Tababaraa:**
Hadda, waydii ardayda in ay ka shaqeeyaan layliga xiga. U akhri xogta hubina in lagu qoro buugga diiwaanka. Marka ay qoraan dhammaan xogta, waydii in ay ka go aan qaataan kala soocidda. Hubi oo la falanqee go aamada ardayda si gaar gaar ah intaa ka dibna la falanqee fasalka o dhan.

**Soocidda ilmo qaba SHUBAN AANSE FUUQBIXIN.**

**U sheeg ardayda:**

Haddii ilmaha shubanka qaba aan lagu arag laba calaamadood oo ku jira sanduuqa qiimaynta koobaad ee fuuq baxa waxa aad raacdaa jidka MAYADA ilaa aad ka gaarto sanduuqa qiimaynta ee labaad.

Haddii jawaabta su aasha sanduuqan ku jirta "ilmuhu ma leeyahay LABA iyo ka badan oo calaamadahan ah?" ay tahay MAYA, waxa aad qaaddaa jidka MAYAda ilaa aad ka gaarto sanduuqa MA LAHA FUUQ BAX. Ilmahani ma qabo fuuq bax hase ahaatee hooyadu waxa ay u baahantahay talo si loo hubiyo in aan ilmuhu fuuq beelin.

**U sharax ardayda:**

Eeg tusaha taxan: waxa uu muujinayaa jidka aad qaadayso si aad ilmaha shubanka qaba ugu soocdo si waafaqsan calaamadaha aad ku aragtay.

Waxa aan dib u eegis kusamaynay qaybtan anaga oo adeegsanayna tusaha waxaanan ku waydiin doonaa in aad sanduuq kasta eegto adiga oo raacaya jidadka HAAda iyo MAYAda waxaanad sharaxdaa sababta aad ku dooratay in aad qaado jidka HAAda ama MAYAda.

U adeegso layligan si aad dib u eegis ugu samayso adeegsiga tusaha.

Marka aan dhamayno dibu eegista ka dib, waxa aad daawan doontaa fiidiyaw si aad u xusuusataan intaa ka dibna waxa aan ka shaqayn doonaa xoogaa laylisyo ah ka hor inta aynaan u gudbin kalfadhiga u dambeeya.

## Layli G: Layli fiideeyo iyo daraasad xaaladeed "ilmuhu shuban ma leeyey?"

**U sheeg ardayda :**

**Layligan fiidiyaha ku jira, waxa aad ku baran doontaa:**
- Eeg tusalayaasha carruurta shubanka qabta kuwaasoo leh calaamadahan soo socda ee fuuqbaxa;
- Daawo tusmada qiimaynta shubanka iyo sida loo sooco fuuqbaxa;
- Ka shaqee layliga si aad u barato sida lagu garto indhaha godan iyo maqaarka oo si qunyar ah ama aad qunyar u ah dib ugu noqda.

U sharax ardaydu in ay ku qoraan jawaabahooda layliska iyo daraasadda xaaladaha xaashida shaqada ee Layli G.

Gabagabada layslis kasta, jooji mashiinka. Haddii ardayda qaar ay dhibi ka haysato aqoonsiga calaamad gaar ah, cajaladda dib u cali si aad marlabaad u tusto halka ay fahmi waayeen. Kala hadal qodobkaa ka mid ah layliga ee ay fahmi waayeen una tilmaan ardayda halka ay tahay in ay eegaan si ay u arkaan calaamadda.

Gabagabada fiidiyaha, samee falanqayn kooban. Haddii ardayda qaar ka mid ah dhibi haysato, sii tilmaanta ay u baahan yihiin. Xoogga saar qodobadan inta falanqayntu socoto:

- Hadii uu maqaarku buurto xatta muddo aad u yar marka aad sii dayso maqaarka ka dib, tan macnaheedu wa in uu maqaarku qunyar dib ugu noqonayo. Maqaarka dhakhso dib ugu noqdaa waa mid si aad u dhakhso badan u noqda oo aanad xattaa arki karin wax buurraan ah marka aad sii dayso.
- Jiid maqaarka markale haddii aanad hubin. Hubi in aad ku samaynayso halkii saxa ahayd.
- Mararka qaar carruurta jirran ama aadka u daalani kama fal caliyaan taabashada ama codka. Waa in aan loo tixgalin in uu u hurdaysan yahay si aan caadi ahayn ama ay ku adagtahay toosiddu. Way adagtahay in tan laga garto fiidiyaha iyada o osababtuna tahay in aanad arkayn ilmaha wax ka badan daqiiqado. Haddii aad marka hore u qaadato in ilmuhu si aan caadi ahayn u hurdaysan yahay ama ay ku adagtahay in uu toosaa oo uu noqdo mid feegian marka dambe inta baaristu socoto, ha u tixgalin in ilmahani leeyahay CALAAMADIHII GUUD EE QATRATA AH "si aan caadi ahayn u hurdaysan ama ay ku adagtahay in uu tooso ama miyir la'".

### Jawaabtas Layli G

1. Ilmo kasta, ka jawaab su aasha:

| | Ilmaha indhihiisu ma godanyihiin ? | |
|---|---|---|
| | HAA | MAYA |
| Ilmaha 1 | | |
| Ilmaha 2 | | |
| Ilmaha 3 | | |
| Ilmaha 4 | | |
| Ilmaha 5 | | |
| Ilmaha 6 | | |

### Answers to Video Exercise G

2. For each child, answer the question:

| | Maqaarku sidee ayuu dib ugu noqanayaa : | | |
|---|---|---|---|
| | SI AAD U QUNYAR AH? | QUNYAR? | SI DHAKHSO AH? |
| Ilmaha 1 | | | |
| Ilmaha 2 | | | |
| Ilmaha 3 | | | |
| Ilmaha 4 | | | |
| Ilmaha 5 | | | |

## Daraasad xaaladeed- fiidiye

Daawadsii daraasadda xaaladda oo u sheeg ardaydu in ay ku qoraan calaamadaha ilmaha foomamka wax lagu qoro.

Intaa kadib waa in ay iyagu soocaan xanuunka ka hor inta aanay dhagaysan jawaabta fiidiyaha.

Fiidiyaha ka dib, u adeegso xaaladda si aad u falanqayso dhibaatooyinka iyo waxyaalihii aan la fahmin ee ku saabsanaa qiimaynta iyo kala saarista shubanka.

Intii aad ka hubisay CALAAMADIHII GUUD EEHALISTA, ee aad waydiisay in uu jiro qufac ama neefta oo kuadagi kadib, waxa aad waydiin doonta hooyada in ilmuhu leeyahay xumad.

**Kalfadhiga bukaansocodka: Shubanak iyo Fuuqbaxa**

**Note for the Trainer:** hadda waxa aad ku jirtaa gabagabadii maalinta sadexaad ee tababarka, si waafaqsan qorshihii iyo jadwalkii, kalfadhiga barri subaxna waxa lagu qaban doonaa waaxda bukaans socodka.

Si shaqada laguugu fududeeyo, waxa aan habaynay shaxano koobaya habka loo qabanayo kalfadhiyada bukaan socodka maalin kasta. Waxa aad ka heli kartaa shaxanadan warka koobani ku qoran yahay dhammaadka cutubkasta.

| SHAXANKA GUNDHIGA AH | |
|---|---|
| **Diyaar garow** | • Waydii ardaydu in ay soo qaataan bugaagtooda oo ay ku jiraan nuqulo ka mid ah buugga diiwaan galinta iyo foomamka wax lagu qoro.<br>• Soo qaad ama hubi in ardaydu haystaan saacado. |
| **Ujeedada ka qaybgalayaasha** | • Qiimee oo u kala saar carruurta labadii xaaladood ee la bartay.<br>• Baro sida loo adeegsado buugga diiwaanka ama foomamka wax lagu qoro goobaha bukaan socodka.<br>• Adeegso hab wada xiriir oo wanaagsan: salaan hooyada, u dhagayso si taxadar leh, ku hadal luqad la fahmi karo, adeegsona erayo hooyado fahmayso. |
| **Habka hawl fududeeyuhu marayo** | • Dooro carruur jirro uuni hayso.<br>• Isbar ACT iyo shaqaalaha caafimaadka iyo xarunta, habka guud ee loo maareeyo bukaan socodka, una tilmaan halka alaabadu taalo.<br>• Tus sida loo eego loona sooco ilmaha.<br>• U qaybi bukaanka ardayda.<br>• Lasoco sida arday kastaa ula dhaqmayo ilmaha a. Haddii aanad arki karin, waydii in ardaydu ay soo bandhigaan xaalad ama eeg buuga diiwaanka ama foomka ay wax ku qoreen.<br>• Adeegso agabkaaga korjoogtaynta si waafaqsan cidda aad tababarayso.<br>• Usii war iyo tilmaan hadba sida loogu baahdo.<br>• U celi ilmaha xarunta caafimaadka adiga oo raacinaya qoraal ku saabsan daawaynta, ama u sii daawo si waafaqsan qorshaha. |
| **Gababada kalfadhiga** | • Hoggaami falanqaynta si loo soo koobo kalfadhiga adigoo islamarkaana warkasiinaya ardayda xirfadihii latu tababartay maalintaa<br>• Sii warcelin ardayda. |

# 6. Barista xumadda  actyada

**U sheeg ardayda:**
Ilmo xummad leh waxa laga yaabaa in uu qabo kaneeco ama jirro kale oo halis ah, ama qufac ama hargab iska caadi ah ama jirro kale oo virus.

La falanqee ardayda kaneecada. Ogow waxa ay u haystaan ama ay ka yaqaanaan waxaanad adeegsataa qaybtan soo socoto si aad uga caawiso in ay fahmaan waxa kaneecadu tahay.

**DUUMO/KANEECO**

Duumada waxa sababa dulin dhiiga raaca kaasoo ay faafiso kaneecadu.

Qandhadu waa calaamadda u wayn ee kaneecada. Waa joogi kartaa qandhadu markasta ama waa tagi kartaa oo hadba soo noqon kartaa.  Calaamadaha kale ee kaneecada waxa ka mid ah gariir, dhidid, hunqaaco iyo qufac.

Calaamadaha kaneecadu waxa ay u ekaan karaan kuwa cuduro kale. Tusaale ahaan, ilmaha waxa laga yaaba in uu kaneeco qabo oo qufaco isaga oo isla markaana neeftiisu noqonayso mid dhakhso badan, calaamad oofwareen. Ilmahani waxa uu u baahanyahay in laga daaweeyo kaneeco iyo oof wareen labadaba.

Carruurta qabta kaneecadu waxa kale oo ay yeelan karaan shuban. Carruurtan waxa ay u baahantahay daawadii kaneecada iyo tii shubanka labadaba.

Meelaha kaneecadu ku badan tahay, kaneecada ayaa ah mid ka mid ah kuwa sababa dhimashada u badan ee carruurta.  Xaalad kaneeco oo aan kakanayn ayaa samaysmi karta muddo 26saacadood gudahood ah intii la arkay xumadii koobaad.

Ma tahay kaneeco daran sida ta ku dhacday maskaxda ama mid wadata dhiig la'aan daran. Haddii ay sidaa tahay, waxa laga yaabaa in ilmuhu u dhinto haddii aanu daawo degdeg u helin.

**U sheeg ardayda:**
Hadda waxa aad baran doontaan sida loo qiimeeyo ilmo leh xumad.

Ilmo ayaa leh calaamadaha waawayn ee xumada haddii:

- Ay hooyadu tiraa ilmuhu xumad ayuu leeyahay ama xumad ayuu lahaa intii uu jiradan qabay;

  **AMA**

- ilmuhu kulayl dareemayo.

Inta aad ka hubisay calaamadihii halista ee guud ee aad ka warsatay in "ilmuhu qufac leeyahay ama neefsigu ku adagyahay" iyo "shuban" kadib, waxa aad waydiin doontaa hooyada in ilmuhu xumad leeyahay.

Waydii hooyada in: **"ilmuhu xummad ma leeyahay ?"**

Hubi in ilmuhu lahaa xumad ama dareemayay kulayl. Ilmuhu waxa uu lahaa xummad haddii jiradan xumadi ula socotay.

- U adeegso xumadda eray hooyadu fahmi karto.
- Hubi in hoooyadu fahamsantahay waxa xumaddu tahay.Tusaale ahaan, waydii hooyada in jidhka ilmuhu uu kululaa.
- Taabo caloosha ilmaha si aad u eegto in ilmuhu kulul yahay.

Hadddii ilmuhu AANU LAHAYN xummad (taariikh iyo taabasho toona), ha ku sixin su aaasha ah "ilmuhu xumad ma leeyahay?" foomka wax lagu qoro.

Haddii ilmuhu xumad leeyahay (taariikh iyo taabasho miduun)ku sax su aasha ah "ilmuhu ma leeyahay xumad?" foomka wax lagu qoro dushiisa. Intaa ka dib waydii: muddo intee leeg? Hadii ay jirtay mudo ka badan 1 todobaad, calaamadi jawaabta ku taal foomka siinawad in aad ilmaha ka eegto calaamadaha kale ee la xiriira xumadda.

Ka eeg ilmaha xumad haddii aanu hadda kululayn. Taariikh xumadeed kuma filla in lagu qiimeeyo xumadda.

**ASK THE MOTHER:**
"Does the child have fever or feel hot?"

YES

**ASK: for how long?**

If FEVER has lasted more than 7 days, continue to assess the child and then **refer.**

THEN

**Look and feel for stiff neck**

**DOES THE CHILD HAVE STIFF NECK AND/OR ANY GENERAL SIGNS?**

NO → **Perform RDT**

YES

**Very severe fever disease**

THEN

**REFER THE CHILD**
This child has a severe illness.
There must be no delay in the treatment

- Go quickly to charts 1, 2V and 3V
- Give treatment**:**
  - **first dose of amoxycillin** for severe classification *(box 3V).*
  - **artesunate/Sp tbs**, if the child can drink (box 10V).
  - **rectal artesunate** if the child is not able to drink *(box 9V).*
  - **ORS** if needed
  - **fluid with sugar** *(box11V).*

**IF REFERRAL IS NOT POSSIBLE**

- Treat and follow-up the child at home.
- Adv the mother on home care and when to return immediately *(box1V and 2V).*

POSITIVE

**Malaria**

THEN

- **Give treatment** for malaria and follow up the child at home *(box10V).*
- **Advise the mother** on home care *(box1V)* and **when to return ammediately.**

NEGATIVE

**NO Malaria**

THEN

- **If referral is not possible**, reassess the child in 8 to 12 hours.
- Advise the mother on home care *(box 1V)* and on **when to return immediately.**

Be sure that you have not jumped any step of the 4 flowcharts, and that you ticked (✓) all the points of the recording form.

**BARISTA ACTga SIDA DHAKHSO LOOGU BAARO DUUMADA/KANEECADA**

**Tusaalaha Tababaraha**

**Samaynta jaantuska**

Dib u eegis ku samee tilmaamahan faahfaahsan si taxadar leh. Waxa ay ku siinayaan xog muhiim ah oo xoojinaysa talaabooyinka ku jira buug hawleedka ACTka. Inkasta oo ay noqon karaan qaar aad u faahfaahsan haddii lays yiraa ugu isticmaala tusaale ahaan fasalka dhexdiisa, hadana waa qaar aad muhiim ugu ah ka jawaabidda su aalaha.

**WAAFAJIN/WAX KA BEDDEL:**

*Haddii aad barayso ardaydu in ay adeegsato qalab RDT oo ka duwan kuwii hore, ugu badal tilmaamaha ku jiran buug hawleedka ACT iyo kuwa hoosta laguugu qoray kuwa ay bixiso barnaamijka dawladda ee la dagaalanka kaneecadu.*

*Haddii wax tilmaam ahba aanay bixin barnaamihka dawladdu, adeegso tilmaamaha ay bixisay cidda soo saartay agabka ee la socda agabka. Inta tusmadu socoto, ardaydu waxa ay akhrin kartaa talaabooyinka tilmaamaha badalka ah, halkii ay ka akhrinlahayd kuwa ku qoran buug hawleedka ACTga.*

*Xusuusi ACTka in noocyada RDT yada ee laga heli karo dalkoodu uu isla badali karo cidda hadba bixisay. Waxa aad muhiim au ah in la akhriyo tilmaamaha markasta oo la helo nooc cusub oo RDT ah.*

**U diyaari agabka oo dhan si loo isticmaalo:**

1. Agabka baarista degdega ah lagu sameeyo (RDT).
2. Spirit (alcohol).
3. Maqas.
4. Disposable gloves.
5. Milan base ah.
6. Saacad.
7. Sanduuq waxyaalaha wax muda lagu rido.
8. Meel qashinka lagu shubo (waxyaalaha aan caarada lahayn).
9. Qualin iyo calamadeya.
10. Haddii la heli karo ama ay ku taliso dawladdu, daawada la siiyo marka qof looga shakiyo in uu qaaday HIV/AIDS (anti-retroviral post exposure prophylaxis (PEP)). DVD, haddii mid la heli karo lagu tuso sida loo adeegsado waxyaalaha baarista degdega ah lagu sameeyo.

**Jaantuska Tababaraha**

1. U sheeg ardaydu in ay isu soo dhawaadaan si ay u sameeyaan goobo ku hareeraysan miiska jaantuska, iyo in ay keenaan buug hawleedka ACT.
2. Bilaw tusaalaha. Ka qaybgalayaashu waxa ay arki doonaan- agabka la isticmaalo marka la samaynayo baarista dhakhsaha ah ee kaneecada, fur qalabka, marka la magacaabo midkasta o oka mid ah agabkan, kor u qaad walaxdaas oo tus, halka ay ka taal miiska jaantuska. Intaa kadib tus walaxda dhammaan k aqayb galayaasha. Waxa aad ogaataa in ACTku aanay hore u arag walxaha intoodabadan (tusaale, maqas, galoofyo, milan base ah, sanduuq waxyaalah afka dhuuban lagu rido), inkasta oo adeegayaasha caafimaadku ay baran doonaan.
3. U sheeg ardayda in ay akhriyaan talaabo kasta oo ku jirta buug hawleedka (ama tilmaamaha badalka ah), iyaga oo miiska isku weejinaya. Talaaabo kasta marka la akhriyo kadib, joogso si aad u tusaalayso tallaabadaa.
7. Codso qof is xilqaama. Ku qor magaca qofka is xilqaamay baarista intaa kadibna hore usi wad baarista dhiigga qofka is xilqaamay.
8. Hubi in ka qayb galayaashu si wacan u arki karaan, xattaa godadka ku yaal suunka wax lagu baaro. Iyo in aad qortay waqtiga aad ku dartay baseka.
9. Marka ay dhamaato tusaaluhu, waydii in su aalo jiraan.
10. Intaa ka dib tus ardayda halka ay ka heli karaan kaaliyaha shaqada RDT ee ku jira buug hawleedka ACT.
11. Talaabada xigta waxa ay noqonaysaa in ay bartaan sida loo sameeyo RDTga.
12. Intaa kadib, waxa aad tusi doontaa sida loo akhriyo jawaabta baarista.

## Layli: Samee baaris degdeg ah (RDT) Tababaraha

**Usheeg ardayga:**
Layli: Samee baaris degdeg ah (RDT) Tababaraha.
1. Qalab dhakhso wax loogu baaro, hal ardaykasta sii.
2. Spirit (alcohol) wax lagu masaxo, arday kasta hal sii.
Maqasyo, arday kasta hal sii.
Galoofyo , arday kasta hal sii.
Base, hal dhalo labadii ardayba.
Saacad, hal saacad oo wayn qolkasta, ama mid yar labadii ardayba.
Hal sanduuq oo waxyaala afka leh lagu rido, mid yar labadii ardayba ama mid wayn kooxda oo dhan.
Weel qashinka lagu rido (mid aan waxa afka leh lagu ridin), mid fasalka oo dhan ka dhexeeya.
Qalin qorri ama qalin geet.

**U sheeg Layliga. Ardaydu waxa ay :**
- U habee agabka lagu samaynayo baarista kaneecada ee RDTga, adiga oo adeegsanaya agab laga heli karo dalka.
- Raac habka saxa ah marka aad u samaynayso RDTga hal qof.

1. U qaybi ka qayb galayaasha laba ama sadex kooxood si ay u bartaan samaynta RDTga.
2. U sheeg ka qayb galayaasha in ay sharxaan sida ay u raacayaan tilmaanta si ay: 1. U habeeyaan agabka iyo 2. In ay sameeyaan baarista. Ka jawaab su aalaha.
3. La soco oo wax ugu tilmaan ardayda sida ay hadba ugu baahdaan marka ay samaynayaan ee ay iskuduba ridayaan agabka baarista iyo in ay sameeyaan baarista. Arday kasta waa inuu ku sameeyo baaris cidda ay wada shaqaynayaan. Xusuusi, sida hadba loogu baahdo, in ay qoraan waqtiga marka ay ku daraan baseka ka dib.
4. Marka ardaydu dhamayso baarista ka dib, waxa ay u rabi doonaan in ay bartaan sida loo akhriyo jawaabta.

**FIIRO GAARA**

*Hayso agab dheeraad ah oo aad adeegsato hadii loo baahdo in dib loogu noqdo baarista. Sidoo kale hayso laba ilaa sadex daawooyinka loo adeegsado haddii qof uu u banbaxo viruska keeno HIVga si aad u yarayso halista HIV/AIDS haddii qof si kama' ah isugu jaro maqas ama shay kale oo leh dhiig wasakhaysan.*

## Layli: Akhri RDTga

**Tababaraha:**

- Isticmaal RDT adiga aad isticmaashay iyo kan ardada isticmaashay si loogu barto akhrinta. RDT
- Qaybta sadexaad, u munguuri jawaabta RDTga ee muunada ah layliga (sida loo akhriyo baarista degdega ah, bugaagtooda).
- Haddii nooc kale oo RDT ah la adeegsaday, ka dhig kaararka muunadda ah ee jawaabaha qaar ku habbon in ay adeegsadaan.

**Tababaraha:**

**U soo bandigh layliga. Ka qab galayaashu waxa ay:**

- U akhri jawaabta baarista si loo go'aamiyo in jawaabtu tahay mid togan, taban, anay waxba ka jirin.
- Go aanso in aad qofka ka daawaynayso kaneeco iyo haddii kale, iyo haddii jawaabtu tahay mid aanay waxba ka jirin si aad baarista dib ugu celiso hadana.

## Laylis K1: sida loo akhriyo baarista (RDT)

| Xaaladda Tiro. | Togan haa | Taban maya | Khalad |
|---|---|---|---|
| 1. | | | |
| 2. | | | |
| 3. | | | |
| 4. | | | |
| 5. | | | |
| 6. | | | |
| 7. | | | |
| 8. | | | |
| 9. | | | |
| 10. | | | |
| 11. | | | |
| 12. | | | |

## Laylis K: sida loo akhriyo baarista (RDT)

| Xaaladda Tiro. | Togan haa | Taban maya | Khalad |
|---|---|---|---|
| 1. | | | |
| 2. | | | |
| 3. | | | |
| 4. | | | |
| 5. | | | |
| 6. | | | |
| 7. | | | |
| 8. | | | |
| 9. | | | |
| 10. | | | |
| 11. | | | |
| 12. | | | |

**Qaybta 1. Akhri jawaabta baarista tusaaalaha ah**

Usheg in ardaydu ay eegaan qalabka baarista lagu samaynayo oo ay akhriyaan jawaabta. Intaa kadib, calaamadi [•] goaanka—aan sax ahayn, togan, ama taban sabuuradda cad. Hubi in arday kastaa marka hore eego in baaristu sax tahay. Haddii ay sax tahay, hubi go aanka arday kasta ee jawaabta—togan ama taban. Waydii ardayda waxa macnaha jawaabtu yahay.

**Qaybta 2. Akhri jawaabta baarista aad dhamaysay (ka qaybgalayaasha)**

**Intaa kadib, waydii ardaydu in ay hubiyaan waqtiga ay qoreen iyaga oo tilmaamaya goortii ay  ku shubeen baseka suunka wax lagu baaro. Haddii 15 daqiiqadood kasoo wareegtay, waa inay markaa:**

- Go aansadaan in baaristu sax ahayd, haddii ay sax ahayd,
- Go aansadaan waxa jawaabtu tahay—mid togan ama taban, iyo
- Sax jawaabta (sabuurada dusheeda).

Dhex wareeg fasalka si aad u hubiso jawaabaha arday kasta.

- Hadii baaristu aanay sax ahayn, sii ardayda agab si ay ugu celiyaan baarista.
- U sheeg ardaydu in ay ku tusto jawaabta marka hore cidda ay wada shaqaynayaan, intaa kadibna kuwa kale ee qolka kula jira, si ay u hubiyaan jawaabta. Sii dadka fursad ay ku arkaan jawaabaha ugu badan ee suura galka ah.

Ogow: haddii mid ka mid ah ardayda laga helo kaneeco, hubi in uu helo daawadii kaneecada ee habboonayd.

**Qaybta 3. Layli dheeraad ah oo ku saabsan sida loo akhriyo jawaabta baarista (kaarak iyo fiidiye).**

Si tababar badan loogu sii qaato, qaybi kaarar leh muunado ah jawaabtii RTDga, adiga oo qofkasta mid siinaya.

- U sheeg ardaydu  in ay qoraan tirada baarista iyo jawaabta baaris kasta iyaga oo ku qoraya warqadda la siiyay.
- Marka aad hubinayso jawaabaha, isku badashsa kaararka ilaa arday kastaa uu ka eegayo jawaabaha 5 baarisood. Isku day in aad hubiso in ardayda uu mid kastaa haysto tusaalayaal jawaabo aan sax ahayn, laga helay iyo qaar laga waayay wax intaba.
- Kooxda badan dhexdeeda, isla falanqeeya oo soo uruuuriya wixii mashaakil ah ee ay la kulmaan ardaydu.
- Waxa kale oo aad adeegsan kartaa cajalad fiidiye si aad ugu badasho kaararka, ama aad u siiso wax baris dheeraad ah. Jawaabaha waxa kale oo laga heli karaa xaashida jawaabaha ee LifaaqaD.
- Haddii RDTgu togan yahay , afka ka sii daawooyinka kenaacada.

**Haddii RDTgu togan yahay, afka ka sii daawooyinka kenaacada**

**Ogow:**
*haddii mid ka mid ah ardayda laga helo kaneeco, hubi in uu helo daawadii kaneecada ee habboonayd.*

**U sheeg ardayda:**

Hadda waxa aad baratay waxa xummadu tahay iyo sida loo baaro, iyo sida loo sameeyo baarista degdega ah ( RDTest), sidaa daraadeed waxa aan isla eegi doonaa **Tusaha 4V** si aad u qiimayso oo ukala saarto ilmaha leh xumad.

**Fiiri tusaha, waxa** ku qoran: WAYDII HOOYADA: "ilmuhu ma leeyahay xumad ama ma kulul yahay?" haddii jawaabtu HAA tahay, u gudub sanduuqa hoose oo hubi in uu leeyahay inna CALAAMADIHII HALISTA EE GUUD ama qoortu adkaatay.

**Ka hubi calaamadiha guud ee qatarta ah**

Hadda waxa aad ka eegtay ilmuhu inuu leeyahay calaamadihii halista, sidaa darteed waa aad ka jawaabi kartaa su aasha ah "ilmuhu ma leeyahay calaamadihii guud ee halista?" Haddii ilmuhu leeyahay xumad **U SOOC** ilmaha in uu qabo **JIRRO DARAN OO XUMADEED.**

**ILMAHA CUSBITAAL U DIR**

- **SII ilmaha daawaynta ka horaysa inta aan cusbitaal loo dirin, kala tali** hooyada cusbitaal u dirista, sii warqadda cusbitaal u dirista iyo waraqda dib u soo laabashada
- **Haddii in cusbitaal loo diraa aanay suura gal ahayn Haddii ilmuhu wax cabi karo, sii marka koobaad rectal Artesunate iyo SP.** La soco ilmaha 6 saacadood gudahood iyo maalinta ku xigta, si aad usii wado daawaynta;
- **Haddii aanu ilmuhu wax cabi karin** ama naaska jaqi karin (aanu wax liqi karin) ama uu hunqaacayo 24 saacadood ka dib sii markale Rectal Artesunate adiga oo la soconaayo xaalada ilmaha.
- Haddii 24 saacadood kadib, ilmuhu uu awoodo in uu wax cabo (uu wax ka kaban karo), o aanu hunqaacayn, wax yara jaqi karo, **sii mar labaad Artesunate SP oo seddex maalmood eeg sanduuqa 9 V** iyo Amoxicilline kiniin ahs (sanduuqa daawaynta 3/V). *

**TALO SIINTA HOOYADA**

- **Sii cabitaan farabadan iyoNaas nuujin.**
- **Ku day in ilmaha wax cuni karo.**
- **U sheeg hooyada xilliga ay soo laabanayso.**

Hooyada waa in la baraa Ama ogaataa:

- marka ilmaha uusan naaska nuugi karin ama uusan wax cabi Karin.
- Waa in ay garan kartaa haddii ay xumada heyso.
- ay haddu ka sii dareyso iyo inkale iyo.
- haddii uu liito cabitaankiisa iyo cunitaanka.

Sii wad daawaynta iyo la socodka ilmaha ee guriga adiga oo hooyadana talo ka siinaya daryeelka guriga (eeg sanduuqa 1V). Waxa calaamadihii guud ee halista ka mid ah iyo/ ama qoorta oo adkaata.

## Sida lagu ogaado ama loo dareemo Qoorta Adkaata

Inta aad la ahadlayso hooyada inta lagu guda jiro qiimaynta, hubi in ilmuhu u dhaqaajinayo ama u qaloocinayo qoortiisa si fudud marka uu hareeraha eegayao. Haddii ilmuhu uu dhaqaajinayo qoortiisa, ma adkaan qoortiisu.

Haddii aanad arag ilmaha oo dhaqdhaqaaqaya, ama aanad hubin, soo jeedi ilmaha oo tilmaan xagga xuduntiisa ama suulashiisa. Tusaale ahaan, waxa aad luli kartaa shay ka xiga dhanka suulkiisa si aad ugu dhiiri galiso in uu hoos eego. Hubi in ilmuhu leexin karo luquntiisa marka uu eegayo xuduntiisa ma suulashiisa.

Haddii aanad wali arkayn ilimihii oo qoortiisa leexinaya, ka codso in hooyadu kaa caawiso in aad ilmaha u jiifiso dhabarka. Kusoo foororso ilmaha; si dabacsan ugu taageer dhabarkiisa iyo garbihiisa gacan. Gacanta kalena ku qabo madaxiisa. Intaa kadibna hore usoo weeci madaxiisa, dhanaka laabtiisa. Haddii qoortu si fudud u leexsanto, ilmuha qoortiisu ma adkaan. Hadii qoortu kula adkaato oo uu jiro caabbi ka hor imanaya weecinta, ilmaha qoortiisu waa adkaatay.
Inta badan ilmaha qoortiisu adagtahay waa ooyaa marka laysku dayo in la leexiyo luquntiisa.

### Layli L: Layli fiidiye
### "Ilmuhu xummad ma leeyahay?"

**Sida loo samaynayo layliga fiidiyaha:**

U sheeg ardayda in fiidiyaha dhexdiisa (Layliga L) ay arki doonaa tusaalayaal ku saabsan sida ay u qiimaynayaan in ilmo qoortiisu adagtahay.

Ardaydu waxa ay baran doonaan sida loo garto haddii qoorta ilmuhu adagtahay.

Waydii in ardaydu wax suaalo ah qabaan ka hor inta aanad bilaabin fiidiyaha. marka aanay jirin wax su aalo dheeraad ah oo cidi qabtaa, bilaw fiidiyaha.

Marka ay dhamaato cajaladda fiidiyuhu, bilaw falanqayn kooban. Ka jawaab wixii su aalo ah ee ku saabsan garashada iyo soocidda calaamada carruurta xumadda leh.

Hadii wax si gaar ah ugu adagi jiro marka la aqoonsanayao ama la soocayo calaamadaha inta lagu guda jiro daraasadda xaaladda, dibu u soo duub cajaladda oo tus tusaalayaal cad cad.

**Qodobo muhiim ah oo ku jira fiidiyaha oo ay tahay in carabka lagu adkeeyo:**

- Eegista luqunta oo adkaataa waxa ay hadba isla badashaa iyada oo ku xiran xaaladda ilmaha. Waxa laga yaabaa in aanad u baahan in aad ilmaha taabato.

- Hadii ilmuhu soo jeedo oo xasilan yahay, waxa la arkaa in aad awoodo in aad soo jeediso oo aad ku kalifi karto in uu hoos fiiriyo. Haddii aad u baahantahay in aad dhaqaajiso ilmaha qoortiisa, waxa aad ka aragtay fiidiyaha sida loo taageero ilmaha adiga oo si dabacsanna u leexinaya qoortiisa.

- Waa ay aagtahay in aad ka garato fiidiyaha in ilmaha qoortiisu adagtahay. Marka aad talaabadan ku samayso ilmo dhab ah, waxa aad dareemi doontaa adkaanshaha marka aad iskudaydo in aad leexiso qoortiisa. Waxa aad sidoo kale ka aragtay fiidiyaha ilmo la ooyaya xanuun marka adeegaha caafimaadku isku dayo in uu leexiyo qoortiisa, sidaa awgeed u dabacsanaw.

Jawaabta Layliga L

Ilma kasta, ug a jawaab suaashan:

| | Ilmaha luquntiisu ma adagtahay? | |
|---|---|---|
| | HAA | MAYA |
| Ilmo 1 | | |
| Ilmo 2 | | |
| Ilmo 3 | | |
| Ilmo 4 | | |

**Tababaraha:**
Waxa aad hore usoo bartay maadadan, hase ahaatee waa muhiim in aad ku celiso hadana layliga ka hor.

**U sheeg ardayda:**
Haddii ilmuhu xumad leeyahay hase ahaatee aanu lahayn calaamadaha guud ee halista, raac jidka MAYda ee ku gaynaysa sanduuqa kaneecada.

Hadda waxa aad garanaysaa sida loo eego loona dareemo marka aad ilmo ka eegayso xummad: "in aad taabato ilmaha calooshiisa si aad u fiiriso in ay kulushahay, iyo in aad eegto in qoortiisu adagtahay".

Haddii ilmuhu xummad leeyahay, aanuse lahayn CALAAMADIHII GUUD EE HALISTA, waxa aad samayn doontaa RDT. Hadii wax laga helo, usooc in ilmuhu qabo kaneeco, sii kiniin Artesunate/SP lana soco maalin walba.
Haddii RDTga aan wax lagu helin, usooc in aanu ilmuhu qabin kaneeco. Dhakhtarka u dir. Hadii aanay suura gal ahayn in cusbitaal loo diraa, Dib u eeg ilmaha 8/12 saacadood gudohood oo daawee kulana soco ilmaha guriga kalana tali hooyada sida ay gurica ugu daryeelayso (eeg SANDUUQ 1V).

## Layli 20: Aden

Aden waa ilmo 10 bilood jira. Hooyadii waxa ay tiri aadan xalay aad ayuu u kululaa. Aden wax waa cabi karayaa, xalay qalal ayuu lahaa hase ahaatee uma hurdaysna si aan caadi ahayn.

**Sooc Aden.**

Aden ma qufacayo shubanna malaha.

Xumad ayuu lahaa habeenimadii. Aden hareeraha ayuu fiirinayaa waana dhaqaajinayaa madixiisa. Ma adka qoortiisu (Aden waa dhaqaajinayaa waana leexinayaa madaxiisa).

**Sooc Aden.**

*Intaa kadib waydii ardayda: Sidee ayay u sooceen Aden?*

### Jawaabta Layli 20: Aden

Aden waxa uu leeyahay CALAAMADIHII GUUD EE QATARATA AH, ma qufacayo, ma shubmayo mana laha JIRRO DARAN OO XUMADEED.

## Layli 21: Abdi

Abdi waa ilmo 2 sano jira. Hooyadii waxa ay sheegtay in uu kululaa subaxdii hore.
Abdi malaha CALAAMADIHII GUUD EE QATARATA AH.
**Sooc Abdi.**

Ma qufacayo, kuma adka neefsashadu mana shubmayo.
Markii uu eegay Abdi, adeegihii caafimaadku waxa uu arkay in aan ilmuhu dhaqaajin karin madaxiisa. Waxa uu isku dayay in uu soo jeediyo isaga oo markaa kor u dhaqaajinaya qalinkiisa hase ahaatee ma awoodin ilmuhu in uu raaco qalinka . Abdi qoortiisu waa adagtahay.
**Sooc Abdi.**

*Intaa kadib waydii ardayda: sidee ayaa usoocdeen Abdi?*

## Jawaabta to Layli 21: Abdi

Abdi waxa uu leeyahay xumad, qoorta oo adag iyo JIRRO DARAN OO XUMADEED

**Tabaraha:**
Waxa aad hore u soo bartay maadadan, hase ahaatee waa ay fiicantahay in aad ku celiso ka hor inta aan layliga la bilaabin.

**Usheeg ardayda:**
Hadda, ku noqo tusaha taxan ee kusaabsan XUMADDA  adiga oo dibu eegis ku samaynaya sida loo adeegsado.

Waydii laba iyo ka badan oo ka tirsan kooxda in ay raacaan jidka ku qoran tusaha xaalad kasta oo lagu soo bandhigay hoos.

layligan,  waxa aad ku kala sooci doontaa cudurada carruurta leh calaamadaha xumadda.
Ugu horayn waxa aad darsi  doontaa tusaale. Inta kadib waxa aad bilaabi doontaa layliska.

Waxa aan akhrin doonaa daraasadda xaaladda tusaalaha ah. Intaa kadib waxa aan baran doonaa sida adeegayaasha caafimaadku  ukala soocaan cudurada.

U sheeg ardayda in ay ka shaqeeyaan layliga xiga ee daba socda tusaha si lamida.

Akhri xogta ku qoran xaalad kasta una sheeg ardaydu in ay ku qoraan foomka wax lagu qoro.

Intaa kadib waydii in ay ka shaqeeyaan soocidda. Sii warbixin shakhsi  ah arday kasta.
La falanqee xaaladda kooxda oo dhan marka ardayda oo dhammi dhamayso.

**Xoogga saar muhiimadda ay leedahay in la bilaabo qiimaynta bilawga iyo in la eego dhammaan tusayaasha taxan ee soo socda:**

**1:** Calaamadaha  Guud ee Qatarta ah.
**2:** Qufac ama Naqaska oo qabta.
**3:** Shuban.
**4:** Xummad.

**Ma jiro tusa ku saabsan:  Waydii, Eeg oo garo calaamadaha Nafaqo darada Dhexdhexaadka ah iyo ta Daran.**

## Layli 22: Omar

Omar waa ilmo 10 bilood jira. Adeegaha caafimaadku waxa uu hubinayaa in aanu omar lahayn calaamadihii guud ee halista.
Omar waa awoodaa in uu wax cabbo, mana qabo wax qalal ah umana hurdaysna si aan caadi ahayn kumana adka toosiddu.

**Sooc Omar.**

Omar ma qabo shuban.
Omar waxa uu qufacayay muddo shan maalmood ah. Adeegaha caafimaadku waxa uu ka tiriyay neefsiga omar 39neefsi/daqiiqaddii.

**Sooc Omar.**

Omar waxa uu dareemayay kulayl muddo 2 cisho ah.
Omar luquntiisu ma adka. RDTgu waxa uu sheegay jawaab togan.

Omar waxa uu dareemayay kulayl muddo 2 cisho ah. Omar luquntiisu ma adka.
RDTgu waxa uu sheegay jawaab togan.
**Sooc Omar.**

*Intaa ka dib, waydii ardayda: sidee u soocdeen Omar?*

Jawaabta to Layli 22: Omar

Adeegaha caafimaad waxa uu u soocay Omar: IN AANU LAHAYN CALAAMADIHII GUUD EE HALISTA, AANU QABIN OOF WAREEN, KANEECO.

## Layli 23: Osman

Osman waa ilmo 5bilood jira. Wax waa cabi karaa, mana lahayn qalal, uma hurdaysna si aan caadi ahayn kumana adka baraarugu.
**Sooc Osman.**

Osman has no cough.

Osman waa shubmayay labadii cisho ee u dambeeyey. Osman ma baaxaa dagayo, mana caro badan, indhihiisu ma godan. Osman waa haraadan yahay. Maqaarkiisuna si dhakhso ah ayuu dib ugu noqonayaa.
**Sooc Osman.**

Osman waxa uu dareemayaa in uu kulul yahay ilaa laba cisho ka hor. Ilmuhu ma dhaqaajin karo mana weecinkaro qoortiisa marka la tuso xuduntiisa. RDT waa toganyahay.DT
**Sooc Osman.**

Intaa kadib, waydii ardayda: sidee u soocdeen Osman?

Jawaabta Layliga 23: Osman

Adeegaha caafimaadku waxa uu u soocay Osman in aanu lahayn calaamadihii guud ee halsita, SHUBAN AAN FUUQBAX WEHELIN, iyo KANEECO.

## Layli 24: Elmi

*Qor oo calaamadi calaamad kasta iyo soocid kasta inta aad ku guda jirto xaaladda si tallaabo tallaabo ah.*

Elmi waa ilmo 3 ji ah. Hooyadii waxa ay sheegtay in uu kulul yahay qufacna u wehesho.

Adeeegaha caafimaadku waxa uu ka eegayaa calaamadihii guud ee halista. Elmi wax waa cabi karaa, ma qabo qalal umana hurdaysna si aan caadi ahayn kumana adka toosiddu.

**Sooc Elmi.**

Elmi waa qufacayay muddo sadex maalmood ah.  Adeegaha caafimaadku waxa uu ka tiiriyay 61neefsi/daqiiqaddii.

**Sooc Elmi.**

Elmi waxa uu dareemayaa in uu kulul yahay hase ahaatee ma adka qoortiisu. Rdga jawaabtii kasoo baxday waa togantahay.

**Sooc Elmi**

*Intaa kadib waydii ardayda: sidee u soocdeen Elmi?*

Jawaabta Layliga 24:  Elmi

Adeegaha caafimaaku waxa uu u soocay  Elmi  in aanu lahayn calaamadihii guud ee halista, oof wareen iyo kaneeco.

## Layliga 25:  Fawzia

*Qor oo calaamadi  Fawzia calaamadaheeda iyo soociddeeda inta aad ku jirto xaaladda.*

Fawzia  waa ilmo 5 bilood jirta. Hooyadeed waxa ay tiri ilmuhu waxa uu dareemayaa kulayl waana qufacaysay muddo laba maalmood ah.

Waxa ay awoodda in ay wax cabto, ma qabin wax qalal ah umana hurdaysna si aan caadi ahayn toosiduna kuma adka.

**Sooc Fawzia.**

Adeegaha caafimaadku waxa uu eegay dhakhsaha neefsigeeda waxaanu ka tiriyay 38neefsi/ daqiiqaddii.
**Sooc Fawzia.**

Waxa uu ka eegay xumad. Hooyadeed waxa ay sheegtay in  Fawzia ay dareemaysay kulayl laba cisho. Ma adka qoorteedu.  Jawaabta RDTguna waa taban tahay.

**Sooc Fawzia.**

*Intaa kadib waydii ardayda: sidee u soocdeen Fawzia?*

Jawaabta  Layliga 25:  Fawzia

Adeegaha caafimaadku waxa uu u soocay Fawzia  IN AANAY LAHAYN CALAAMADIHII GUUD EE HALISTA, AANAY QABI N OOF WAREEN, iyo KANEECO TOONA.

## Layliga 26: Salad

**Ogaysiin ku socota Tababaraha.** U adeegso xaaladdan in aad ku muujiso in ilmuhu lahaan karo soocido dhawr ah, xattaa haddii hooyadu keento ilmo hal jirro qaba.

*Qor oo calaamadi calaamadaha Salad iyo soociddiisa inta aad ku dhex jirto xaaladdda si talaabo talaabo ah.*

Salad waa ilmo jira 20 bilood. Hooyadii waxa ay u keentay in uu kululyahay awgeed. Waa awoodaa in uu wax cabo. Subaxdii waxa uu lahaa qalal. Waa soo jeedaa.

**Sooc Salad.**

Salad waa qufacayaa neefsigiisu ma fiicna.

**Sooc Salad.**

Ilmuhu waxa uu lahaa shuban afartii cisho ee u dambeeyey. Salad ma baaxaa dagayo mana caro badan, hase ahaatee indhihiisu waa godanyihiin. Uma muuqdo in uu u haraadan ayahay si aada. Maqaarkisuna marka la jiido si qunyar ah ayuu dib ugu noqonayaa.

**Sooc Salad**.

Salad xumad ayuu lahaa shalay. Intii aad baarista wadayna waxa aad aragtay in salaad u dhaqaajin karo qoortiisa si sahlan.

**Sooc Salad**

*Intaa ka dib waydii ardayda: Sidee u soocdeen Salad?*

### Jawaabta Layliga 26: Salad

Salad waxa uu qabaa JIRRO XUMAD DARAN LEH, OOF WAREEN DARAN, XOOGAY FUUQ BAXA.

**Kalfadhiga Bukaansocodka: Xumad**

**Ogaysiis ku socda Tababaraha:** Hadda waxa aad joogtaa gabagabadii maalintii afraad ee tababarka, waana si waafaqsan jadwalka iyo qorshaha, kalfadhiga barri subaxna waxa lagu qaban doonaa waaxda bukaan socodka.

Si shaqada laguugu fududeeyo, waxa aan habaynay shaxano koobaya habka loo qabanayo kalfadhiyada bukaan socodka maalin kasta. Waxa aad ka heli kartaa shaxanadan warka koobani ku qoran yahay dhammaadka cutubkasta,

| SHAXANKA GUNDHIGA AH | |
|---|---|
| **Diyaar garow** | • Waydii ardaydu in ay soo qaataan bugaagtooda oo ay ku jiraan nuqulo ka mid ah buugga diiwaan galinta iyo foomamka wax lagu qoro.<br>• Soo qaad ama hubi in ardaydu haystaan saacado. |
| **Ujeedada ka qaybgalayaasha** | • Qiimee oo u kala saar carruurta labadii xaaladood ee la bartay.<br>• Baro sida loo adeegsado buugga diiwaanka ama foomamka wax lagu qoro meelaha bukaan socodka.<br>• Adeegso hab wada xiriir oo wanaagsan: salaan hooyada, u dhagayso si taxadar leh, ku hadal luqad la fahmi karo, adeegsona erayo hooyado fahmayso. |
| **Habka hawl fududeeyuhu marayo** | • Dooro carruur jirro uuni hayso.<br>• Isbar ACT iyo shaqaalaha caafimaadka iyo xarunta, habka guud ee loo mareeyo bukaan socodka, una tilmaan halka alaabadu taalo.<br>• Tus sida loo eego loona sooco ilmaha.<br>• U qaybi bukaanka ardayda.<br>• Lasoco sida arday kastaa ula dhaqmayo ilmaha. Haddii aanad arki karin , waydii in ardaydu ay soo bandhigaan xaalad ama eeg buuga diiwaanka ama foomka ay wax ku qoreen.<br>• Adeegso agabkaaga korjoogtaynta si waafaqsan cidda aad tababarayso.<br>• Usii war iyo tilmaan hadba sida loogu baahdo.<br>• U celi ilmaha xarunta caafimaadka adiga oo raacinaya qoraal ku saabsan daawaynta, aad siisay. |
| **Gababada kalfadhiga** | • Hoggaami falanqaynta si loo soo koobo kalfadhiga adigoo islamarkaana war ka siinaya xirfadihii lagu tababartay maalintaa.<br>• Sii warcelin ardayda. |

# 7. Ka eeg calaamado nafaqo daro ba' an

Mrs. Leyla waxa ay keentay wiilkeeda Hersi si aad u eegto waayo waxa ay ka warwarsantahay in Hersi buko. Ilmaha nafaqo daro ayaa haysa. Si kastaba ha ahaatee, Mrs. Leyla waxa ay u muuqataa mid aan ka warwarsanayn. Carruur badan oo deegaanka ka soo jeeda ayaa u yar yar sida Hersi.

Balse adigu waad ka warwarsantahay ilmaha. Carruurta waxa nafaqo daro ugu dhacdaa cunto xumo awgeed ama in ay marar badan bukoodaan.

Carruurta nafaqo daradu haysaa si fiican uma koraan. Jirkoodu malaha tabar iyo nafaqo ku filan (vitamins iyo macdano ) si ay u buuxiyaan baahidooda koriin, in ay firfircoonaadaan, wax bartaan, iyo in ay caafimaad qabaan. Haddii aad ka caawiso in carruurtu hesho nafaqo wanaagsan, waxa aad ka caawinaysaa in carruurtu yeelato jidh xooggan iyo miskax.

Carruurta nafaqo daradu haysaa inta badan waa jiran yihiin. Jirradu waxa ay ku tahay taxaddi jidhka tabarta daran.

Carruurta nafaqo daradu haysaa waa qaar ka dhimasho badan kuwa nafaqaysan . inka badan kala badh carruurta u dhimata cudurada guud ee carruurta sida shubanka, oof wareenka, kaneecada, iyo jadeecadu waa qaar nafaqo darro hayso. Haddii aad aragto carruur nafaqo xumo hayso, waxa aad ka caawin kartaa in ay helaan daryeel wanaagsan. Waxa aad ka hor istaagi kartaa in carruurtani dhimato.

Hawlfududeeyuhu waxa uu tilmaami laba siyood oo loo baaro NAFAQO DARADA DARAN:

- **Adeegso MUAC (suun carruurta cududa looga xiro). Wareega cududa ooyar (casaan hadii uu noqdo suunka cududa uga xirani) waxa ay tilmaamaysaa nafaqo daro daran iyo dhuubni, xaalad lagu magacaabo marasmus.**

- **Ka eeg in ilmaha cagahiisu bararsanyihiin (oedema).** Tani waxa ay tilmaamaysaa nafaqo daro ba' an oo ilmaha haysa qaba xaalad lagu magacaabo **kwashiorkor.** Inkastoo carruurtani qabto nafaqo darro ba' an , jidhkoodu waa bararsan yahay, waa buuxaa, mana dhuubna.

**Layli sawiro ah: eeg calaamado muujinaya Fuuqbax Daran.**

Tababuruhu waxa uu tusayaa sawiro carruur nafaqo daro hayso waxaanu tilmaamayaa laba siyood oo loo garto carruurta ay hayso NAFAQO DARADA BA ANI.

**Ka eeg calaamado tilmaamaya nafaqo darro ba an (sii socda).**

Labada calaamadood ee nafaqo darad ba ani waa : Casaan suunka ah, iyo lugaha oo barara.

**Calaamad cas oo suunka cududa ah**

Wareega cududuhu waa masaafadda wareegooda. Cabir wareega cududa dhammaan carruurta da'doodu ka dhaxayso 6bilood ilaa 5 sanno adiga oo adeegsanaya suunka MUAC. Haddii CASSAAN ay tilmaanto, waxa ay sheegaysaa nafaqo daro ba an.
Suunka cududu waa mid ay fududayhay adeegsigiisu si loo garto ilmo cududihiisu yaryihiin. Eeg tilmaamaha ku yaal sanduuqa bogga kan xiga.

[1] Dhinaca CAS ee suunka cududada ilmaha looga xiro ee loo yaqaan MUAC waxa uu tilmaamaa in wareega cududa ilmuhu ka yartahay 115 mm.

## Sida loo adeegso suunka cududa lagu xiro

1. Ilmaha da'diisu waa in ay ka dhaxaysaa 6bilood-5sanno.
2. Si dabacsan u kala bixi ilmaha gacantiisa si aad u toosiso gacanta.
3. Xagga sare ee gacanta, hel barta u dhaxaysa garabka iyo suxulka.
4. Ku qabo xagga balaaran ee suunka badhtanka cududa.
5. Qaybta kale ee suunka ku wareeji cududa ilmaha. Dhinaca cagaaranna dhex mari daloolka labaad ee suunka- adiga oo xagga hoose ka soo galinaya suunka.
6. Ka jiid labada dhinacba ilaa suunu xirmayo, laakin haw giijin ilaa xad maqaarku laabmo.
7. Cadaadi daaqadda dhanka ballaaran, qorna midabka kuyaal calaamadda.
8. Midabku waxa uu tilmaamayaa heerka nafaqada ee ilmaha. Haddii midabku cas yahay labada calaamadood ee suunka ilmuhu waxa haya NAFAQO DARRO BA'AN.





## Layli: Adeegso suunka cududa carruurta looga xiro

Ku isticmaal suunka cududa ilmaha looga xiro cududa toban muunadood oo duubiyada armaajada ah kuwaasoo aad hore usii diyaarisay, duubiyadaas oo matalaya cududo carruureed.

**Ilmo kasta:**
Ilmuhu ma u nafaqo daranyahay si aad ah (aad ma u dhuubanyahay ama ma ilgo'sanyahay)? Goobaabo gali Haa ama Maya.

## Layliyada e J - 1

| ILMUHU MA U NAFAQO DARANYAHAY SI AAD AH (AAD MA U DHUUBANYAHAY AMA MA ILGO'SANYAHAY)? | | |
|---|---|---|
| Ilmo 1 | Haa | Maya |
| Ilmo 2 | Haa | Maya |
| Ilmo 3 | Haa | Maya |
| Ilmo 4 | Haa | Maya |
| Ilmo 5 | Haa | Maya |
| Ilmo 6 | Haa | Maya |
| Ilmo 7 | Haa | Maya |
| Ilmo 8 | Haa | Maya |
| Ilmo 9 | Haa | Maya |
| Ilmo 10 | Haa | Maya |

**Ka eeg calaamado tilmaamaya nafaqo daro ba'an (sii socda)**
**Labada lugood oo barara**
Marka nafaqo daro jirto, xaddi badan oo dareere ah ayaa ku urura lugaha, kaasoo sababa barar (oedema). Sababtan awgeed, ilmo qaba nafaqo darro ba'an waxa uu u muuqan karaa in uu cayilan yahay mararka qaar.

Mar haddii ilmaha caynkan ahi aanu u muuqan mid dhuuban, sida ugu wanaagsan ee lagu garto nafaqo darada ba'ani waa in aad eegto ilmaha lugahiisa.

Si naxariis leh ugu cadaadi suulkaaga xagga sare ee ilmaha lugihiisa muddo sadex ilbiriqsi ah (tiri 1001, 1002, 1003.) ilmuhu waxa uu qabaa nafaqo darro ba'an haddii cagtu sii diisnaato marka aad suulka ka qaado.




Si dabacsan ugu cadaadi suulashaada xagga sare ee cagaha ilmaha muddo ilbiriqsiyo ah.




Eeg haddii wali caguhu sii diisnaadaan marka aad ka qaado suulashaada kadib.

## Laylis fiidiyow:
## ka eeg nafaqo daro ba an

Cajalad fiidiye oo gaaban ayaa soo koobaysa sida loo baaro nafaqa darada ba'an adiga oo adeegsanaya suunka lagu xiro cududaha (MUAC strap) iyo sida loo eego bararka lugaha (oedema).

**Ka eeg calaamado muujinaya nafaqo daro**

Haddii suunka cududu xagga Cagar: ilmaha ma hayso nafaqo daro.

**Usheeg Tabaraha:** isticmal leyliga hoose ee nafaqo daro dhexdhexaad ah

## Layli: J -2
## Sida loogu adeegsado MUAC si loogu garto nafaqo daro dhexdhexaad ah

U adeegso suunka MUAC adiga oo isticmaalaya duubiyo muunad ah oo aad ka matalayso cududaha 10 ilmood. Cududa ilma kasta waxa u taagan duubi.
**Ilmo kasta: ilmuhu fuuq bax dhexdhexaad ah ma qabaa? Goobo gali Haa ama Maya.**

| ILMAHA NAFAQO DARO BA'ANI MA HAYSAA ( AAD MA U DHUUBANYAHAY)? | | |
|---|---|---|
| Ilmo 1 | Haa | Maya |
| Ilmo 2 | Haa | Maya |
| Ilmo 3 | Haa | Maya |
| Ilmo 4 | Haa | Maya |
| Ilmo 5 | Haa | Maya |
| Ilmo 6 | Haa | Maya |
| Ilmo 7 | Haa | Maya |
| Ilmo 8 | Haa | Maya |
| Ilmo 9 | Haa | Maya |
| Ilmo 10 | Haa | Maya |

**XUSUUSIN**

- HADII SUUNKA CUDUDA CARRUURTA LAGAGA XIRAA UU DHANKA CAS XIGO
- HADII ILMAHA LUGAHIISU BARARSAN YIHIIN
- ILMUHU AAD U NAFAQO DARANYAHAY, WAXA UU U BAAHANYAHAYIN CUSBITAAL LOO DIRO, MEELAHA BUKAANSOCODKAAMA XARUN KALE OO CAAFIMAD OO UU KA HELI KARO DAAWO IYO QUUDIN HABBOON
- ILMAHA MIDABKA SUUNKU NOQDO JAALE WAXA UU U BAAHANYAHAY INLOO DIRO MEEL QUUDIN DAAWO AH LOO SAMEEYO UU NA KA HELII KARO DARYEEL HABBOON.

**Kalfadhiga Bukaansocodka: ka eeg calaamado nafaqo daro ba' an**

**Ogaysiis ku socda Tababaraha:** Hadda waxa aad joogtaa gabagabadii maalintii afraad ee tababarka, waana si waafaqsan jadwalka iyo qorshaha, kalfadhiga barri subaxna waxa lagu qaban doonaa waaxda bukaan socodka.

Si shaqada laguugu fududeeyo, waxa aan habaynay shaxano koobaya habka loo qabanayo kalfadhiyada bukaan socodka maalin kasta. Waxa aad ka heli kartaa shaxanadan warka koobani ku qoran yahay dhammaadka cutubkasta,

| | SUMMARY TABLE |
|---|---|
| **Diyaar garow** | • Waydii ardaydu in ay soo qaataan bugaagtooda oo ay ku jiraan nuqulo ka mid ah buugga diiwaan galinta iyo foomamka wax lagu qoro.<br>• Soo qaad ama hubi in ardaydu haystaan saacado. |
| **Ujeedada ka qaybgalayaasha** | • Qiimee oo u kala saar carruurta labadii xaaladood ee la bartay.<br>• Baro sida loo adeegsado buugga diiwaanka ama foomamka wax lagu qoro meelaha bukaan socodka.<br>• Adeegso hab wada xiriir oo wanaagsan: salaan hooyada, u dhagayso si taxadar leh, ku hadal luqad la fahmi karo, adeegsona erayo hooyado fahmayso. |
| **Habka hawl fududeeyuhu marayo** | • Dooro carruur jirro uuni hayso.<br>• Isbar ACT iyo shaqaalaha caafimaadka iyo xarunta, habka guud ee loo mareeyo bukaan socodka, una tilmaan halka alaabadu taalo.<br>• Tus sida loo eego loona sooco ilmaha.<br>• U qaybi bukaanka ardayda.<br>• Lasoco sida arday kastaa ula dhaqmayo ilmaha. Haddii aanad arki karin , waydii in ardaydu ay soo bandhigaan xaalad ama eeg buuga diiwaanka ama foomka ay wax ku qoreen.<br>• Adeegso agabkaaga korjoogtaynta si waafaqsan cidda aad tababarayso.<br>• Usii war iyo tilmaan hadba sida loogu baahdo.<br>• U celi ilmaha xarunta caafimaadka adiga oo raacinaya qoraal ku saabsan daawaynta, aad siisay. |
| **Gababada kalfadhiga** | • Hoggaami falanqaynta si loo soo koobo kalfadhiga adigoo islamarkaana war ka siinaya xirfadihii lagu tababartay maalintaa.<br>• Sii warcelin ardayda. |

# QAYBTA III:

*BAR ADEEGAYAASHA CAAFIMAADKA EE TUULOOYINKA IN AY DAAWEEYAAN ILMAHA JIRA INTA KA DHAXAYSA 2BILOOD ILAA 5 SANNO SANDUUQYADA DAWEYNTA/WARQADA GUDBINTA.*

# Bilawga daawaynta afka laga qaato

**Us heeg  ardayda:**
Qaybta hore ee tababarkan , waxa aad baratay sida loo qiimeeyo loona sooco ilmo buka. Hadda, waxa aad baran doontaa sida loo doorto daawada ku habboon, loona go aamiyo xaddiga iyo goorta la siinayo ilmaha iyada oo loo eegayo hadba xanuunka haya ilmaha.

- Daawooyinka aan adeegsan doonaa waa qaar "AFKA" laga qaato iyo qaar dabada laga qaato.
- Waa in aad daawada hubisaa inta aadan isticmaalin in ay dhacday iyo in klae hadii ay dhacday lama isticmaali karo.
- To give these drugs properly, you will use the treatment boxes in order to find out the dose and schedule and actions to do.

**XUSUUSO:** marka aad goaan ku gaarto in aad  dawo siiso , hubi in ilmuhu u baahanyahay daawadu. Hadii aan ilmaha u baahneyn daawada lama siinayo. Xaaladdan, daawadu waxa ay noqon kartaa mid halis keenta ama aan faiido lahayn hadii la siiyo daawo uusan u baahnyn.

**U sheeg ardayda:**
Sidii aan hore u soo sheegnay, waxa lagu siin doonaa 10 sanduuq oo daawayneed si aad u adeegsato inta lagu guda **jiro tababarka iyo inta aad ku guda jirto shaqo maalmeedka.**

**Ogaysiin ku socota tababaraha:**
Si kooban u sheeg in aad bari doonto adeegayaasha caafimaadka sida loo daaweeyo ilmaha iyo sida loo adeegsado sanduuqyada daawaynta.
Si kooban u tax waxa ku jira sanduuq kasta.

**U sheeg ardayda:**
Sanduuqyada daawayntu waxa ay kaa caawinayaan in aad doorato daawooyinka ku habboon oo aad go aansatona xaddiga saxa ah iyo goorta, sida daraadeed adeegso markasta oo aad daawaynayso ilmo jirran.

Ha iskudayin in aad xasuusasto xadiga iyo jadwalka, ma jirto cid xusuusan karta xogtan oo dhan!  Waxa kugu filan in aad akhrido sanduuqa daawaynta si aad u hubiso in aad u daawayso ilmaha si sax ah.

Sanduuq kastaa waxa uu ka koobanyahay xog ku saabsan sida loo daaweeyo ilmo jirran iyo sida loo baro hooyada  in ay ku sii wado daawaynta guriga dhexdiisa.  Waxa jira 11sanduuq oo daawayneed sida soo socota:

**Ogaysiin ku socota tababaraha:**
*Si kooban u sheeg in aad bari doonto adeegayaasha caafimaadka sida loo daaweeyo ilmaha iyo sida loo adeegsado sanduuqyada daawaynta.*
*Si kooban u tax waxa ku jira sanduuq kasta.*

**SANDUUQ 1/V**
BAR HOOYADA SIDA AY GURIGA UGU SIINAYSO ILMAHA KINIINKA.

**SANDUUQ 2/ V**
SIDA LOO DIYAARIYO MILANKA ORS.

**SANDUUQ 3/ V**
SIDA LOO SIIYO KINIIN AMOXYCILLIN AH CUDURADA DARAN.

**SANDUUQ 4/ V**
KINIINKA AMOXYCILLIN EE OOFWAREENKA.

**SANDUUQ 5/ V**
QORSHAHA C: DAAWEE FUUQ BAXA DARAN.

**SANDUUQ 6/ V**
QORSHE B: KU DAWEE FUUQ BAXA XOOGAYGA AH GURIGA ADIGA OO ADEEGSANAYA ORS.

**SANDUUQ 7/ V**
QORSHE A: KU DAAWEE SHUBANKA GURIGA.

**SANDUUQ 8/ V**
SII KINIIN ZINC AH ILMA KASTA OO SHUBAN QABA.

**SANDUUQ 9/V**
KA SII ILMAHA DABADA ARTESUNATE INTA AANAD CUSBITAALKA U DIRIN.

**SANDUUQ 10 /V**
KU DAAWEE ILMAHA KINIIN ARTESUNATE/SP.

**SANDUUQ 11 /V**
SII DAREERE LEH SONKOR AMA MALAB.

**U sheeg ardayda:**
Hadda, waxa aan idin bari, soo bandhigi oo aan idin tusaalayn sida loo adeegsado **SANDUUQA 1 V.**

## "SANDUUQ 1 V" BAR HOOYADA SIDA AY UGU SIINAYSO ILMAHA KINIIN GURIGA

- **U SHEEG HOOYADA SABABTA ILMAHA LOO SIINAYO DAAWADA.**

- **TUS HOOYADA SIDA AY U SIINAYSO KINIINKA:**
  - Inta xabbo ee kiniinka ah ee lasiinayo markiiba;
  - Sida loo qaybinayo kiniinka.

- **TUS HOOYADA SIDA LOO SIIYO KINIINKA MILMA ILMAHA**
  - Dulsaar kiniinka malgacad kuna dar dhawr dhibcood oo biyo nadiif ah;
  - Kiniinkani waa mid milma, waxa uu ku milmi doonaa muddo ilbiriqsiyo ah;

- **TUS HOOYADA SIDA LOO BURBURIYO KINIINKA, (ADEEGSO LABA MALGACADOOD)**
  - Saar kiniinka malgacadda koobaad oo ku dar dhawr dhibcood oo biyo nadiifa ah.
  - Yara sug daqiiqad (biyuhu waxa ay jilcin doonaan kiniinka oo ay ka dhigi doonaan mid si fudud loo burburin karo);
  - Adeegso mulgacad labaad si aad u burburiso kiniinka gabi ahaanba. Hadii hal mulgacad oo qudha la heli karo, adeegso shay oogadiisu simantahay oo ku burburi kiniinka.

  **Eeg hooyada oo baranaysa sida loo diyaariyo daawada**

  **Usheeg hooyadu in ay siiso xadiga koobaad ilmaha**

  **U sheeg hooyada: haddii ilmuhu matagayo, sug in 30 daqiiqo muddo ah marlabadna si kiniinka**

- **Si taxadar leh ugu sharax sida loo siiyo daawada.** U sheeg hooyada:
  - Inta xabbo ee kiniin ah ee la siinayso ilmaha;
  - Inta goor ee ay siinayso maalinti xaddigaas;
  - Goorta ay siinayso kiniinka (sida subaxda hore, maalinta dhexdeeda, fiidkii, inta aanu sariirta tagin kahor);
  - Imisa cisho.

- **U sharax in ay tahay in la qaato dhammaan kiniinka si loo dhamaystirto daawaynta, xattaa haddii ilmuhu u muuqdo in uu ka soo reeyey. Kula tali hooyada in ay:**
  - Dhigto dhammaan daawoyinka meel aan carruurtu ka gaadhayn;
  - Ku kaydiso daawoooyinka meel qalalan oo mugdi ah taasoo aan lahayn dooli iyo cayayaan toona.

- **Ku qor xogtan soo socota bacda lagu ridayo daawooyinka:**
  - Magaca iyo tirada kiniinka ah ee ku jira;
  - Xaddiga saxa ah ee ilmuhu qaadan karo;
  - Goorta daawada la qaadanayo maalinkasta;
  - Inta cisho ee la qaadanayo.

- **Hadii hal daawo wax ka badan la siinayo , soo uruuri, tiri oo mid kasta meel gaar ah ku rid**

- **Hubi in hooyadu fahamtay ka hor inta aanay ka bixin meesha**

- **U sheeg in ay hooyadu soo noqoto haddii ilmuhu:**
  - Wali shubmayo marka labada xabbo ee ORS ta ah ee u horeeya uu qaato;
  - Aanu ilmuhu wax cabi karin ama aanu naaska jaqayn; ama si aaad u yar wax u qaadanayo poorly;
  - Uu kasii daro;
  - Uu xummad yeesho ama xumadiisu korodho.

## "SANDUUQ 1 V"  BAR HOOYADA SIDA KINIINIGA LOOGU SIIYO ILMAHA GURIGA

**Jaantuska Tababaraha**

**Agabka loo baahanyahay:**

Kiniin Amoxycillin ah, kiniin Artesunate/SP,  2 malgacadood ama wiciyada maxali ah, biyo la safeeyay, galal daawo, iyo qalin.

**U sheeg ardayda:**
Tababarurhu waxa uu samayn doonaa jaantus ku saabsan sida hooyadu ugu siinayso ilmaha daawoyinka afka laga qaaato guriga dhexdiisa.

*(ka codso mid ka mid ah ardaydu in uu ku caawiyo marka aad tusaalaha samaynayso).*

- **U sheeg hooyada sababta aad ilmaha u siinayso daawada,  oo ay ku jirto:**
  - Sababta aad daawada afka laga qaato u siinayso ilmaha,
  - Jirrada loo qaato.

- **Tus hooyada sida loo maareeyo daawada:**
  - Inta xabbo oo kiniin ah ee la siinayo markiiba,
  - Sida loo qaybiyo kiniinka.

- **Tus hooyada sida loo siiyo ilmaha kiniinka biyaha ku milma.**
  - Dulsaar kiniinka malgacad kuna dar dhawr dhibcood oo biyo nadiifa ah.
  - Kiniinkani waa mid milma, waxa uu ku milmi doonaa muddo ilbiriqsiyo ah.
  - Wax yar sug markaana sii ilmaha.

- **Tus hooyada sia loo burbuiyo kiniinka (adeegso laba malgacadood).**
  - Saar kiniinka malgacadda koobaad oo ku dar dhawr dhibcood oo biyo nadiifa ah. Yara sug daqiiqad ( biyuhu waxa ay jilcin doonaan kiniinka oo ay ka dhigi doonaan mid si fudud loo burburin karo);
  - Adeegso mulgacad labaad si aad u burburiso kiniinka gabi ahaanba. Hadii hal mulgacad oo qudha la heli karo, adeegso shay oogadiisu simantahay oo ku burburi kiniinka.

- **Eeg hooyada oo baranaysa sida loo diyaariyo daawada.**
  - Usheeg hooyadu in ay siiso xadiga koobaad ilmaha.

  **U sheeg hooyada: haddii ilmuhu matagayo, sug in muddo ah marlabadaana si kiniinka**

- **Usharax :**
  - haddii ilmuhu matagayo, sii dawada xattaa haddii ilmuhu laga yaabo in uu matago Usheeg hooyadu in ay eegto ilmaha muddo 30 daqiiqadood ah.  Haddii ilmuhu matago 30kaa daqiiqadood gudahood (kiniinka waxa lagu arki karaa mataga dhexdiisa), sii xaddi   kale.
  - Hadii ilmuhu fuuqbaxay oo matagayo, sug ilaa inta ilmaha fuuq celin looga samaynayo ka hor inta aanad sii xaddiga marlabadaad.

- **Si taxa dar leh ugu sharax sida loo siiyo daawada.  U sheeg hooyada:**
  - Inta xabbo ee kiniin ah  ee la siinayso ilmaha;
  - Inta goor ee ay siinayso  maalinti   xaddigaas;

- Goorta ay siinayso kiniinka (sida subaxda hore, maalinta dhexdeeda, fiidkii, inta aanu sariirta tagin kahor);
- Imisa cisho.

**U sharax in ay tahay in la qaato dhammaan kiniinka si loo dhamaystirto daawaynta, xattaa haddii ilmuhu u muuqdo in uu ka soo reeyey. Kula tali hooyada in ay:**

- Dhigto dhammaan daawoyinka meel aan carruurtu ka gaadhayn;
- Ku kaydso daawoooyinka meel qalalan oo mugdi ah taasoo aan lahayn dooli iyo cayayaan toona.

**Ku qor xogtan soo socota bacda daawada:**

- Magaca daawada oo dhamaystiran iyo wadarta kiniinka ku jirta,
- xadiga saxa ah, waqtiga (subaxda hore, duhurkii, fiidkii, ka hor inta aan la tagin sariirta), iyo inta cisho ee la qaadanayo.
- ku rid kiniin baco gaar ah ama gal, warqad, caagad iwm. Daawadu nadiif ha ahaate. Adeegso weel nadiif ah.
- Intii aad qortay ee aad meel ku riday daawada ka dib, u dhiib hooyada. Waydii su aalo si aad u hubiso in ay fahamsantahay sida loo daawaynayo ilmaha.

**Haddii hal daawo waxa ka badan la siinayo ilmaha, soo uruuri, tiri oo mid walba meel gaar ah ku rid.**

Hadii ilmuhu u baahdo in uu qaato, tusaale ahaan : amoxycillin iyo kiniinka kaneecada, samee sidan soo socota:

**Marka aad siiso hooyada kiniinka ay tahay in ay ku siiso ilmaha guriga:**

- Ku qor tilmaamaha bushqadda dusheeda,
- Tiri xaddiga loo baahanyahay,
- Ku rid daawada loo baahanyahay bushqadeeda.

**Marka aad hooyada u dhiibto kiniin Artesunate/SP ah si ay ilmaha ugu dawayso guriga:**

- Artesunate/SP waxa ay ku jirtaa bushqad gaar ah oo ay ku dhantahay daawada ilmuhu u baahanyahay oo dhamaystiran.
- U sharax hooyada in ilmuhu qaato 1xabbo oo kiniin ah oo Artesunate ah iyo 1 xabbo oo kiniin ah oo SP ah maalinta koobaad, iyo HAL XABBO OO KALIYA oo Artesunate maamlaha 2aad iyo 3aad.

- U sharax hooyada in sababta ilmaha loo siinaya ka badan hal daawo ay tahay in uu qabo ka badan hal xanuun. Hadii ay lama huraan tahay, u qor daawoyinka iyo waqtiyada la siinayo daawo kasta maalintii.

Hubi fahamka hooyada.

**Waydii hooyada su aalo sida:**
- Imisa xabbo oo kaniini ah ayaad siin doontaa markiiba?
- Goorma ayaad siinaysaat? Imisa cisho ayaad siisanaysaa?
- Sideed u diyaarinaysaa kiniinka?
- Kiniin kee ayaad siinaysaa sadex goor maalintii ?

## "SANDUUQ 2 V" SIDA LOO DIYAARIYO MILANKA ORS

**ORStu waxa ay u jirtaa laba nooc: iyada oo kartoon ku jirta oo lagu milayo 1 litre ama kartoon lagu milayo 500 ml. oo biyo sifeeyey ah.**

- **Hubi in kartoonka lagu milayo 1 litre oo biyo la sifeeyey ah.**
- **Hubi goorta ay dhacayso.**

**MUHIIM: si taxadar leh u hubi tayada biyaha ah ee loo baahanyahay in lagu milo kartoonka ORSta ah.**

1. **Bar oo tus hooyada sida lo qaso ee loosiiyo ORSta.**
2. **Diyaari halka litir ee u hureeya guriga dhexdiisa.**
3. **U sheeg hooyadu in ay siiso ilmaha ORSta adiga oo la jooga.**

    - Ku dhaq gacmahaaga biyo iyo saabuun.
    - Kaga shub dhammaan budada ku jirta kartoonka weel nadiif ah.
    - Adeegso weelkasta oo suuro gal ah, sida jeeg, madiibada ama dhalo.
    - Isticmaal BIYO LA SIFEEYEY, hadii aanay suuro gal ahayn in la kariyo oo la qaboojiyo biyuhu.
    - Ku shub 8 (sideed) koob oo biyo la sifeeyey ah weel hal litir ah adiga oo ku daraya budada ORSta. (haddii koob aanad halay, adeegso weel kale si aad u gaarsiiso 1 litir, intaa kadib si wanaagsan u walaaq ilaa inta budadu ka milmayso sida ay u dhantahay.
    - U sheeg in hooyadu maalin kasta u walaaqdo ORS cusub maalin kasta weel nadiif ah, ha daboolaado weelku, iska daadina wixii milan ka soo hara maalintii hore.
    - Sii hooyada 2 bushqadood oo ORS ah si ay u sii wado daawaynta marka ta hore idlaato.
    - Usii si joogta ah kabashooyink yar oo ORS ah adiga oo ku siinaya mulgacad ama koob.
    - Haddii ilmuhu matagayo, in muddo ah yara sug intaa kadibna ku celi dareeraha marlabaad, hase ahaatee si ka qunyar san sidii hore.
    - Sii wad in aad siiso dareere dheeraad ah ilaa shubanku ka istaago.

TUSAALAHA KA EEG BOGGA KAN XIGA

**"SANDUUQ 2V" SIDA LOO DIYAARIYO MILANKA ORS**

**Taantuska tababaraha: bar hooyada sida loo diyaariyo ORSta**

**<u>U sheeg</u> ardayda:**
Waxa aad baratay sida loo baro hooyada sida loogu siiyo ilmaha kiniinka guriga. Hadda, waxa aad baran doontaa sida loo baro hooyada sida ay u diyaarinayso ORS.

ORS waxa ay u jirtaa laba nooc:
- mid loogu talagalay hal litir oo biyo nadiifa ah;
- mid loogu talagay in lagu walaaqo nus litir biyo ah.

**MUHIIM:** Csi taxadar leh u hubi xadiga biyo ah ee loo baahanyahay si loo milo bushaqadda ORSta ah.

Ku dhaq gacmahaaga saabuun iyo biyo;
- K u shub budada ku jirta bushqada weel nadiif ah ;
- Adeegso hadba wixii weel la heli karoe;
- Adeegso biyo SIYEEYEY, haddii aanay suuro gal ahayn isticmaal biyo la kariyay oo la qaboojiyay;
- Kushub 8 (sideed ) koob oo biyo nadiifa oo la sifeeyey ah weelka halka litre budada ORSta loogu tala galay kujirto. Si wanaagsan isugu walaaq ilaa inta budadu kawada milmayso;
- U sharax hooyada in maalin kasta ORS cusub u walaaqdo weel nadiifa ilmaha iyo in ay dabool saarto weelkaas. Hadaadiso milanka ka soo hadhay maalintii hore;
- Sii hooyada laba xabbo oo ORS ah si ay usii siiso ilmaha marka ta hore dhamaato;
- Kaba shooyin yar yar oo ORS ah kusii ilmaa malgaca ama koob;
- Haddii ilmuhu matago, yara sug, intaa kadibna sii dareeraha marlabaad si qunyar ah;
- Sii wad in aad siiso dareere dheeraad ah ilmaha ilaa inta shubanku ka istaagayo.

**U sheeg ardayda:**

**"hubinta fahamka hooyada " waxa looga jeedaa hubinta in ay fahamtay tilmaamahaaga. Hubi fahamka hoyada adiga oo waydiinaya su aalahan soo socda:**
- Dareere caynkee ah ayaad siin doontaa?
- Dareere intee leeg ayaad siin doontaa?
- Imisa goor ayaad siin doontaa milanka ORS?
- Biyo intee leeg ayad isticmaali doontaa marka aad qasayso ORSta?
- Sideed u siin doontaa ORSta?
- Maxaad samayn doontaa haddii ilmuhu matagayo?

Waydii hooyada hadii ay jiraan wax dhibi kahaysataa. Tusaale ahaan, haddii ay tiraa ma hayo wakhti igu filan, ka caawi qorshaynta sidii ay u bari lahayd qof kale siinta dareeraha. Hadii ay tiraa ma hayo weel 1 litir ah oo aan ku qoosho ORSta, tus sida loo qiyaaso hal litir iyada oo la adeegsanayo weel yar. Ama, tus sida loo qiyaaso hal litir iyada oo la adeegsanayo weel wayn looguna calaamadiyo agab habboon.

## "SANDUUQ 3 V" KINIINKA AMOXYCILLINTA EE DAAWAYNTA KA HORAYSA INTA AA ILMAHA CUSBITAALKA LOO DIRIN IYO SOOCIDDA DARAN

U ADEEGSO KINIINKA AMOXYCILLIN TA AH EE KU JIRA SANDUUQA KALIYA KA HOR INTA AAN ILMAHA CUSBITAAL LOO DIRIN IYO ILMAHA LEH JIROOYINKAN SOO SOCDA:

- **JIRRO AAD U DARAN**
- **OOF WAREEN DARAN**
- **JIRRO AAD U DARAN**

| A<br>Kiniin | B<br>Wakhtiyada iyo Maalmaha | C<br>Da'da | |
|---|---|---|---|
| **Amoxicillin<br>Kiniin of 250 mg.<br>Milmi kara** | **Sii 2goor malinkasta<br>muddo 5 Maalmooda** | **2bilood ilaa 12bilood** | **12bilood ilaa 5 sano** |
| |  | 1 | 2 |
| |  | 1 | 2 |

HADDII ILMUU QABO JIRRO DARAN, OOF WAREEN DARAN AMA JIRRO XUMADA WADATA OO DARAN, SI DHAKHSO AH CUSBITAAL UGU DIR. Sii ilmaha xadiga u horeeya ee amoxycillin ah, intaa kadibna, u dhiib hooyada laba xaddii oo ay ku dhamaystirto daawaynta maalinta koobaad, intaa kadibna u sheeg hooyada in ay sii wado siinta xadiyada ilaa ilmuhu ka gaarayo cusbitaal.

**SII HOOYADA FOMKA GUDBINTA**

**KULA TALI HOOYADA INEY KU SOO NOQOTO MARKI CUNUGA LAGA SOOSAARO CISBITALKA AMA RUGTA CAAFIMADKA**

**LASOCO ILMAHA MARKA LOSOOCELIYO UGU YARAAN HAL MAR TODOBAADKI INTA ILMUHU KA BOGSOONAYO**

HADII AANAY SUURO GAL AHAYN IN AAD CUSBITAAL U DIRTAA, ilmaha aad ula soco, haddii ay suura gal tahay, di b u eeg, dib u sooc oo daawee ilmaha 6 saacadood gudahood adiga oo adeegsanaya Tusaha taxan haddii ilmuhu kasoo raynayo, u sheeg hooyada in ayguriga qaban karto iyo in aanay kala goyn daawada oo ay siiso dhammaan kiniinada oo dhan.

**BAR HOOYADA SIDA LOO SIIYO KINIINKA GURIGA DHEXDIISA** *(sanduuq 1 V).*

**KALA TALI HOOYADA DARYEELKA GURIGA DHEXDIISA:**

- **Sii dareere dheeraad ah:** u kordhi naas nuujinta. Cabitaan badan sii.
- **Sii wad quudinta:** ha joojin quudinta ilmaha buka.ku dhiiri gali in ilmuhu wax cuno.
- **Goorta dhakhso loogu soo noqonayo waa hadii ilmuhu:**
  - aan wax cabi karin ama naaska jaqi karin,
  - ama cabiddiisa iyo nuugudiisu wanaagsanayn AMA,
  - xaaladdiisu ka sii darto AMA,
  - uu yeesho xummad ama xumadiisu korodho.
- **Goorta la soo noqonayo:** hadii aanad ilmaha guriga kula socon karin, u sheeg in hooyadu soo celiso laba cisho gudahood.

## “SANDUUQ 3 V” KINIINKA AMOXYCILLINTA EE SOOCIDAHA BA AN

**Tusaalaha Tabaraha:** Sida loo adeegsado SANDUUQ 3V

**U sheeg ardayda:**

Amoxycillin waa daawo antibiotic ah, sida daraaded ka taxadar oo bixi kaliya marka aad hubto in loo baahanyahay. In aad bixiso antibiotic iyada oo aan loo baahanayn waxa ay noqon kartaa mid halis ah aa aad waxba tarin carruurta.

**Tababarha:**

Tilmaan hal tallaabo markiiba
Tus ardayda SANDUUQ 3V una sheeg in ay eegaan:

**Tallaabada koobaad: Akhri waxa ku qoran sanduuqa 3V ee daawaynta dushiisa:**

Waxa aad u adeegsan sanduuqan in aad ku daawayso ilmo kasta oo leh soocdimahan daran mid ka mid ah:

- JIRRO AAD U DARAN
- OOF WAREEN DARAN
- JIRRO AAD U DARAN

Tilmaamahani waa qaar aad u cad: uma adeegsan kartid sanduuqan jirrooyinka kale.

**Tallaabada labaad: Waxa aad arki kartaa shaxanka jadwalka iyo xadiga amoxycillin.**

U sheeg ardayda in aad rabto in aad bixiso tusaale ku saabsan sida wax loo adeegsado shaxanka daawada amoxycillin.

Ask the learners to look at *treatment box 3V*. Point to the amoxicillin table of dose and schedule. Tell the learners that the table indicates the following:

- Name of the drug,
- When the drug should be given (the schedule),
- How much of the drug should be given (the dose).

a. U sheeg in ardaydu ay fiiriyaan SANDUUQ 3V ee daawaynta. Tilmaan shaxanka amoxycillin ee xadiga iyo jadwalka. U sheeg ardayda in shaxanku tilmaamayo sida soo socota:

- magaca daawada,
- goorta daawada la bixinayo (jadwalka),
- daawo intee leeg ayaa ay tahay in la bixiyo (xadiga).

b. Intaa ka dib usheeg ardayda in aad tusi doonto sida loo adeegsado sanduuqa, si loo go aamiyo xaddiga antibiotics ah ee la siinayo ilmo qaba mid ka mid ah cudurada kor lagus oos heegay (did u tax soocidaha kore).
Tilmaan marka hore erayga “amoxycillin”. Usheeg ardayda in tani tahay waxa aan ka hadlayno.

c. Tilmaan meesha ay ku qorantahay ereyada “Wakhtiga iyo Maalmaha”. U sharax: kani waa jadwalka daawaynta (amoxycillin, 2 goor maalintii -Subax,habeen- muddo 5 cisho ah).d. Tilmaan da’da una sharax:

- “2 bilood” macnaheedu waxa weeye in ilmuhu laba bilood jiro;
- “ilaa 12bilood” macnaheedu waxa weeye in in ilmuhu aanu wali gaarin 12bilood (waxa uu 12bilood noqonayaa sanad guurada dhalashadiisa);

- "12bilood" macnaheedu waxa weeye in ilmuhu gaaray 12bilood;
- "ilaa 5sanno" macnaheedu wa in ilmuhu aanu wali 5sanno gaarin (waxa uu noqon doonaa 5sanno sanadguurada dhalashadiisa).

**Tababaraha:** adeegso tusaalahan si aad u cadasyo qodobka kore.

**U sheeg ardayda:**
Eeg sanduuqa 3V ee daawaynta intaa ka dib hel laynka ay ku qoran yihiin ilmo 6bilood jir ah.
Go aanso xadiga amoxycillin ah ee la siinayo ilmo 6bilood jira oo ay hayso OOF WAREEN DARANI.

**Tababaraha:**
Tilmaan joogu taxa amoxycillin iyo laynka si aad u muujiso ilmo in ilmaha 6bilood jiraa ay tahay in uu helo: 1kiniin ah, 3 wakhti maalin kasta, muddo 5 maalmood ah.
Ku celi jaantuska kore ee ilmaha 2jirka ah ee leh isla soociddaas. Ilmuhu waa in uu helaa: 2kiniin ah, 3goor maalintii, muddo 5maalmood ah.

**Tallaabada sadexaad: HADDII ILMUHU LEEYAHAY SOOCID DARAN, DHAKHSO CUSBITAAL UGUDIR,** Sii ilmaha xadiga koobaad ee daawaynta SOOCIDDA DARAN AH, intaa kadib sii hooyada inta kadhiman xadiga si ay ugu sii wado ilmaha ilaa inta uu ka gaarayo cusbitaal.

Xaalado farabadan, in cusbitaal laysu dira ma suuragal aha tuulada oo aad uga fog cusbitaalka awgeed. Haddii ilmaha aan cusbitaal loo diri karin, adeegaha caafimaadku waa in uu raacaa tilmaamaha hoosu ku qoran.

**GOORTA ANAY SUURA GAL AHAYN IN CUSBITAAL LOO DIRO,** ilmaha si aada ula soco, hadday suuro gal tahay.
**ILMAHA LA SOCO** (dib u qiimee, dib u sooc oo daawee) 6 saacadood gudahood adiga oo adeegsanaya Tusaha Taxan.
**Haddii ilmuhu kasii daray ama aanu kasoo rayn,** sii wad daawada.
**Haddii ilmuhu kasoo raynayo,** kula tali hooyada in ay guriga tagi karto, iyo in aanay joojin daawada oo sii wado ilaa ay ka dhamaystirasyo kiniinka oo dhan.

**Tallaabada afraad: BAR HOOYADA SIDA LOOGU SIIYO ILMAHA KINIIN GURIGA DHEXDIISA (SANDUUQ 1V).**
Daawooyinka afka ee ku yaal sanduuqa daawaynta ayaa loo bixiyaa sababto kala duwan, xadiyo kala duwan iyo wakhtiyo kala duwan.
Si kastaba ha ahaatee, farsamada lagu burburiyo ee loo siiyo kiniinku waa isku mid.

**Talaabada shanaad: KULA TALI HOOYADA DARYEELKA GURIGA iyo GOORTA AY SOO NOQONAYSO:**
**Marka ay tahay in degdeg loo soo noqdo,** macnaheedu waxa weeye hooyadu in ay dhakhso u soo noqoto hadii ilmuhu aanu awoodin inuu:
- Wax cabo amanaaska jaqo **ama**
- Cabiddiisa ama naas nuugiddiisu ay liidato **ama**
- Uu ka daro **ama**
- Uu yeesho xummad ama xumadiisu korodho.

**Sii dareere dheeraad ah  macnaheedu waxa weeyi:**

- In la wado quudinta ilmaha buka iyo in lagu dhiiri galiyo in ilmuhu wax cuno. Ilmaha buka waa daciifaa waxaanu u baahanyahay in uu si joogto ah wax u cuno;
- Haddii ilmuhu naaska jaqayo, hooyadu waa in ay naaska siiisaa inbadan iyo muddo dheer, habeen iyo maalin;
- Hadii ilmuhu naaska jaqayo cuntadana qaadanayo, hooyadu waa in waddaa nuujinta naaska  uguna dartaa cunno tabar uu ka helo sida faralay saliid lagu daray, malaay, hilib, ukun iyo khudaar, haddii la heli karo.

**Goorta la soo noqonayo:**

· Wax cabo amanaaska jaqo **ama**
· Cabiddiisa ama naas nuugiddiisu ay liidato **ama**
· Uu ka daro **ama**
· Uu yeesho xummad ama xumadiisu korodho.

## Layli 1: Sii  amoxycillin soocidaha daran

Sii arday kasta fursd uu ku akhriyo sanduuqa amoxycillinta ee soocidaha daran.

Samee layli marka waqtigu kuu saamaxo. Waxa laga yaabaa in aad doorbiddo in aad samayso marka ardaydu u baahantahay dibu eegis iyo marka ay u baahdaan in ay ka qaataan biririf hadalkaaga.

U sheeg ardayda in layligani uu ku saabsanyahay sida loo bixiyo amoxycillin, iyo go aaminta xadiga iyo jadwalka.

**Si loo sameeyo layliga:**

**a.** Usharax in layligani uu siin doono ardayda xirfadaha habboon ee ku saabsan isticmaalka sanduuqa dawaynta ee daawaynta carruurta jirran. Tani waa xirfad muhiim ah.  Hadii  aan amoxycillinta loo siin si habboon, waxa ay waxyeelayn kartaa ilmaha. U sheeg ardaydu in ay tix raaci karaan sanduuqa  amoxycillinta si ay uga jawaabaan su aalaha layliga. Hubi in dhammaan ardaydu arki karto gidaarka.

**b.** Waydii ardayda hadii ay wax su aalo ah qabaan ka hor inta aan layliga la samayn. Uga jawaab su aalaha si dhamaystiran.

**c.** bilaw layliga. Waydii su aasha ku taal joog u taxa bidix. Tixraac joogu taxa habboon si aad u hubiso jawaabaha ardayda.

**Waydii ardayda :**
"imisa kiniina ayaad siinaysaa ilmo 5sanno jira oo loo soocay in uu qabo OOF WAREEN DARAN?"
Intaa kadib ha tilmaamo ardaygu goobta saxa ah ee sanduuqa antibiotica si uu u helo jawaabta saxa ah. Arday kasta sii fursad uu ku barto sida loo go aamiyo xadiga iyo jadwalka daawada.

## Layli 1: amoxycillinta soocidaha halista ah

**Waydii ardayda:** jadwal caynkee ah ayaad usamayn lahayd ilmo soocidda loo sameeyey darantahay:

| DA'DA | XADIGA IYO JADWALKA AMOXYCILLIN |
|---|---|
| 8 bilood | 1 kiniina 2goor maalintii mudd 5 maalmood ah |
| 5 sanadood | 2 kiniina 2 times maalinkasta for 5 MAALINs |
| 3 saadood | 2 kiniina 2goor maalintii mudd 5 maalmood ah |
| **DA'DA** | **XADIGA IYO JADWALKA AMOXYCILLIN** |
| 2 bilood | 1 tablet 2 times daily for 5 days |
| 11 bilood | 1 kiniina2goor maalintii mudd 5 maalmood ah |
| 4 sanadood | 2 kiniina 2goor maalintii mudd 5 maalmood ah |
| 2 sanadood | 2 kiniina 2goor maalintii mudd 5 maalmood ah |
| 5bilood | 1 kiniina 2goor maalintii mudd 5 maalmood ah |
| 6bilood | 1 kiniina 2goor maalintii mudd 5 maalmood ah |
| 12 bilood | 2 kiniina 2goor maalintii mudd 5 maalmood ah |
| 9 bilood | 1 kiniina 2goor maalintii mudd 5 maalmood ah |
| 18bilood | 2 kiniina 2goor maalintii mudd 5 maalmood ah |
| 7 bilood | 1 kiniina 2goor maalintii mudd 5 maalmood ah |
| 15bilood | 2 kiniina 2goor maalintii mudd 5 maalmood ah |

## Layli 2 : Amoxycillin loogu talo galay soocidda daran

Qabo layliga marka ku habboon. Waxa laga yaabaa in aad doorbiddo marka adaydu u baahantahay dibu eegsi ama marka ay u baahanyihiin in ay ka qaataan biririf hadalkaaga.

U sheeg ardayda in layligani kusaabsan yahay sida loo bixiyo amoxycillin, iyo sida loo go aamiyo xaddiga iyo jadwalka.

| XADI IYO JADWAL CAYNKEE AH AYAAD KU SIIN CARRUURTAN SOO SOCOTA EE LEH SOOCIDAHA DARAN AMOXYCILLIN? | | | |
|---|---|---|---|
| DA'DA | KINIIN 250 MG | Imisa goor maalintii | Inisa cisho |
| 10 bilood jira | 1 | 2 | 5 |
| 7 bilood jira | 1 | 2 | 5 |
| 11 bilood jira | 1 | 2 | 5 |
| 3 sanno jira | 2 | 2 | 5 |
| 5 bilood jira | 1 | 2 | 5 |
| 11 bilood jira | 1 | 2 | 5 |
| 2 bilood jira | 1 | 2 | 5 |
| 5 sanno jira | 2 | 2 | 5 |
| 2 sanno jira | 2 | 2 | 5 |
| 4 bilood jira | 1 | 2 | 5 |
| 18 bilood jira | 2 | 2 | 5 |
| 8 bilood jira | 1 | 2 | 5 |
| 4 sanno jira | 2 | 2 | 5 |
| 6 bilood jira | 1 | 2 | 5 |

## Layli 3: Jawahir

Akhri tilmaanta xaaladda " Barista hooyada sida loo bixiyo kiniinka amoxycillin".

Jawahir waa ilmo 7 bilood jirta. si aan caadi ahayn ayay u hurdaysan tahay.
**Sooc Jawahir.**

Ilmuhu ma shubmayo, Jawahir waxa ay qufacaysay 3dii cisho ee u dambeeyey, dhakhsaha neefsigeedu waa 58neefsi/daqiiqaddii mana laha wax xumad ah.
**Meel u sooc Jawahir.**

**U sheeg ardayda :**
Adeegso sanduuqa SANDUUQ 3V si aad uga jawaabto su aalahan soo socda:

1. Sideed u soocday Jawahir?

2. Daawo caynkee ah ayaad siin ilmaha

*Ku qor jawaababaha foomka wax lagu qoro.*
**U sheeg hal arday in uu jawaab afka ah ku siiyo**
Sideed u baraysaa hooyadu in ay ilmaha kiniin ku siiso guriga?

**Tax ugu yaraan sadex su aalood oo aad waydiin doonto Jawahir hooyadeed si aad u hubiso in ay fahamsantahay sida loo siiyo ilmaha amoxycillinta.**

*Ku qor jawaababaha foomka wax lagu qoro ama buugga.*

Goorma ayay tahay in hooyadu soo noqoto?

*U sheeg in hal arday uu ku siiyo jawaab afka ah.*

*Tax ugu yaraan sadex suaalood oo aad waydiinayso jawahir hoyadeed si aad u hubiso in ay garanayso sida ay dhakhso ugu soo noqonayso.*

**Tababaraha**
**Hubi in ardaydu ay keenaan su aalo hubsiimo oo wanaagsan. Haddii ardayda wali ay ku adagtahay samaynta su aaluhu, sii sharaxaad dheeri ah iyo layliyo.**

### Jawaabta Layliga 3: Jawahir

**1. Oofwareen Daran waa in si dhaqso ah loo gudbiyaa. Hadii aan la gudbin karin**
**2. Sii Amoxycillin 1 xabo 2goor maalintii muddo 5 casho ah,**

- Jawaabtas:
- U sharax sababta aad ilmaha u siinayso antibiotic ta;
- Tilmaan sida loo qiyaasayo xadiga;
- Waydii hooyada in ay barato sida loo cabiro xadiga;
- Lasaco marka ay baranayso;
- U sheeg in ay siiso marka koobaad iyadu. Kiniinka waa in lagu daraa biyo nadiifa,
- caano hooyada laga maalay ama cunto;
- U sharax inta goor ee lasiinayo maalintii , goorta la siinayo, iyo inta cisho. Qor xogtan oo ku muuji bushqada aad daawada ku ridayso, intaa kadib ku rid daawada bushqada oo u dhiib hooyada;
- U sharax in ay tahay in la qaato daawada oo dhan si loo dhamaysto daawaynta, xattaa hadii ilmuhu u muuqdo in uu kasoo reeyey;
- Waydii, su aalo aad ku hubsanayso in ay fahamtay tilmaamaha.

**Jawaabaha hubinta fahamka hooyada**

Imisa xabbo oo kiniin ah ayaad siin Jawahir markiiiba?

- Goorma ayaad siin doontaa?
- Sidee ayaad u diyaarin xadiga si ay u liqi karto?
- Imisa cisho ayaad siin amoxycillin?
- Mawaad samayn haddii ay u muuqato in ay ka sooraynayso kahor inta aanay dhamaysan daawadan?
- Jawahir waa in ay si dhakhso ah usoo noqotaa hadii aanay karayn in ay wax cabto ama naaska jaqdo, ay ka darto, ama xumad yeelato.
- Laba cisho gudahood
- Maxaad samayn haddii jawaahir raysato?
- Goorma ayaad dhakhso usoo celin ?

- Maxaad samayn haddii aana wax cabi karin ama aanay naaska jaqayn?
- Maxaad samayn hadiii ay ka darto?
- Maxaad samayn haddii ay kulushahay?

## Layli 4: Matalaad
## Barista hooyada sida loogu siiyo guriga ilmaha kiniinka

**Akhri xaaladda:** Mohamud waa ilmo 2jir ah. Adeegaha caafimaadku waxa uu u soocay in uu qabo jirro ah OOFWAREEN DARAN waxaanu go aansaday in uu siiyo amoxycillin, iyo biyo sonkor ama malableh. Ilmahaas waa si dhaqso ah loo gudbiyaa, haddii aan la gudbin kareyn, Adeegaha caafimaadku waa in uu baro hooyada in ay Mohamud guriga kiniin ku siiso.

**U sheeg matalayaasha:**

In ay bilaabaan Matalaadda, adeegso foomka la buuxbuuxiyo si aad ugu qorto xogta o dhan.

U sheeg hooyada in mahamoud u baahanyahay in ka badan hal nooc oo kiniin ah.

Bar hooyada sida loogu siiyo kiniinka ilmaha guriga. Sii hooyada dhammaan xogta muhiimka ah, tus sida loo siiyo daawada, eegna sida ay u siinayso marka koobaad ilmaha.

U dhiib hooyada daawo ku filan inta ilmaha daawadu u socoto.

Intaa kadib kula tali hoyada goorta ay soo noqonayso iyo marka ay tahay in ay dhakhso u soo noqoto. Hubi in ay fahamtay hooyadu waxa aad u sheegtay.

**U sheeg ardayda cidda matali doonta doorka hooyada:**

U dhaqan si hooyo walaacsan oo kale. Muuji in aanad fahamsanayn jadwalka daawada, xdiga ama aad ka walaacsantahay in aad siiso hal daawo wax ka badan markiiba.

U dhagayso si taxadar leh tilmaamaha adeegaha caafimadku ku siinayo. Waydii su aalo haddii aanad fahmin tilmaamaha. Ka jawaab su aal kasta oo ka timaada adeegaha caafimaadka.

**U sheeg daawadayaasha:**
Daawo matalaadda. Haka dhex galin. Akhri suaalaha soo socda oo ka jawaab inta aad daawanayso:

a. adeegaha caafimaadku ma siiyay hooyada xog ku saabsan sababta daawada afku ay u tahay muhiim, iyo sida/goorta la siinayo?
b. adeegaha caafimaadku ma siinayaa hooyada tusaalayaal kusaabsan sida loo cabiro xadiga daawo kasta?
c. adeegaha caafimaadku ma la soconayaa sida hooyada wax u samanayso:
Barashada iyo sida ay u diyaarinayso daawada ?
Siinta xadiga koobaad ee daawada ilmaheeda?
d. adeegaha caafimaadku si saxa ma ugu qorayaa xogta bushqada daawada lagu ridayo ?
e. adeegaha caafimaadku ma u sheegay hooyada goorta ay soo noqonayso iyo goorta ay tahay in ay si dhakhso ah u soo noqoto?
f. adeegaha caafimaadku ma hubiyay in hooyadu fahamtay?

## Layli 5: Axmed

U jeedada layligani waa in ardaydu barato sida loola socdo OOF WAREEN KA DARAN.

Usheeg ardayda:

Adeegso tusaha taxan, foomka wax lagu qoro iyo sanduuqa daawaynta.

Ahmed ` hooyadii waxa ay u soo celisay si loola socdo. Waa ilmo 14 bilood jira.

Laba maalmood ka hor waxa loo soocay in uu qabo OOF WAREEN DARAN, adeegaha caafimaadkuna waa u diri kari waayay cusbitaal iyada oo sababtuna tahay in xarunta caafimaad ee ugu dhawi ay ku taal 10 saacadood meel looga lugeeyo tuulada.

Adeegaha caafimaadku waxa uu siiyay Axmed kiniin amoxycillin ah iyo biyo sonkor ama malab leh.

Adeegaha caafimadku waxa uu ka warsanayaa hooyada xaaladda Abdinor iyo in ay wax ku cusubi jiraan. Hooyadu waxa ay ugu jawaabtay in uu sidii hore aad uga fiican yahay.
**Waydii ardayda:**
Markii aad eegtay axmed xaaladdiisa, waxa aad ogaatay in uu lahaa qalal subaxdii hore. Walina waa qufacayaa.

Hooyadii waxa ay tiri shuban iyo xummad toona malaha. Naaska ayuu si wanaagsan u jaqayaa cuntada qaarkeedna wuu u qaadanaya.

1. adiga oo eegaya Axmed calaamadihiisa maanta, sideed Axmed u sooci lahayd, sideedse u daawayn lahayd?
***Adeegso foomka wax lagu qoro si aad u calaamadiso calaamadaha, sooc oo daawee si waafaqsan soocidda.***

### Jawaabta layliga 5: Axmed

Ja waababa:
Ahmed waxa uu qabaa JIRRO DARAN, OOFWAREEN DARAN, SHUBANSE MA QABO.

- Waa insi dhaqso ah cusbitaal loo diro ama xarun caafimaad.
- Waxa lagu daawayn doonaa kiniin amoxycillin ah, 2xabbo 2goor maalintii muddi sadex cisho ah;
- Kala tali hooyada cusbitaal u dirida, siinta daawada, dareere fara badan iyo cunto ilaa ay ka gaadhayso goob caafimaad.

## Layli 6: Maxamed

Maxamed waxaa loo keenay xanuun o ku saabsan OOF WAREEN DARAN tirsiga neefsiguusu waa 45. Waa ilmo 3 jir ah. Ma qabin wax shuban ah iyo xumad toona. Waxa uu qaadanayay amoxycillin, biyo sonkor iyo malab leh muddo laba casho ah. Hooyadii waxa ay sheegtay in uu wali buko.

**U sheeg ardayda:**

Markii aad dibu fiirisay Maxamed, waxa aad ogaatay in uu wax cabi karo. In uu qalal qabay maalin ka kor. Uma hurdaysna si aan caadi ahayn kuman adka toosiddu. Wali waa qufacayaa xumadse malaha.

Adiga oo eegaya calaamadaha Maxamed maanta, sideed u sooci lahayd una daawayn lahayd?
*Adeegso foomka wax lagu qoro si aad u calaamadiso calaamadaha, sooc oo u daawee si waafaqsan soocistiisa*

### Jawaabta Layliga 6: Maxamed

Maxamed waxa uu qabaa JIRRO DARAN iyo OOF WAREEN DARAN.

- Waxa uu sii wadi doonaa qaadashada amoxycillin, 2xabbo, 2 goor maalintii sadexda cisho ee hadhay, biyo sonkor ama malab leh;
- U sheeg hooyadu in ay siiso amoxycillin ilaa maalinta shanaad;
- Kula tali hooayda in a dhakhso u soo caliso hadii ilmaha xaaladdiisu ka darto. Ku dhiiri gali in ay siiso cunto iyo dareere badan;
- La socosho maalinkasta ah waa in loo sameeyo.

**Tababaraha:**
Tus ardayda SANDUUQ 4V una sheeg in sanduuqan loogu talagalay daawaynta OFWAREENKA iyada oo la adeegsanayo Amoxyicillin.

Tilmaan xadiga una sheeg: "sida aad arki kartaan, waa isla daawadii aan soo baranay, farqiga kaliya e u dhaxeeya labada sanduuq waa xadiga daawada laga qaadanayo iyo daryeel la socoshada ah (u tilmaan xagga hoose ee bogga)".

## "SANDUUQ 4 V" KINIINKA AMOXYCILLINTA EE CARRUURTA QABTA OOFWAREENKA

U ADEEGSO XADDIGA KINIINKA AMOXYCILLIN AH EE KU JIRA SANDUUQ KALIYA CARRUURTA QABTA:

- **OOF WAREEN**

| A<br>Kiniin | B<br>Wakhtiyada iyo Maalmaha | C<br>Da'da | |
|---|---|---|---|
| **Amoxycillin<br>Kiniin of 250 mg.<br>Milmi kartae** | **Sii 2goor malinkasta<br>muddo 5 Maalmooda** | **2bilood ilaa<br>12biloods** | **12 bilood ilaa<br>5 sanno** |
| | (subax) | ½ | 1 |
| | (habeen) | ½ | 1 |

**HADDII ILMUHU QABO OOF WAREEN,** sii ilmaha xadiga koobaad ee amoxycillin ah, inta akadib, sii hooyada inta hadhay xadiga si ay daawada guriga ugu dhamaysato.

BAR HOOYADA SIDA KINIINKA GURIGA LOOGU SIIYO ILMAHA *(sanduuq 1V)*.

KALA TALI HOOYADA SIDA ILMAHA LOOGU DARYEELO GURIGA:
- **Sii dareere dheeraad ah:** u kordhi nuujinta naaska. Sii cabid badan
- **Sii wad quudinta:** ha joojin quudinta ilmaha buka. Ku dhiiri gali in ilmuhu wax cuno.
- **Goorta dhakhso loo soo noqdo:**
- **Hooyada waa in ay raadisaa ACTs:** hadii ilmuhu:
  - aanu wax cabayn ama aanu naaska jaqayn AM,
  - u cabayo ama naaska u jaqayo si liidata AMA,
  - uu ka daro AMA,
  - uu yesho xumad ama xumaddiisu korodho.

KA WAR DOON ILMAHA QABA OOF WAREENKA LABA CISHO KADIB MAALINTI UU KUUYIMI MARKA KOOBAAD:
- U qiimee ilmaha si buuxda adiga oo adeegsanaya TUSAYAASHA QIIMAYNTA iyo *SOOCIDDA*.
- Hadba wixii laga helo ilmaha daawo ku habboon sii.
- Haddii ilmaha xaaladdiisu ka dartay ama ka soo raysay, sii wad daawaynta cusbitaalna u dir.
- Hadii ilmuhu kasoo raynayo, kala tali hooyada in aanay joojin daawada oo ay wadii siinta kiniinka.

## Layli 7: Amoxycillin loogu talagalay OOFWAREENKA

Samee layligan marka ku habboon. Waxa laga yaabaa in aad doorbiddo in aad samayso marka ardaydu u baahantahay muraajaco ama marka ay rabaan in ay biririf ka qaataan hadalkaaga.

U sheeg ardayda in layligani uu dib u eegis ku samayn doono sida loo bixiyo amoxycillin, iyo sida loo go aamiyo xadiga iyo jadwalka.

| XADDI INTEE LEEG AYAAD KU SIIN JADWAL CAYNKEE AH D CARRUURTAN SOO SOCOTA EE QABTA OOF WAREENKA ? | | | |
|---|---|---|---|
| DA'DA | KINIINKA 250 MG | Imisa goor maalinkasta | Imisa cisho |
| 10 bilood | 1/2 | 2 | 5 |
| 7 bilood | 1/2 | 2 | 5 |
| 11 bilood ld | 1/2 | 2 | 5 |
| 3 sanno | 1 | 2 | 5 |
| 5 bilood | 1/2 | 2 | 5 |
| 11 bilood | 1/2 | 2 | 5 |
| 2 bilood | 1/2 | 2 | 5 |
| 5 years old | 1 | 2 | 5 |
| 2 years old | 1 | 2 | 5 |
| 4 bilood | 1/2 | 2 | 5 |
| 18 bilood old | 1 | 2 | 5 |
| 8 bilood | 1/2 | 2 | 5 |
| 4 years old | 1 | 2 | 5 |
| 6 bilood | 1/2 | 2 | 5 |

## "SANDUUQ 5 V"  QORSHAHA C: DAAWEE SHUBANBIYOODKA DARAN

- Cunuga qaba cudurka shuban biyoodka iyo astaamihiisa cadeynaya "fuuqbax daran" wuxuu qabaa xanuun daran.
- Cungu waxa uu u baahanyahay in uu helo biyo iyo Milix kuwaasoo lagu soo celinaayo intii dhacaan jirkiisa ka lumay sida ugu dhaqsiyaha badan.
- Hadii uu cunugu aanu helin cabitaan, waxaa dhaceysa in uu cunugu dhinto.

**WAA IN AAD SIDA UGU DHAQSIYAHA BADAN USOO GUDBISAA CUNUGA MUDO LABO SAAC GUDEHEEDA AH.**

**Isticmaal sanduuqa hoose si aad u ogaato inta dareeraha aadf siinayso ilmaha 6 saac ee ugu horeyso(haddii ilmaha rabo ors ku sii wad inta uu rabo.**

**IMISA XABO OO ORS AH AYAA LASIIN KARAA LIXDA SAAC EE UGU HOREYSA**

| 2 bilood ilaa<br>4 bilood jir | 4 Billod ilaa<br>12 bilood | 12 bilood ilaa<br>2 sano | 2sano  ilaa<br>5 sano |
|---|---|---|---|
| 600 ml (2koob) | 1000 ml (3 Koob) | 1300 ml (4koob) | 2000 ml (6 koob) |

▶ GUDBI ILMAHA, hadii ilmaha cabo karo ku billow ORS.
**TUSI HOOYADA SIDII AY USIIN LAHEYD CABITAANKA ORS ka:**
- Sii hooyada warqada gudbinta.
- U sheeg hooyadaa in ay soo laabata marka cunuga ay ka soo celiso xaumaha caafimaadka.

▶ HADDI AY GUDBINTA SUURA GAL AHYN MUDDO 2 SAAC GUDAHEEDA
ILMAHANA UU WAX CABAYO SII SII DAREERE FARA BADAN:
U SHEEG HOOYADA IN AY KU BILLOWDO SIDA UGU DHAQSAHA BADAN DAREERAHA ORS OO AAD ADIGA GOAANSATAY 6 DA SAAC EE SOO SOCOTA (SIDA KU XUSAN SANDUUQA HOOSE).

U KUURGAL CUNUGA MUDO 6 SAACADOOD AH.  BAAR CUNUGA.
- Hadii cunuga aad ku aragto astaamaha "fuuqbaxa" hadana u celi daaweyn kale adigoo isticmaalaya Qorsha C markale  *(cutubka 5V);*
- Hadii cunuga ay ka muuqato astaamaha Shuban-biyoodka, ku dawee qorsha B *(Cutubka 6V);*
- Hadii cunugu uusan shubmeynin ku daawee qorshaha  A *(cutubka 7V);*
- Sii hooyada inta baakadood ee ORS ah ee loo baahan yahay.

U SHARAX  AFARTA QODOB EE LAGU  DABIIBAAYO SHUBANKA ADIGOO GURIGA JOOGA  *(Qorsha  A – cutubka  7V):*
1. SII CABITAAN DHEERAAD AH / BADAN
2. SII N ZINIC TAB MUDO  10 maalmood ah *(cutubka  8V);*
3. JOOGTEE QUUDINTIISA;
4. GOORTA LA SOO CELINAAYO.

INTA AADAN GURIGA KA SOO TAGIN HUBSO IN AY HOOYADU FAHANTAY:
- Sida loo diyaarinaayo Cabitaanka  ORSta  *(Cutubka 2V).*
- Imisaa xabo oo ORS ayaa la siinayaa 6da saac ee ugu horeysa iyo sida loo siinayo cabitaanka dheeriga ah intaas kadib.

**Sii hooyada baakado ORS ah oo kufilan 6da saacadood ee ugu horeeya iyo weliba labo baakadood oo ORS ah oo dheeraad ah**  *(cutubka  2V).*

**TU sheeg ardayda:**

Eeg xagga sare ee sanduuqa 3V ee daawaynta.

**Tallaabada koobaad :**

Ilmo qaba SHUBAN iyo FUUQ BAX DARANI waxa uu qabaa jirro daran. Ilmaha caynkan ahi waxa uu u baahanyahay in dhakhso loogu soo cesho biyihii iyo cusbadii uga luntay shubanka. Ilmahani haddii aanu dhakhso u helin dareere waa dhimanayaa. Waa in si dhakhso ah cusbitaal loogu diraa haddii ay suuro gal tahay.

**Talaabada labaad :** Shaxanka sida ORS loogu daaweeyo fuuqbaxa daran.

Sida aad arki karto, shaxankani waxa uu u shaqaeeyaa sida shaxanada kale ee ORSta, farqiga kaliya ee jiraa waa xaddiga ORSta ah ee lasiinayo ilmaha. In fuuqbaxu daranyahay awgeed, ilmuhu waxa uu u baahanyahay dareere ka badan ka xaaladaha xoogayga fuuqbaxa ahi jiro ama aanu jirin fuuq bax

## Layli 8 : ORSta Fuuqbaxa Daran

Adeegaha caafimaadku waxa uu arkay carruurtan soo socota ee shubanka qabta. Waala eegay waxaana loo soocay in ay qabaan FUUQBAX DARAN.

Ka jawaab su aalahan soo socda: muxuu yahay xaddiga ORS ee aad siin doonto ilmo ay hayso FUUQBAX DARANI, 6da saacadood ee u horaysa?
U sheeg ardaydu in ay tixraacaan SANDUUQ 5 -QORSHE V.

Ku celi layligan laba goor.

| DA'DA | XADIGA ORS AH EE AY TAHAY IN LA SIIYO 6 SAACADOOD GUDAHOOD |
|---|---|
| 6 bilood | 1000 |
| 2 sanno | 1300 |
| 15 bilood | 1300 |
| 3 sanno | 2000 |
| 8 bilood | 1000 |
| 5 sanno | 2000 |
| 10 bilood | 1000 |
| 11 bilood | 1000 |
| 9 bilood | 1000 |
| 4 sanno | 2000 |
| 4 bilood | 600 |
| 26 bilood | 2000 |
| 7 bilood | 1000 |
| 11 bilood s | 1000 |
| 3 bilood | 600 |

**Tallaabada sadexaad:**

waa in aad ilmaha dhakhso ugu dirtaa cusbitaal hadii uu ku gaari karo cusbitaaka laba saacadood gudahood ama hadii aanu ilmuhu waxba cabi karin.

**U sheeg ardayda:**
Ilmo leh soocidda caynkan ah waa in cusbitaal loo diraa haddii ay suura gal tahay. Bar hooyada sida loo siiyo ilmaha ORS inta ay safarka ku jirto, u diyaari oo sii milan ORS oo la qasay (tixraac SANDUUQ 2V).

**Tallabada afraad:**
**Hadii aanay suuro gal ahayn in cusbitaal loo diro labasaacadood gudahood ilmuhuna aanu wax ba cabayn, isku day in aad fuuq celin u samayso.**

**U sheeg ardayda :**

Bilaw in aad fuuq celin afka uga samayso ilmaha adiga oo siinaya ORS adiga oo adeegsanaya shaxanka ku yaala SANDUUQ 5V ee daawaynta si aad u go aamiso xadiga la siinayo ilmaha 6da saacadood ee u horeeya, si waafaqsan da'diisa.

6 saacadood ka dib, u sheeg hooyada in ay sii wado QORSHE A ilaa subaxda hore ee maalinta dambe. Intaa kadibna waa inay kugu soo noqotaa hadii aanad ugu tagi karin guriga si aad ilmaha u qiimayso xaaladdiisa.

**Talaabada shanaad:**
**Usheeg hooyada in ay si dhakhso ah ugu bilawdo siinta ilmaha ee ugu yaraan xadigan ORS ta ah lix saacadood gudahood.**

**U sheeg ardayda:**
Waxa aad haatan garanaysaa sida loo baro hooyada xaddiga ORS ah ee la siinayo ilmaha.

Carrabka ku adkee sida ay muhiimka u tahay in si dhakhso ah loogu bilaabo siinta ORS ilmaha sidaa loo soocay. Tixraac SANDUUQ 5V ee daawaynta, "shaxanka ORS ee daawaynta".

**Tallaabada lixaad:**
**tus hooyada sida loo siiyo milanka ORS.**

- **TUS OO BAR HOOYADA SIDA LOO QASO ORS EE LOO SIIYO ILMAHA;**
- **GURIGA KU DIYAARI LITRE KA KOOBAAD EE ORSTA AH ;**
- **U SHEEG HOOYADU IN AY BILAWDO SIINTA ORS ILMAHA ADIGA OO ARKAYA.**

**Jaantuska Tababaraha: sida loo diyaariyo ORS**

**Tababarha:** aad Chart 2V si aad u tasaalayso dibu eegisna ugu samayso darsiga.

*Ka codso hal arday in uu ku caawiyo.*

**Tallaabada todobaad : ilmaha ka wardoon 6 saacadood gudahood. Dib u qiimee ilmaha.**

Hadii ilmuhu:

- Wali qabo fuuq bax daran, ku daawee qorshaca C marlabaad ( SANDUUQ 5V daawaynta);
- Fuuqbax xoogay ah, ku dawee qorshaha B (t SANDUUQ 6Vcee daawaynta);
- Fuuq bax la aan, ku dawee qorshaha A ( SANDUUQ 7V daawaynta).
- Sii hooyada xadiga saxa ah ee bushqashado ORS ah si ay u dhamaystirto daawaynta.

**U sheeg ardayda:**
Marka aad la socoto ilmo sidan loo soocay:

-Dib u eeg ilmaha in uu fuuqbaxay (tixraac calaamadaha ku hubbon ee ku yaal tusayaasha taxan);
-Ka eeg in uu wax kale qabo;
-Dooro soocista iyo xaddiga ORS ah ee ay tahay inaad siiso, si waafaqsan heerka fuuqbaxa (tixraac shaxanka daawaynta ee ORSta ee ku yaal sanduuqa 5V);
-Dib u eeg heerka fuuq baxa ee ee ilmaha markasta oo ay kuu suuro galsho;

-U sii dareere si qunyar ah, hadii matag soo noqnoqonayaa jiro ama barar caloosha ahi jiro;
-Isku day in aad u dirto cusbitaalka ugu dhaw ama xarunta caafimaad si loo siiyo daryeel gaar ah, hadii heerkiisa fuuq buxu aanu kasoo raynaynayn.

**Tallaabada sideedaad : Usharax 4 ta xeer ee sida loogu daryeelo ilma shubmaya guriga (QORSHE A – SANDUUQ 7V):**

1. SII DAREERE DHEERAAD AH;
2. SII ZINC 10 MAALMOOD (SANDUUQ 8 V);
3. SII WAD QUUDINTA;
4. GOORTA LASOO NOQDO.

**INTA AANAD GURIGA KA BIXIN, HUBI IN HOOYADU GARANAYSO:**

- Sida loo diyaariyo milan ORS ah (SANDUUQ 2 V).
- ORS intee leeg ayay tahay in lasiiyo LIXDA SAACADOOD EE U HORAYSA, iyo sida loo siinayo dareere dheeraad ah intaa wixii ka dambeeya.

**Sii hooyada bushqado ORS ah oo ku filan lixda saacadood ee u horaysa fuuq celinta iyo laba bushqadood oo ORS ah si looo sii wado siinta dareere dheeraadka ah (SANDUUQ 2 V).**

| XUSUUSNAW |
|---|
| *Haddii ilmuhu aanu wax cabi karin, u dir cusbitaal amHa xarun caafimaad halka ugu dhaw sida ugu dhakhso badan ee suura gal ah* |
| *addii ilmahani aanu helin dareere waa dhimanayaa.* |

## Layli 9: Halima

Halima waxa ay ku nooshahay tuulo ku taal meel 8 saacadood looga lugeeyo xarunta caafimaad ee ugu dhaw.

Halima waa ilmo 15bilood jirta. Malaha calaamadihii guud ee halista, qufac malaha, waa shubmaysaa waxaana loo soocay in ay qabto FUUQ BAX DARAN waayo indhaheedu waa goteen maqaarkeeduna si aad u qunyar ah ayuu dibu ugu noqonayaa mrka la jiidho. Halimo malaha wax xumad ah.

Adeegahii caafimaadku waxa uu go aansaday in uu fuuq celin u sameeyo Halima

ORS intee leeg ayaa lasiinayaa ilmaha?
*Calaamadi dhammaan xogta iyo kalasaarista; ku qor foomka xaddiga ORS ta ah ee aad rabto inaad siiso Helena.*

### Jawaabta Layliga 9: sHalima

In ay jirto 15bilood awgeed, adeegihii caafimaadu waxa uu xisabiyay in ay u baahantahay 1300 ml oo milan ORS ah muddo lix saacadood ah.

## Layli 10: Hassan

Hassan, waa ilmo 2-jir ah, waxa uu qabaa shuban iyo fuuq bax daran.
Adeegaha caafimaadku waxa uu siin karay kabashooyin mlan ORS ah.

U sheeg ardaydu in ay bixiyaan jawaab afka ah.

Hassan ma cusbitaal baad dhakhso ugu diri mise waxaaad isku dayi in aad fuuq celin uga samayso afka?

ORS intee leeg ayay tahay in la siiyo?

Hassan waxa uu u matagayaa si joogto ah. Maxaa la samayn karaa?

### Jawaabta layliga 10: Hassan

Waa in cusbitaal loo diraa mar haddii ay tahay in uu cabo 1300 ml oo milan ORS ah 6da saacadood ee u horaysa.

Kula tali hooyada in cusbitaal loo diro, sii waraaqaha cusbitaalka iyo milan ORS oo ku filan oo ay siiso ilmaha inta ay ka gaarayso xarumaha caafimaad.

## Layli 11: Hawa

Hawa waa ilmo 9 bilood jira. Waxa uu yimi xarunta caafimaadka isaga oo QUFACAYA oo SHUBMAYA. Waxba ma cabi karayn waxaana laga helay OOF WAREEN DARAN. Indhihiisu waa godnaayeen maqaarkiisuna si aad u qunyar ah ayuu dib ugu noqonayayay. Sidoo kale waxa uu qabay SHUBAN AADNA WAA U FUUQ BAXSANAA. Wax kale ma qabin. Usheeg *ardaydu in ay jawaab afka ah kusiiyaan.*

Ilmaha cusbitaal ma udiraysaa?
Sidee Hawa loodaawaynayaa?
Maxay tahay talaabada xigta eed qaadaysaa?

### Jawaabta layliga 11: Hawa

Hawa waa in si dhakhso ah cusbitaal loogu diraa.

Hawa waa in lagu daaweeyaa kiniin amoxycillin ah iyo ORS si waafaqsan qorshaha C (ml.1000).

Kula tali hooyada cusbitaal in ilmaha la geeyo, sii waraaqaha cusbitaalka iyo milan ORS ah oo ku filan oo ay ilmaha siiso inta ay ka gaarayso xarumaha caafimaadka.

## "SANDUUQ 6 V" QORSHE B: KU SII ORS GURIGA DHEXDIISA ILMAHA QABA FUUQBAX XOOGAY AH

### ORS INTEE LEEG AYAA LA SIINAYAA LIXDA SAACADOOD EE U HORAYSA

| Kiniin | 2 bilood ilaa 4 bilood | 4 bilood ilaa 12 bilood | 12 bilood ilaa 2 sanno | 2 sanno ilaa 5 sanno |
|---|---|---|---|---|
| Xadiga ORS ah (millilitres) | 400 ml. | 600 ml. | 800ml. | 1250 ml. |

- **U SHEEG HOOYADU IN AY SIISO ILMAHA XADDIGA LOOGU TALA GALAY EE ORS AH LIXDA SAACADOOD EE U HORAYSA SI WAAFAQSAN ILMAHA DA'DIISA, SIDA KU MUUJISAN SHAXANKA** (haddii ilmuhu dareere badan rabo – biyo caadi ah, shaah – kasii inta uu ka qaadan karo).

- TUS HOOYADA SIDA LOO WALAAQO IYO SIDA LOO SIIYO MILANKA ORS:
  - Si joogto ah u sii kabashooyin yar yar adiga oo adeegsanaya koob ama malgacad;
  - Haddii ilmuhu matago, sug 10daqiiqadood. Intaa kadibna usiiwad hase ahaatee si qunyar ah;
  - Sii naaska markasta oo ilmuhu sidaas rabo.

- U SHEEG HOOYADU IN AY SIISO ILMAHA ORS AIDGA OO ARKAYA

- U SHEEG HOOYADA IN WIXII KA DAMBEEYA LIXDA SAACADOOD EE U HUREEYA AY TAHAY IN ILMUHU QAATO DAREERE DHEERAAD AH, OO MACNAHEEDU YAHAY:
  - Naaska u sii si joogto ah adiga oo ku dheerayna markasta nuujinta;
  - Siin inta ugu badan ee biyo la sifeeyey ah, ORS ama maraq inta uu ilmuhuka qaadi karo;
  - Markasta oo uu saxaro jilicsan dhigo:
    - 1 (hal ) koob oo ORS haddii ilmuhu ka yaryay 2 sanno;
    - 2 (laba) koob oo ORS ah haddii ilmuhu jiro 2 sanno iyo wixi ka wayn.

- U SHARAX 4TA XEER EE SIDA LOOGU DARYEELO ILMAHA SHUBMAYA GURIGA *(qorshe A – sanduuq 7V):*
  1. SII DAREERE DHEERAAD AH;
  2. SII ZINC DHEERAAD AH MUDDO 10CISHO AH *(sanduuq 8V)*;
  3. WAD QUUDINTA;
  4. GOORTA LA SOO NOQONAYO *(sanduuq 7V, qodobka 4).*

- KA HOR INTA AANAD GURIGA KA TEGIN, HUBI IN HOOYADU GARANAYSO:
  - Sida loo diyaariyo ORSta *(sanduuq 2V).*
  - Xadiga ORS ee lasiiyo ilmaha LIXDA saacadood ee Uhoraysa, iyo sida loo siinayo dareeraha dheeraadka ah intaa ka dib.

  **Sii hooyada ORS ku filan oo ay siiso lixda saacadood ee u horaysa ee fuuq celinta iyo laba bushqadoo oo ORSah si ay usii wado siinta dareeraha dheeraadka ah** *(sanduuq 2V).*

- GURIGA KU SOO EEG ILMAHA MARKA DABE EE ISLA MAALINTA LAGUU KEENAY EE KOOBAAD. DIB U HUBI ILMAHA:
  - Hadii ilmuhu kasii daray oo ay ka muuqdaa calaamadaha", u daawee si waafaqsan QORSHE C;
  - Hadii ilmaha ay ka muuqdaa calaamado " fuuqbax xoogay ah" sii isla daawaynta QORSHE B;
  - Haddi ilmuhu kasoo reeyey oo ay ka muuqdaan "shuban aan fuuqbax wadan".Sii laba ORS ah si loogu sii wado QORSHE A guriga.

**U sheeg ardayda:**
Qaybtani waxa ay sharxaysaa QORSHE B si loo daweeyo ilmaha FUUQBAXA XOOGAYGA AH LEH.

Hadda waxa aad eegi doontaa sanduuqa 6v ee daawaynta waxaanad baran doontaa in aad:

- Adeegsato shaxanka ORSta si aad u go aansato xadiga ORS ah ee la siiyo ilmah qaba XOOGAY FUUQ BAX AH;
- Raacdo dhammaan tallaabooyinka ku jira sanduuqa 6v ee daawaynta.

**<u>Talaabada koobaad</u> : ORS: XADIGA iyo Jadwalka**

**Usheeg ardayda:**
Eeg xagga sare ee SANDUUQ 4V: ORS INTEE LEEG AYAA LASIINAYAA LIXDA SAACADOOD EE U HORAYSA.

Eeg xagga sare ee SANDUUQ 4V: ORS INTEE LEEG AYAA LASIINAYAA LIXDA SAACADOOD EE U HORAYSA.

Adeegso shaxankan si aad u go aansato xadiga ORS ah ee lasiinayo. Tix gali ilmaha da'diisa si aad u hesho xadiga ku habboon ee ORS ah. Tusaale ahaan, ilmo 5-bilood jira waxa uu u baahanayaa 400 ml. oo milan ORS ah afarta saacadood ee u horaysa.

Xadiga lagu muujiyay shaxanka ORS ta waa in loo qaataa tilmaan ahaan. Da da ilmaha, heerka fuuq baxa iyo inta goor ee uu saxarooday intii fuuq celintu u socotay ayaa dhammaan saamayn ku leh xadiga ORS ta ah ee loo baahanyahay. Ilmuhu inta badan waxa uu cabbaa intaa uu u baahanyahay. Haddii ilmuhu rabo inbadan ama in ka yar intii la qiyaasayay, sii waxuu qaadan karo.

Siinta milanka ORStu waa in aanay carqalad ku noqon quudinta ilmaha naaska jaqa. Hooyadu waa in ay ka yara joojiso si uu ilmuhu naaska u jaqo markasta oo ilmuhu sidaa rabo ,intaa kadibna ay siisaa xoogay milan ORS ah haddana.

QORSHE B waxa ku jira waqtiga daawaynta bilawga ah oo afarsaacadood ah. Inta lagu jiro afarta saacadood ee u horaysa, hooyadu waxa ay siinaysaa xadigii ORSta ahaa ee uu u baahnaa si qunyar ah, iyada oo ku siinaysa malgacad, kabashooyin yar yar.

## <u>Layli 12</u> : ORSta lagu daweeyo fuuq baxa xoogayga ah

**Waydii ardayda:**

Muxuu yahay xadiga ORS ah ee ay tahay in aad siiso ilmo si waafaqsan da diisa?

| DA'DA | XADIGA ORSTA AH ( ML) |
|---|---|
| 2 bilood | 400 |
| 8 bilood | 600 |
| 13 bilood | 800 |
| 3 sanno | 1250 |
| 3 bilood | 400 |
| 9 bilood | 600 |
| 18 bilood | 800 |
| 4 bilood | 1250 |
| 6 bilood | 600 |
| 5 bilood | 600 |
| 14 bilood | 800 |
| 10 bilood | 600 |
| 13 bilood | 800 |
| 7 bilood | 600 |
| 15 bilood | 800 |
| 5bilood | 600 |

**Talaabada labaad: u sheeg hooyadu in ay siiso ilmaha xaddiga lagu taliayay (si waafaqsan da'da ilmaha sida ka muuqata shaxanka) ee ORS ta ah MUDDADA AFARTA SAACADOOD AH EE U HORAYSA;** (haddi imuhu dareere badan rabo – biyo caadi ah, shaah – ka sii inta u badan ee uu ka qaadan karo).

U sharax hooyada muhiimadda ay leedahay in ay siiso xadiga lagu taliyay ee ORS ah lixda saacadood ee u horaysa si looga taxadaro fuuq bax.

**Tababaraha:** talaababdan hore ayaa loo sameeyey,hase ahaatee waa muhiim in lagu celiyo si loo adkeeyo, loo caddeeyo ama dib loogu sharxo.
**Tallaabada sadexaad:** tus hooyada sida laysugu daro loona siiyo milanka

- U sheeg inta ORS laga siinayo afarta saacadoo ee xiga;
- Tus xadiga ORSta ah (halbeeg laga adeegsado aaggiinna);
- U sheeg in ay si joogto ah ugu siiyo kabashooyin yar yar oo ka ka siinayso koob ama mulgacad maalin iyo habeenba;
- Haddii ilmuhu matagayo, u sheeg in ay sugto 10daqiiqadood (ama in door ah haddii aanay saacad haysan), intaa kadbna ha usii wado si qunyar ah ;
- Usheeg in ay wado nuujinta naaska markasta oo ilmuhu rabo;
- U sheeg in ay ku bilawdo ilmaha ORSta adiga oo arkaya.

**<u>Tallaabada afraad</u> :**
**U sheeg hooyada in wixii ka dambeeya afarta saacadood ee u horaysa, ay tahay in ilmaha lagu sii wado qaadashada dareerayaasha.**

**Tababaraha:**
Taageero iyo sharaxaad ka raadso Tallaabada koobaad.

Halkaan hoose ayaad ka heli doontaa iyada oo si kooban laguu xusuusinayo mowduuca:
- Si joogto ah oo waliba aad wakhti dheer jaqsiinayso u nuuji ilmaha;
- Sii biyo nadiifa oo sifaysan ama ORS marka lagu daro naaska markasta oo uu ilmuhu qaadan karo;
- Markasta oo uu saxaro jilicsan dhigo sii:
- koob ORS ah, haddii ilmuhu ka yaryahay 2sanno;
- laba koob oo ORS, haddii ilmuhu yahay 2 sanno iyo wixi ka wayn.

Haddii ilmaha la nuujinayo, ku dhiiri gali hooyada in ay ka yara dayso naaska markasta oo ilmuhu sidaa rabo. Marka ilmuhu dhamaysto nuujinta, dib u bilaw siintii ORSta. Hooyadu waa in aanay siin ilmaha cunto lixda saacadood ee u horaysa ku dawaynta ORSta.

**<u>Tallaabada shanaad</u>: u sharax afarta xeer ee sida loogu daryeelo guriga ilmaha shubanka qaba.**

Tixraac afarta xeer ee ku jira " SANDUUQ 5 V ee daawaynta":

- Sida loo diyaariyo milanka ORS;
- Xadiga ORS ee lasiinayo afarta saacadood ee u horaysa, iyo sida loo siinayo dareeraha dheeraadka ah.

**Sii hooyada ORS ku filan in ay siiso lixda saacadood ee u horaysa fuuq celinta iyo laba bushqadood oo ORS dheerada ah sida ku qoran QORSHE A si lo sii wado siinta dareere dheeraad ah.**

**<u>Tallaabada todobaad</u>: ka wardoon ilmaha maalinta ku xigta maalintii hore ee aad so booqatay si aad dib ugu eegto xaaladdiisa.**

- Haddiii ilmuhu ka daray oo ay ka muuqdaan astaamaha FUUQBAX DARAN, u daawee hab waafaqsan QORSHE C;
- Haddii ilmha ay wali ka muuqato XOOGAY FUUQ BAX AHI, ku celi daawaynta QORSHE B;
- Haddii ilmuhu ka soo reeyey oo uu leeyahy shuban AANU LASOCON WAX FUUQ BAX AHI, sii laba bushqadood oo ORS ah si uu ugu sii dhaqan galiyo QORSHE A guriga dhexdiisa.

## Layli 13: Mataladaad, Qaybta 1 & 2

Daawee fuuqa baxa xoogayga ah hooyadana bar sidaa loo daryeelo ilmaha qaba fuuqbaxa

**U jeedada:** si loogu tababarto daawaynta iyo sida loogala hadlo hooyada daawaynta FUUQBAX XOOGAY AH guriga dhexdiisa.

**Akhri xaaladda:**

**Qaybta 1:** adeega caafimaadka ayaa wax auu go aansaday in ilmaha layiraa Aisha qabto SHUBAN IYO XOOGAY FUUQBAXA oo ay tahayna in lagu daaweeyo milan ORS ah si waafaqsan QORSHE B. Inta lagu jiray matalaada, adeegaha caafimaadku waxa uu raaci doonaa dhammaan tallaabooyinka lagu magacaabay QORSHE B.

**Qaybta 2:** adeegaha caafimaadku waxa uu samaynayaa booqasho la socosho ah si uu u qiimeeyo xaaladda Aisha ee fuuqbaxa. Waa ka soo raysay waxaanay haatan diyaar u tahay QORSHE A. Inta lagu gudo jiro matalaadda, adeegaha caafimaadku waxa uu raaci doonaa dhammaan tallaabooyinka QORSHE A.

**Diyaargaraw:**

Ururuuri kuwan soo socda:
- Sanduuqyada Daawaynta,
- Caruusad ama ilmo kale,
- Milan ORS ah, oo hore laysugu walaaqay (qaybta 1aad),
- Koob iyo malgacad.

Dooro laba ka qayb gale oo matala hooyadii iyo adeege caafimaad qaybta 1aad. Dooro laba ka qayb gale oo kale oo matala doorarka qaybta 2aad. Tani waxa ay siin doontaa ka qayb galayaal badan fursad ay ku bartaan. U sharax doorarkooda siina wakhti ay isku diyaariyaan.

Kuwa hooyooyinka matalaya waa in ay u dhaqmaan sidii hooyo walaacsan. U soo jeedi in ay codsadaan daawo lagu joojiy shubanka. Ama, in ay muuqdaan qaar damqanaya marka Aisho matagto wax ka mid ah milanka.

## Layli 13: Matalaad, Qaybta 1

Adeege caafimaad ayaa daawyn doona kalana hadli doona hooyada sida loo daaweeyo shubanka. Qaybtan, ilmuhu waxa uu u baahanyahay QORSHE B.

Xasuusi kooxda in matalaada aanay ku jiri doonin qiimaynta iyo soocidda Aisha iyada oo taas hore loo sameeyey. Daawadayaashu waa in ay tixraacaan qorshaha daawaynta shubanka ee ku habboon oo ay qoraanna sida adeegaha caafimaadku wax u daawaynayo ulana hadlayo hooyada.

## Layli 13: Matalaad, Qaybta 2

Adeegaha caafimaadku waxa uu barayaa hooyada sida loo daryeelo ilmo fuuqbaxay. Qaybtan, ilmuhu waxa uu diyaar u yahay QORSHE A.

**XAALADDA -- Sheeko tixraac ah**

Hooyo da' yar ayaa keentay Aisha oo 2jir ah xarunta caafimaadka si looga daaweeyo shuban ay qabtay laba cisho.

Adeegihii caafimaadku kuma arag wax ka mid ah CALAAMADIHII GUUD EE HALISTA. Aisha waa diiqadoonaysay. Indhaheedu waxa ay u muuqdeen qaar gotay. Marka maqaarkeeda la jiido si dhakhso ah ayuu dibu ugu noqonayay. Si hammuun leh ayay wax u cabaysay. Ma qabin wax dhib ah oo kale.

Adeegihii caafimaadku waxa uu u soocay Aisha in leedahay XOOGAY FUUQ BAX AH. Ma qabto wax dhib ah oo kale. Adeegihii caafimaadku wax auu doortay QORSHE B: "Ku daawee fuuqbaxa xoogayga ah guriga adiga oo adeegsanaya ORS".

**Tababaraha:** is bar hooyada iyo adeegaha caafimaadka.

# Qaybta 1

**Adeegaha caafimaadka:**
Marka hore u sheeg hooyada in Aisha u baahantahay in lagu daaweeyo ORS;
U sheeg hooyadu in ay joogto oo siiso Aisha milanka ORSta ah;

- Intaa ka dib raac QORSHE B si aad uga caawiso hooyadu in ay siiso milanka ORSta ah, adiga oo tusaya xadiga ORS ah ee ay tahay in la siiyo iyo sida loo siinayo;
- Ka jawaab su aalaha kana caawi xalinta dhibaatooyinka.

**Hooyada:**

- Dhagayso adeegaha caafimaadka;
- Isku day in aad samayso waxa uu kuu sheegayo;
- Waydii waxa aan kuu kala cadayn;
- Intii aad siisay milan ORS ah daqiiqado ka dib u sheeg adeegaha caafimaadk in Aisha hadda ay hunqaacday.

**Daawadayaasha:**

- Eeg QORSHE B lana soco matalaada;
- U fiirso waxa uu sida fiican u sameeyey adeegaha caafimaadku iyo waxa lasii wanaajin karo.

Marka qaybta koobaad dhamaanto ee hooyaduna si saxa u siiso ilmaha milan ORS ah, u mahadnaq matalayaasha. Intaa kadibna jooji matalaada oo hogaami falanqaynta.

U sheeg kuwii daawanayay in ay ka faaloodaan waxyaalahan soosocda:

- Muxuu adeegaha caafimaadku si wanaagsan u qabtay?
- Adeegaha caafimaadku ma hilmaamay wax muhiim ah?

Hubi in aad ka faalooto su aalahan soo socda:

- Adeegaha caafimaadku ma u sheegay hooyada xadiga ORS ah ee ay siinayso ilmaha afarta saacadood ee soosocda?
- Ma usheegay in ay usiiso ORSta si qunyar ah?
- Ma tusay sida ay ugu siinayso dareere mulgacadda?
- Sidee sadexda tallaabo ee waxbarista (xog, tusaale, iyo layli) loo tusmeeyey?
- Sidee ayuu adeegaha caafimaadku u hubiyay fahamka hooyada.

# Qaybta 2

Falanqayta ka dib, u sheeg ardayda in afar saacadood tageen. Hooyada waa la baray sida loo walaaqo ORS iyo xadiga laga siinayo ilmaha lix saacadood kadib.

Qaybtan, adeegaha caafimaadku waxa uu barayaa hooyada QORSHE A, hase ahaatee ma barayo sida loo walaaqo ORS. xasuusi daawadayaasha in ay tixraacaan QORSHE A, iyo in ay u fiirsadaan xirfadda hadal/xiriir ee adeegaha caafimaadka. Intaa ka dib u akhri "Xaaladda maalinta ka dambaysa".

**XAALADDA MAALINTA XIGTA:**

Maalinta ka dambaysa, adeegaha caafimaadku waxa uu qiimaynayaa Aisha. Ma qabto wax fuuq baxa. Shubankeedii waa sii socday. Hooyadeed waxa ay bilawday in ay siiso ORS si waafaqsan QORSHE A.

Soo gali labada matale ee ka kale, Aisha hooyadeed iyo adeegaha caafimaadka. Us heeg in ay bilaabaan qaybta2aad ee matalaada.

**Adeegaha caafimaadka**

- Waydi hooyada xadiga ORS ama dareere ee lasiinayo Aisha muddada afarta saacadood ah ka dib.
- Sii laba bushqadood oo ORS ah oo ay guriga u qaadato;
- Waydii su aalo hubin ah si aad u hubiso in ay xasuusantahay oo ay fahamsantahay afarta xeer ee ku daawaynta guriga.

Marka qaybta 2aad dhammaato, u mahadnaq matalayaasha. Hoggaami falanqaynta. Waydii daawadayaashu in ay ka faaloodaan kuwan soo socda:

- Muxuu si wacan u sameeyey adeegaha caafimaadku?

- Adeegaha caafimaadku ma hilmaamay wax muhiim ah?

<u>Hubi in aad ka faalooto su aalahan soo socda:</u>

- Ma u sheegay adeegaha caafimaadku hooyada xadiga dareere ah ee la siinayo iyo goorta la siinayo?

- Ma u sheegay in ay sii waddo siinta dareeyaasha caadiga ah?

- Ma u sheegay in ay siiso dareere dheeraad ah ilaa inta shubanku ka istaagayo?

- Ma kala hadlay sii wadista quudinta?

- Makala hadlay goorta degdega loo soo noqdo?

- Sidee ayaa sadexda tallaabo ee waxbarist ee aasaasiga ah ( xog, tusaalayn, iyo layli) loo sameeyey?

- Sidee ayuu adeegaha caafimaadku u hubiyay in hooyadu fahamtay?

## "SANDUUQ 7 V" QORSHE A: KU DAAWEE SHUBANKA GURIGA

### U SHARAX 4TA XEER EE CARRUURTA CARRUURTA SHUBANKA LOOGA DAWEYNAYO GURIGA DHEXDIISA

1. SII CABITAAN DHEERI AH
2. SII ZINK DHEERI AH 10 maalmood *(sanduuqa 8 V)*;
3. CUNTADA U SII WAD
4. WAQTIGA LA SOO CELINAYO

**1. SII CABITAAN DHEERI AH**

**U sheeg hooyada WAXA "sii cabitaan dheeri ah" uu macaneheedu yahay:**

- Naaska nuuji marar badan iyo waqti dheer halkii marba.
- Sii biyo badan oo la miirey ama ORS, marka lagu daro caanaha naaska, intii uu ilmuhu rabo.
- Ka dib mar kasta oo uu dhigo shuban, sii ilmaha:
  - 1 (hal) galaas macdan ORS ah haddii ilmuhu uu ka yar yahay 2 sano jir;
  - 2 (laba) galaas macdan ORS ah haddii ilmuhu uu yahay 2 sano jir ama ka weyn.

**U sheeg hooyada SIDA "ilmaha cabitaan dheeri ah loo siiyo"**

- Kabashooyin badan ku sii koob ama qaaddo.
- Haddii uu ilmuhu matago u kaadi 10 daqiiq0. Ka dibna u sii wad, laakiin tartiib u sii.
- <u>U sii wad cabitaanka dheeriga ah inta uu shubanku ka joogsanayo</u>

**BAR OO TUS HOOYADA SIDA LOO QASO IYO SIDA LOO SIIYO ORS, LITIRKA UGU HORREEYA EE ORS UGU DIYAARI GURIGA, OO U SHEEG HOOYADA IN AY ILMAHA U BILOWDO SIINTA ORS ADIGA OO LA JOOGA OO KA HUBINAY** *(Sanduuqa 2 V).*

**SII HOOYADA LABO XABBO OO ORS AH KA HOR INT AANEY KA TEGIN WAAXDA DARYEELKA CAAFIMAADKA AASAASIGA AH.**

**2. SII ZINK DHEERI AH**

**U sheeg hooyada xaddiga zink ee la siinayo:**

- Tus hooyada sida ilmaha loo siinayo kiniiniyada zink
  - Haddii uusan ilmuhu awoodin in uu wax calaliyo/ruugo: kiniiniyada ugu qas caano yar oo naaska laga soo lisey, ORS ama biyo nadiif ahoo koob yar ama qaaddo ku jira;
  - Haddii uu ilmuhu wax calalin/ruugi karo. Kiniiniyada ama waa la ruugi karaa ama waxaa lagu qasi karaa biyo yar oo nadiif ah oo koob ama qaaddo ku jira.
  - Xusuusi hooyada in ay 10 maalmood oo kaamil ah siiso zink dheeri ah.

**3. CUNTADA U SII WAD**

**U sheeg hooyada in ay u sii waddo quudinta:**

- Haddii uu ilmuhu naaska nuugayo siii marar badan iyo waqtiyo dheer;
- Haddii ilmuhu uu naaska nuugayo uuna qaaadanayo cunto kale, u sii wad caanaha naaska oo ilmaha sii cunto wixii uu qaadan karo.

**4. WAQTGIA LA SOO CELINAYO**

**Hooyadu waa in ay ilmaha u keentaa shaqaalaha caafimaadka haddii ilmaha ay ka muuqdaan waxyaabahan soo socda:**

- Marar badan shubmo
- Aad u oomo
- Indhihiisu ay god galaan;

(3da calaamadood ee kore waxaa ay tilmaamayaan in uu ilmuhu fuuq-baxay)

- Uu u eg yahay in uusan soo wanaagsanaaneyn 3 maalmood ka dib;
- Ay qandho/xumad hayso;
- Uusan si caadi ah wax u cunin u cabbin.

**"SANDUUQ 7 V" QORSHE A: KU DAAWEE SHUBANKA GURIGA ADIGA OO ADEEGSANAYA ORS**

Qaybtani waxa ay tilmaamaysaa sida loo daaweeyo SHUBANKA AANU LASOCON FUUQBUXU iyo sida looga hortagi karo in ilmahu fuuq baxo. Intaa waxa dheer, waxa aad ka heli kartaa dhammaan xogta aad u baahantahay si aad wax u barto una siiso talo hooyada sida loogu daawayn karo shubanka guriga dhexdiisa.

Waa in aad barto hooyada afarta xeer ee xiriirka la leh sida guriga daawo loogu bixiyo:

**1. SII DAREERE DHEERAAD AH**

**"sii dareere dheeraad ah"** macnaheedu waa sida soo socota:

- In loo soo celiyo dareerihii uga lumay shubanka, si looga hortago fuuqbax (dareeraha oo ka dhamaada);
- In la siiyo dareere ka badan intii caadiga ahayd sida ugu dhakhso badan marka shubanku bilaabmo, si looga hortago fuuqbax;
- In markasta naaska la nuujiyo iyo waliba in naaska afka loogu hayo inka badan intii hore;
- In la siiyo biyo sifaysan ama ORS marka lagu daro naaska inta uu ka qaadan karo ilmuhu;
- In lasiiyo ilmaha, saxaro kasta gadaasheeda:
  - 1 (hal) koob oo ORS haddii ilmuhu ka yaryahay 2sanno;
  - 2 (laba) koob oo ORS haddii ilmuhu yahay 2sanno iyo wixii ka wayn.

**U sheeg hooyadu in ay:**

- **Si joogto ah ugu siiso kabshooyin yaryar iyada oo adeegsanaysa koob ama malgacad;**
- **Haddii ilmuhu matagayo, yara sug in muddo ah. Intaa kadib sii wad, laakin si ka qunyar san;**
- Sii wad inaad siiyo dareere dheeraad ah ilaa inta shubanku ka istaagayo.

**Sii hooyada laba bushqadood oo ORS ah oo dheeraad ah inta aanad guriga ka bixin.**

Bar oo tus hooyada sida laysugu daro ee loo siiyo ORSta, ku diyaari guriga dhexdiisa litirka koobaad ee ORS ta ah, una sheeg hooyadu in ay bilawdo in ay siiso ilmaha ORS inta aad l ajoogto adiga oo arkaya (SANDUUQ 2V).

**2. SII ZINC DHEERAAD AH**

- **Usheeg hooyada xaddiga Zinc ta ah ee lasiinayo ilmaha**
- **Tus hooyada sida loo siiyo kiniinka zinc ta ah:**
  Usheeg hooyada xadiga Zinc ta laga siinayo
  Tus hooyada sida loo sinayo kiniinka zinc ta ah:
  -Haddii ilmuhu ka yaryahay 12bilood: ugu mil kiniin xaddi yar oo caanaha hooyada ah, ORS ama biyo nadiifa, koobyar ama malgacad;
  -Haddii ilmuhu ka waynyahay 12bilood uu awoodana in uu calaliyo: kiniinka waa la calaashan karaa ama lagu mili karaa xadi yar oo biyo ah koob ama malgacad iyda oo la adeegsanayo

- **Xasuusi hooyada in ay siiso zinc ta dhammaan 10 ka cisho.**

**3. SII WAD QUUDINTA**

**Tababaraha:**
Hore ayaad usoo dhigtay cutubkan, hase ahaaetee xasuusi ardayga.
Waydii in laba ama sadex arday ay fasalka u xogwaramaan, iyaga oo iska daba hadlaya (midiba ka kale gadaashii).

**U sharax hooyada:**

- "sii wad quudinta" waxa looga jeeda in aanad joojin quudinta ilmaha jiran;
- Ilmaha jirani waa taag daranayay waxaanu u baahanyahay in uu si joogto ah wax u cuno in intii caadiga ahayd ka badan;
- Naaska marar badan nuuji iyo waliba marar ka dhaadheer intii hore afka loogu hayn jiray, maalin iyo habeen;
- Haddii ilmuhu cunto kale qaadanayo, u wad nuujinta uguna dar cunto tamari ka buuxdo sida faralay leh saliid lagu daray, kaluun, hilib, ukun iyo khudaar haddii la heli karo.

**4. GOORTA LA SOO NOQONAYO**

Hooyadu waa in ay ku soo celiso ilmaha xarunta caafimaadka haddii ilmuhu yeeshu ku wan soo socda:

-Saxaro badan;
-Aad u haraadanyahay;
-Indhuhu gotaan;
(calaamadaha 3da ah ee kore waxa ay sheegayaan in ilmuhu fuuqbaxay).
-Haddii uu u muuqdo in uu ka soo raynayo 3 cisho ka dib;
-Xummad yeeshay;
-Aanu si caadi ah wax u cunayn ama u cabayn.

## Layli 14: Hassan

Waydii ardaydu in ay helaan tilmaamaha saxa ah ee ku jira SANDUUQ 7V ee DAAWAYNTA: QORSHE A.

Hassan waa ilmo 4-jir ah oo leh shuban. Ma qabo wax ah calaamadihii guud ee halista. Waxa loo soocay in uu hayo SHUBAN hase ahaatee aanu FUUQBIXIN. Waxa loo daawayn doonaa hab waafaqsan SANDUUQ 7 V ee Daawaynta: QORSHE A.

*U sheeg ardaydu in ay ku siiyaan jawaabo afka ah*

1. Maxay yihiin afarta xeer ee ku daawaynta shubanka ee gurigu?

2. Dareerayaashee ayay tahay in ay hooyadu siiso ilmaha ?

### Jawaabta layliga 14: Hassan

1.
- Sii dareere dheeraad ah;
- Sii zince kiniin ah;
- U wad quudinta;
- Goorta la soonoqonayo;

2. ORS milan ah ama biyo la sifeeyey iyo cunto dareere ah (sida maraq ama sharaab).

## Layli 15: Xuseen

Xuseen waa ilmo 3-bilood jira oo qaba shuban. Ma laha wax ah calaamadihihii guud ee haslita ahaa ah. Waxa loo soocay in aanu QABIN FUUQBAX. Naaska oo kaliya ayuu jaqaa

*Usheegu ardaydu in ay kusiiyaan jawaabo afka ah .*

Maxay tahay in adeegaha caafimadku u sheego hooyada oo ku saabsan siinta ilmaha ee dareerayaal dheeraad ah?

### Jawaabta layliga 15: Xuseen

Adeegaha caafimaadku waa in uu u sheego Xuseenl hooyadii in ay:

- In ay in badan siiso naaska;
- Ay siiso ORS ama biyo nadiifa marka lagu daro caanaha naaska markasta oo ilmuhu u baahdo;
- Sii hal koob oo ORS gadaasha markasta oo uu saxaroodo.

## Layli 16: Dareere dheeraad ah

Adeegaha caafimaadku waxa uu arkay carruurtan soo socota oo qabta shuban. Qiimayn kadibna waxa la ogaaday in ay leeyihiin calaamadihii guud ee halista. Waxa loo soocay in aanay QABIN FUUQBAX.

**Waydii ardayda:** muxuu yahay xadiga dheeraadka ah ee dareeraha ah ee ay tahay in hooyadu siiso ilmaha gadhaasha markasta oo uu saxaroodo?

**Ku celi layligan laba goor.**

| DA'DA | KOOB DHEERAAD AH OO DAREERE AH EE LA SIINAYO SAXARO KASTA OO JILICSAN KA DIB |
|---|---|
| 6 bilood | 1 |
| 2 sanno | 2 |
| 15 bilood | 1 |
| 3 sanno | 2 |
| 8 bilood | 1 |
| 5 sanno | 2 |
| 10 bilood | 1 |
| 1 sanno | 1 |
| 9 bilood | 1 |
| 4 sanno | 2 |
| 4 bilood | 1 |
| 3 sanno | 2 |
| 7 bilood | 1 |
| 11 bilood | 1 |
| 4 sanno | 2 |

## Layli 17: Matalaad

Matalaad waa ilmo 2jir ah. Adeegaha caafimaadku waxa uu u soocay in ay qabto SHUBAN aanayse QABIN FUUQBAX waxaanu go aansaday in uu siiyo ORS.

Maxay tahay talaabada xigta ee ay tahay inuu qaado adeegaha caafimaadku?

**Tababarah a:**
Usheeg ardayda cidda matali doonta doorka hooyadu in ay u matasho sidii hooyo caadi ah oo ka walaacsan ilmaheeda. U soo jeedi in hooyadu ku wareersan tahay ORS, sida loo sameeyo ee loo siiyo ilmaha.

U sheeg hooyada in Fartun u baahantahay in ay cabto dareere dheeraad ah;

**Bar sida guriga loogu daaweeyo shubanka:**

SII DAREERE DHEERAAD AH ( u sheeg sdia loo sameeyo ORSta iyo sida loo siiyo dareeraha dheeraadka ah),
SII ZINC KINIIN AH
SII WAD QUUDINTA
GOORTA LAOSO NOQONAYO

- Sii dhammaan xogta muhiimka ah oo dhan;
- Tus sida loo siiyo daawooyinka;
- La soco marka ay siinayso daawada u horaysa;
- Hubi fahamkeeda. Waa in ay u dhagaysataa si taxadar leh tilmaamaha adeegaha caafimaadkus siinayo. Waydii su aalo hadii aanay fahmin tilmaamaha.

**U sheeg daawada yaasha:**
Daawo matalaada. Ha dhexgalin. Marka kal fadhigu dhamaado, waxa aan idin waydiin doonaa in aad ka jawaabtaan su aalo.

Tababaraha: akhri su aalahan soosocda hana uga jawaabaan ardaydu, mid mid.

a. adeegaha caafimaadku ma siiyay hooyada xogtii ay u baahnayd ee ku saabsanayd sababta ORStu muhiimka u tahay, inta la siinayo, goorta iyo sida loo siinayo?
b. adeegaha caafimaadku ma tusay hooyada tusaalayaal ku saabsan sida loo qiyaaso ORS?
c. adeegaha caafimaadku mala socday hooyada oo:
   -samaynaysa ORS?
   - siinaysa ORS?
d. adeegaha caafimaadku ma u sheegay hooyada goorta ay soo noqonayso?
e. adeegaha caafimaadku ma usheegay hooyada goorta degdega loo soonoqdo?
f. adeegaha caafimaadku ma hubiyay fahamka hooyada?
g. maxay tahay sababta uu su aalaha u waydiiyay adeegaha caafimaadku hooyada?

## "SANDUUQ 8 V" KU DAAWEE ZINC kiniin oo 20 mg ah. ILMO KASTA OO SHUBAN QABA

**Haddii ilmuhu shuban qabo iyo fuuqbax daran:**

- bilow in aad ilmaha fuuq celin ugu samayso ORS  adiga oo adeegsanaya  *sanduuq 5V*;
- sug muddo  6 saacadood ah ka hor inta aanad siin kiniin zinc ah ilmo qaba fuuqbax daran .

**Haddii ilmuhu shubmayo fuuqbax xooga ahna leeyahay ama uu shubmayo aanuse lahayn fuuqbax:**

- **bilow in aad ilmaha fuuq celin ugu samayso ORS;**
- **bilaw in aad u siiso kiniin zinc ah si dhakhso ah.**

| A<br>Kiniin | B<br>Waqtiyada iyo Mudda-da | C<br>Da'da | |
|---|---|---|---|
| Zinc<br>Kiniin of 20 mg. | Sii 1 mar<br>maalinkasta<br>muddo 10 cisho ah | 2 bilood ilaa<br>6 bilood | 6 bilood ilaa<br>5 sanno |
| | | ½ | 1 |

BAR HOOYADA SIDA LOOGU SIIYO ILMAHA KINIINKA GURIGA *(sanduuq 1V).*

### TALO KASII HOOYADA DARYEELKA GURIGA:

- **Sii dareere dheeraad ah:** increase breast-feeding. Give more drinks.

- **Sii  zinc**

  U sheeg hooyada xadiga zinc ta ah ee ay tahay in lasiiyo ilmaha.
  Tus hooyada sida loo siiyo kiniinka zincta ah:
  - Haddii ilmuhu  aanu awoodin in uu calaaliyo: ugu mil ilmaha kiniin xadi yar oo caanaha hooyada ah, ORS ama biyo nadiifa, koob yar ama malgacagad;
  - Haddii ilmuhu calaashan karo: kiniinka waa la calaashan karaa ama waxa lagu mili karaa xadi yar oo biyo nadiifa ah malgacad ama koob.

  **Xasuusi hooyada in ay siiso kiniinka zinc ta ah muddada 10 cisho ah oo dhan.**

- **Haka joojin quudinta:**  haka joojin quudinta ilmaha buka. Ku dhiiri gali ilmah a in uu wax cuno.

- **Goorta lasoo noqonayo:** hooyadu waa in ay keento ilmaha xarunta caafimaadka haddii ilmaha lagu arko wax ka mid ah kuwan soosocda:
  - Mararbadan ayuu saxaroonayaa;
  - Aad ayuu u haraadanyahay;
  - Indhihiisu waa godanyihiin;

  **(calaamadaha 3 da ah ee kore waxa ay tilmaamayaan in ilmuhu fuuqbaxay)**
  - Waxa uu u muuqdaa in aanu kasoo raynaynayn 3 cisho ka dib;
  - Xumad ayuu leeyahay;
  - si caadi ah wax uma cunayo.

**"SANDUUQ 8 V"  KU DAAWEE KINIIN ZINC  20 mg. ILMO KASTA OO QABA SHUBAN**

**Tusaalaha Tababaraha:** Sida loo adeegsado SANDUUQ 8V

Tilmaan xagga sare ee SANDUUQ 8V una sheega ardayda in ay raacaan tilmaamaha hoos ku qoran.
U sharax in:

**Hadii ilmuhu shuban iyo fuuqbax daran leeyahay:**

- in lagu bilaabo in fuuq celin loogu sameeyo iyada oo la siinayo ORS lana adeegsanayo SANDUUQ 5V
- sug  6 saacadood ka hor  inta aanad siin kiniinka zinc ilmaha yar oo leh Fuuqbax Daran

**haddii ilmhu qabo Shuban iyo Xoogay Fuuqbax ah  ama Shubmayo aanuse Qabin Fuuqbax:**

- fuuq celin ugu samee ilmaha ORS
- bilaw in aad siiyo zinc si dhakhso ah

Tilmaan xadiga iyo jadwalka una sharax:
Kiniin zinc ah oo  20 mg ah.  Midkasta  iyo in ay tahayin la siiyo hal mar maalintii muddo 10 maalmood ah.

**Tababaraha**
Si loo tuso tallaabooyinka kale, tixraac  SANDUUQ 1: Bar hooyadu in ay ku siiso kiniin guriga iyo SANDUUQ 7V.

**Waydii ardayda:**
Xaddi intee leeg ayaa ku siin doontaa jadwal caynkee ah carruurta da'aha soo socda ah?

## Layli 18: kiniin zinc ah

| DA'DA | XADIGA IYO JADWALKA |
|---|---|
| 2 bilood | ½ tb. maalinkasta x 10 maalmoods |
| 8 bilood | 1 tb. maalinkasta x 10 maalmood |
| 12 bilood | 1 tb. maalinkasta x 10 maalmood |
| 3 sanno | 1 tb. maalinkasta x 10 maalmood |
| 3 bilood | ½ tb. maalinkasta x 10 maalmood |
| 9 bilood | 1 tb. maalinkasta x 10 maalmood |
| 18 bilood | 1 tb. maalinkasta x 10 maalmood |
| 4 sanno | 1 tb. maalinkasta x 10 maalmood |
| 6 bilood | ½ tb. maalinkasta x 10 maalmood |
| 5 bilood | 1 tb. maalinkasta x 10 maalmood |
| 14 bilood s | 1 tb. maalinkasta x 10 maalmood |
| 10 bilood | 1 tb. maalinkasta x 10 maalmood |
| 13 bilood | 1 tb. maalinkasta x 10 maalmood |
| 7 bilood | 1 tb. maalinkasta x 10 maalmood |
| 15 bilood | 1 tb. maalinkasta x 10 maalmood |
| 4 bilood | 1 tb. maalinkasta x 10 maalmood |

## "SANDUUQ 9/V" KAAS OO LA HELI KARO MARKA CUNUGA LOO SOO GUDBIYO

XARUNTA CAAFIMAADKA SII KANIINIGA **(RECTAL ARTESUNATE)** KALIYA CUNUGA QABA: XANUUN AAD U DARAN / QANDHO" KAASOO AAN WAXBO LIQI KAREYNIN AMA AAN AWOODIN IN UU NUUGO CAANAHA NAASKA AMA WAX KASTA UU SOO HUNQAACAYO.

| A<br>RECTAL ARTESUNATE Subostada 50 mg. | B<br>Da'da | C<br>Hal xabad maa-lintiiba | MARKII AAD SIISO KANIINIGA (RECTAL ARTESUNATE)<br>Hadii cadadka koowaad ee kaniinka "rectal capsule" shaqeyn waayo saacada ugu horeysa, durbadiiba midkale sii. |
|---|---|---|---|
| | **2 bilood laa 1Sano jir** | 1 | |
| | **1 Sano ilaa 3 Sano jir** | 2 | |
| | **3 Sano ilaa 5 Sano jir** | 3 | |

**SOO GUDBI CUNUGA : sii cadadka ugu horeeya ee kaniiniga (rectal artesunat);**

- KULA TALI HOOYADA SOO GUDBINTA, u sheeg in ey :-
- SII WARQADA SOO GUDBINTA
- Kulai hooyada in soo laabta marka ay isbitalka ka soo laabta ama rugta caafimaadka.
- La soco ilmaha marka la soo celiyo hal mar ilaa ilmaha ka caafimaadayo.

**HADII AYSAN SUURTO GAL AHEEN IN LA SOO GUDBIYO,**

- **Hadii ilmaha uusan wax cabeyn am naaska nuugeen** ama matagayo, uuna leeyahay qalal, uuna leeyahay hurdadiisa oo qaldanata ama dheeraata: sii cadadka ugu horeeya (Rectal artesunate/ fiiri sanduuqa 9/V la soco xaalada cunugana aad uga warqab. Dib u qiimee xaalada cunuga mudo 6 saacadood gudeheeda lana soco xaaladiisa.
- **Hadii 24** saacadood : **Hadii ilmaha uusan wax cabeyn am naaska nuugeen** ama matagayo , uuna leeyahay qalal , uuna leeyahay hurdadiisa oo qaldanata ama dheeraata : ku wad Rectal Artesunate SP ku sii wad ilaa uu ka reysanayo.
- **Hadii 24** saacadood ka **Hadii ilamha uusan lahyn calmada guud ee qatarta ah Sii** daawada Artesunate sp/ tablets *(Sanduuqa 10/V)* ilaa iyo seddex cisho, waxaa kaloo sii saa Amoxivillin tab *(Sanduuqa 3V)*.

**KULA TALI HOOYADU IN AY AY GURIGA KU DARYEESHO:**

**Sii cabitaan dheeraad ah** kordhi nuujinta naaska. Sii cabitaan badan.
**Joogtee in aad quudiso** ha ka joojin in aad quudiso cunuga xanuunsan. Ku dhiiri gali in uu wax cuno.
**Goorta durbadiiba la soo celinaayo :** Hooyada waa in ay u soo celiaa ACTs hadii cunugu:

- aanu awoodin in uu naaska nuugo AMA,
- uu wax yar naaska nuugayo ama cabitaan aad u yar uu qaadan karo AMA,
- uu sii darsanaayo AMA,
- qandho ay qabaneyso ama qandhadu kusii kordheyso.

## “SANDUUQ 9 V” KU DAAWEE ILMAHA RECTAL ARTESUNATE

XARUNTA CAAFIMAADKA SII KANIINIGA ( RECTAL ARTESUNATE) KALIYA CUNUGA QABA: XANUUN AAD U DARAN / QANDHO” KAASOO AAN WAXBO LIQI KAREYNIN AMA AAN AWOODIN IN UU NUUGO CAANAHA NAASKA AMA WAX KASTA UU SOO HUNQAACAYO.

**Macalinta:**
**Tilmaan xagga sare ee SANDUUQ una sheeg ardayda:**

**Tallaabada koobaad:**
“kaabsoolka rectal artesunate” hala siiyo carruurta aan awoodin in ay wax liqaan ama cabaan ama naaska jaqaan iyo /ama kuwa matagaya wax kasta iyo kuw qaba qalalka, hurdadooduna xumaato, ama jrto jirro daran oo xumadeed.
“rectal artesunate” waa in la siiyaa maalin kasta xaddi waafaqsan ilmaha da’diisa.
marka aad siinayso kaabsoolka rectal artesunate, waa in aad raacdo tilmaamahan:
haddii marka ugu horaysa ee la siiyo ilmaha rectal capsule uu dibadda us oo saaro saacadda u horaysa dhexdeeda, gali mid kale si dhakhso ah.

**Tallaabada labaad:**
**ILMAHA CUSBITAAL U DIR:** sii marka u horaysa ee rectal artesunate da ah;
**U SHEEG HOOYADA IN AAD CUSBITAAL U DIRAYSO, usheeg:**
**SII DAREERE DHEERAAD AH:** u kordhi naas nuujinta. Sii cabitaan badan.

**WAD QUUDINTA:**ha joojin in aad quudiso ilmaha jiran.
**SII HOOYADA WARAAQAHA AAD CUSBITALKA UGU DIRAYSO**
Lasoco ilmaha marka lasooceliyo ugu yaraan hal mar todobaadkii inta ilmuhu ka bogsoonayo

**Tallaabada sadexaad**

**HADDII AANAY SUURO GAL AHAYN IN AAD CUSBITAAL U DIRTO**
- Haddii ilamaha uusan wax cabeyn, matagayo, leeyahay qalal ama hurdadiisu xuntahay sii cadada hore ee Rectal Artesunate supp lana soco xaaladiisa 6 saac ee soo socota.
- Haddii weli ilmahu leeyahay uusan wax cabeyn, matagyo weli leeyahay qalal, hurdadiisuna xuntahay sii cadada labaad ee Rectal Artesunate.lana soco xaaladiisa.

- Hadii 24 labaatan saac ka dib uu awoodo inuu wax cunno ama naaska jaqi karo lahyna qalal , hurdadiisuna ay soo fiicnaato u dhameystir daaweyntiisa Rectal Artesunate , eeg sanduuqa 9 V.
- Si wad daweynta iyo la socoshada cunuga, kuna tali hooyada si ay guriga ugu xanaaneyso.

**Usheg tababaraha:**

U sharax in cunuga loo siiyo kaniiniga artesunate + SP sida soo socota:
Malinta kowad: artesunate + SP kaniini
Malinta iyo seddax labaad: keliya kaniini Artesunate (Sanduqa 10V).

**Tallabada afraad:**
**HOYADA U SHEEG**

- **Sii dareere dheeraad ah:** u kordo naas nuujinta. Sii cabitaan badan.
- **Sii wad quudinta:** do not stop feeding a sick child. Encourage the child to eat.
- **Hooyada waa in ay raadisaa ACTs:**
  Haddii illmuha ku aragto:
  - aanu awoodin in uu wax cabo ama naaska jaqo AMA,
  - cabiddiisa iyo naas nuugiddiisu aanay wanaagsanayn AMA,
  - xaaladdiisu ka darto AMA,
  - xumad yeesho ama xumaddiisu korodho.
- **Goorta lasoo noqdo: u sheeg hooyada in ay k usoo noqoto laba cisho gudahood.**

**Sida loo siinayo kaabsoosha Rectal artesunate ka**

**Bandhiga macalinta**

**U sheeg ardayda:**
Waxa aad hadda baran doontaa dhammaan talaabooyinka aad qaadayso maka aad ilmaha aad siinayso Rectal artesunate, sp ama capsules.

1. dhaq gacmahaaga.
2. dhinac u jiifi ilmaha ama xagga hore; hadii aad dhinac u jiifisay, lugta hoose waa in ay fidsanaataa lugta korena u soo laabnaataa xagga laabta.
3. ka qaad maryaha saaran ilmaha dabadiisa.
4. gasho laba galoof. Haddii aanad galoofyo heli karin, adeegso warqadda ku duuban kaabsoolka si aad u taabato.
5. ka saar inta xabbo ee kaabsool ah ee loo baahanyaay warqadda ay ku jiraan.
6. dhex gali hal rectal kaabsool ah biyo si aad u qoyso.
7. gacan kaliya, si dabacsasn, ugu kala qaad ilmaha baridiisa, si aad u arki karto daloolka dabada.
8. gacanta kale, si dabacsan ugu riix kaabsolka dabada daloolkeeda.
9. adiga oo adeegsanaya farta, ku riix kaabsoolka malawadka (2-4 cm.)
10. ka saar farta oo u hubi in kaabsoolku ku haro malawadka.

## "SANDUUQ 10/V" SII HADII ILMAHA QABO XANUUN AAD U DARAN AMA LAGU CADEEYAY MALARIA ARTESUNATE SP/KANIINI

### SII ARTESUNATE SP/TAB ILAMAHA QABA:

- HADDII ILMAHA UU QABA XUMAD AAD U DARAN AMA XANUUN AAD U DARAN ILMAHAASNA UU AWOOD INUU CABO, QALALNA UUSAN QABIN, HURDADIISUNA AY FIICANTAHY.
- MALARIA LAGU CADEEYAY.

### GUDBI ILMAHA

- Hadii uu cunugu awoodo in uu wax liqo ama uu cabi karo, oo uusan hunqaaceynin: sii cunuga cadadka ugu horeeya ee kaniinka (artesunate/sp), kadibna sii hooyada inta ka harsan cadadka daawadaee hary una sheeg in ay sii siiso ama u dhameystirto ilaa cunugu ka imaanyo cisbitaalka. Ama xarun caafimaad.
- **Hadii ilamaha uusan awoodin inuuu wax cabo ama naas nuugo, leeyahay qalal ama ay hurdadiisuu xuntahay oo aan la kicin Karin aad sanduuqa (9 V) kuna daawee Rrectal Artesunaet.**
- **KULA TALI HOOYADA IN LA GUDBIYO.**
- **SII HOOYADA WARQADA GUDBINTA.**
- **KULA TALI HOOYADA in ay kuu soo laabto marka ilmaha ay ka keento ispidaalka ama xarunta caafimaadka.**
- **LA SOCO ILMAHA MARKA LAGA KEENO ISPIDAALKA/XARUNTA CAAFIMAADKA ugu yar hal mar asbuucii ilaa ilmaha ka roonaado.**

### HADII GUDBINTA AY SUURA GAL AHYN

- HADII ILMAHA UU AWOOD INUU CABO, QALALNA UUSAN QABIN, HURDADIISUNA AY FIICANTAHY SII CADADA HORE EE ARTESUMAN SP/TAB LANA SOCO ILMAHA DIBNA U BAAR LIX SAACADOOD IYO MAALMAHA KU XIGA.
- SII ILMAHA CABITAAN SOKOR LEH AMA MALAB (11/V)
- TALO SII HOOYADA SIDA AY GURIGA UGU XANAANEYN LAHYDE IYO GOORTA AY SOO LAABANAYSO.

| A<br>kaniiniyaasha | B<br>Maalmaha | C<br>Da'da | | | |
|---|---|---|---|---|---|
| Kaniiniga SP 25mg/500mg iyo ARTESUNATE 50 mg. base | Maalinwalbo dawee mudo 3 maalin | 2 bilood 12bilood jir | | 12 bilood ilaa 5 sano jir | |
| | maalinta 1 | Artesunate ½. | SP ½. | Artesunate 1 | SP 1 |
| | maalinta 2 | Artesunate ½. | WAXBA HASIIN | Artesunate 1 | WAXBA HASIIN |
| | maalinta 3 | Artesunate ½. | WAXBA HASIIN | Artesunate 1 | WAXBA HASIIN |

**DAAWAYNTA “SANDUUQ 10 V”: KU DAAWEE ILMAHA ARTESUNATE/SP**

**SII ARTESUNATE SP/TAB ILAMAHA QABA:**
· HADDII ILMAHA UU QABA XUMAD AAD U DARAN AMA XANUUN AAD U DARA ILMAHAASNA UU AWOOD INUU CABO, QALALNA UUSAN QABIN, HURDADIISUNA AY FIICANTAHY.
· MALARIA LAGU CADEEYAY.

**U sheeg ardayda:**

Hadda waxa aan eegi doonaa SANDUUQ10V waxaanad baran doontaa:
- Sida loogu adeegsado artesunate/sp hab waafaqsan soocidda;
- Adeegsiga shaxanka daawaynta ee artesunate/sp;
- Raac dhammaan tilmaamaha ku qoran SANDUUQ 10V ee daawaynta.

**Tababaraha**

· Tus ardayda kartoonka ay ku jiraan kiniinka artesunate 3 tbs iyo SP 1 tb.
· U sharax in labada daawaba ay meel ku wada jiraan, bushqad ay ku dhantahay inta ilmuhu uga baahanyahay labadoodaba.
· U sheeg ardayda in ay tahay in ilmuhu qaato inta ugu horaysa si waafaqsan inta aad u garrato in ilmuhu u baahanyahay.

**U sheeg ardayda:**

Eeg SANDUUQ 10/ V.

**Tababaraha**

Si aad u barto uguna sharaxdo sida loo adeegsado SANDUUQAN, raac tallaabooyinka ku jira SANDUUQ 10V.

**Tallaabada koobaad:** Akhri xagga sare ee SANDUUQA

**Sii artesunate sp/tab ilamaha qaba:**
· Haddii ilmaha uu qaba xumad aad u daran ama xanuun aad u daran ilmahaasna uu awood inuu cabo, qalalna uusan qabin, hurdadiisuna ay fiicantahy
· Malaria lagu cadeeyay

**Talaabada Labaad:**

**Gudbi ilmaha**
- Sii ilmaha Artesunate S/P kanini, hooyadana u dhiib cadada harta ay ee Rectal Artesunate ilaa ay.
- Ispidaalka ka gaarayso,waxaa kaloo u sheegtaa in ay sii biyo iyo sokor ama malab, barna sida.
- loo diyaariyo.

- Hadii ilmaha ay heyso xumad aad u daran, cabitaana uusana cabi karin ama naaska nuugi karin uuna leeyahay qalal iyo xurdada oo ka xumaata aad SANDUUQA 9/V.

- Kula tali hooyada in ilmaha loo diro ispidaal sii hooyada waraqada gudbinta iyo soo laabashada.
- Kula tali hooyada in ay soo celiso ilamaha marka uu ka soon Ispidaalka.
- La soco ilmaha xaaladiisa marka uu ka soo laabta ispidaalka.

**Tallaabada saddexaad:**

**Hadii gudbin ay suura gal ahyn**

- Haddii ilmuhu qabo jirro daran (gds hal ama labo ka badan) ama jirro xumada daran leh, sii cadada hore ee Rectal Artesunate waxaa kaloo siisaa biyo iyo sokor ama malab.
- Waan aad la socotaa xaalada ilamaha 6 saacadood oo ku xigta.
- Xasuusin maalinta hore ilmaha waa in aad si isaa sp tablets keliya siina biyo iyo sokor ama malab. Eeg sanduuqa 7.

**Kala tali hooyada daryeelka guriga dhexdiisa:**
**Sii dareere dheeraad ah:** u kordhi naas nuujinta . cabitaan badan sii.
**Sii wad quudinta:** ha joojin quudinta ilmaha buka. Ku dhiiri gali in ilmuhu wax cuno.
**Goorta dhakhso loogu soo noqonayo waa hadii ilmuhu:**

- aan wax cabi karin ama naaska jaqi karin,
- ama cabiddiisa iyo nuugudiisu wanaagsanayn AMA,
- xaaladdiisu ka sii darto AMA,
- uu yeesho xummad ama xumadiisu korodho.

**U sheeg ardayda:**
Ilmuhu wa inuu qaataa SP kaniini, keliya maalinta koowaad eedaaweynta.

**Sii ilmaha biyo sokor leh ama malab.**

Waxaa jira sababa badan oo ilaha jiran uu u dhumin karo sokorta dhiigiisa. Ma baraneyno sababahas, lakin waa inaad ogaataa in ay muhim tahay in in la siiyo. Biyo soskor leh ama malab si loga hor tago mushkiladaas.

Bar hooyada sida loo sameeyo biyo sokor leh ama mlab sanduuqa 11V.

U sheeg hooyada in ilamaha jirin uu jirkiisu ka dhamaanayo dareeraha iyo sokort a xaaladiisuna ay xumaan karto ama uu dhiman karo.

**Tallaabada afaraad:**

**Sida loo isticmalo artesunate/SP cadada iyo sharaxadeds**

**Tusmada tababaraha**

U sheeg ardada iney fiiriyaan sanduqa kore.
Tababaraha: tusmada artesunate/sp, isticmal sanduqa 10 V.

- Tus kuwa la tababaraya galaska uu ku jiro atrtesunate/sp kaniiniga.
- U sharax in dawada hore loo soo soo shubay galas oo ay u dhantahay inta daawo oo ilmaha uu isticmalaya mudada 3 berri ah.
- U sheg in ilmaha u qadanayo dawada sida ku cad sanduqa 10V.
- Tilmam mesha da'da ay ku qorantahay. Sharax da'da xariijinta ay ku qorantahay. Ka dibna hel leyna ilmaha lixda bilood jira;
- Go'anso cadada dawada artesunate/SP ee loogu tala galay ilmaha lixda bilood jira oo qaba qandho. Ku adi calamada saxda ah ee artesunate/SP, si ad u tusto in ilmaha lixda bilood jira ay qadanayan ½ kaniiniga artesunate ilaa 3 beri iyo ½ kaniniga SP malinta hore keliya.
- Ku soo celi tusmada loogu talagalay ilmaha 2 sanno jira isla qeexidii. Ilmahan waa inuu qataa 1.
- Kanini oo artesunate ilaa 3 beri iyo 1 kanini oo SP oo keliya ah 1 malin.

Sii ardada wakhti ay ku akhriyan sanduqa.artesunat/SP.

## Layli 19 - Drill: artesunate/SP

Xaddi intee leeg iyo jadwal caynkee ah aya wax kusiin doontaa carruurta da'ahan soo socota leh:

| DA'DA | XADIGA IYO JADWALKA | XADIGA RECTAL ARTESUNATE |
|---|---|---|
| 8 bilood | artesunate ½ kiniin maalinkasta muddo 3 cisho ah, SP ½ kiniin maalinta koobaad ookaliya | 1 sup. |
| 5 sanno | artesunate 1 kiniin maalinkasta for muddo 3 cisho ah, SP 1 kiniin maalinta koobaad ookaliya | 3 sup. |
| 2 bilood | artesunate ½ kiniin maalinkasta muddo 3 cisho ah, SP ½ kiniin maalinta koobaad ookaliya | 1 sup. |
| 4 sanno | artesunate 1 kiniin maalinkasta muddo 3 cisho ah, SP 1 kiniin maalinta koobaad ookaliya | 3 sup. |
| 2 sanno | artesunate 1 kiniin maalinkasta muddo 3 cisho ah , SP 1 kiniin maalinta koobaad ookaliya | 2 sup. |
| 5 bilood | artesunate ½ kiniin maalinkasta muddo 3 cisho ah, SP ½ kiniin maalinta koobaad ookaliya | 1 sup. |
| 6 bilood | artesunate ½ kiniin maalinkasta muddo 3 cisho ah, SP ½ kiniin maalinta koobaad ookaliya | 1 sup. |
| 14 bilood | artesunate 1 kiniin maalinkasta muddo 3 cisho ah, SP 1 kiniin maalinta koobaad ookaliya | 2 sup. |
| 9 bilood | artesunate ½ kiniin maalinkasta muddo 3 cisho ah, SP ½ kiniin maalinta koobaad ookaliya | 1 sup. |
| 18 bilood | artesunate 1 kiniin maalinkasta muddo 3 cisho ah, SP 1 kiniin maalinta koobaad ookaliya | 2 sup. |
| 7 bilood | artesunate ½ kiniin maalinkasta muddo 3 cisho ah, SP ½ kiniin maalinta koobaad ookaliya | 1 sup. |
| 15 bilood | artesunate 1 kiniin maalinkasta muddo 3 cisho ah, SP 1 kiniin maalinta koobaad ookaliya | 2 sup. |

## Layli 20: Artesunate/SP

| XADDI INTII LEEG AYAAD KUSIIN JADWAL CAYNKEE AH CARRUURTA SOO SOCOTA EE QABTA KANEECADA? | | | |
|---|---|---|---|
| DA'DA | MAALIN 1 | MAALIN 2 | MAALIN 3 |
| 10 bilood | artesunate ½ tb<br>SP ½ tb | artesunate ½ tb | artesunate ½ tb |
| 2 sanno | artesunate 1 tb<br>SP 1 tb | artesunate 1 tb | artesunate 1 tb |
| 5 sanno | artesunate 1 tb<br>SP 1 tb | artesunate 1 tb | artesunate 1 tb |
| 12 bilood | artesunate 1 tb<br>SP 1 tb | artesunate 1 tb | artesunate 1 tb |
| 6 sanno | artesunate 1 tb<br>SP 1 tb | artesunate 1 tb | artesunate 1 tb |
| 4 bilood | artesunate ½ tb<br>SP ½ tb | artesunate ½ tb | artesunate ½ tb |
| 15 bilood | artesunate 1 tb<br>SP 1 tb | artesunate 1 tb | artesunate 1 tb |
| 4 sanno | artesunate 1 tb<br>SP 1 tb | artesunate 1 tb | artesunate 1 tb |
| 9 bilood | artesunate ½ tb<br>SP ½ tb | artesunate ½ tb | artesunate ½ tb |
| 18 bilood | artesunate 1 tb<br>SP 1 tb | artesunate 1 tb | artesunate 1 tb |
| 6 bilood | artesunate ½ tb<br>SP ½ tb | artesunate ½ tb | artesunate ½ tb |
| 3 bilood | artesunate 1 tb<br>SP 1 tb | artesunate 1 tb | artesunate 1 tb |
| 2 sanno | artesunate 1 tb<br>SP 1 tb | artesunate 1 tb | artesunate 1 tb |
| 11 bilood | artesunate ½ tb<br>SP ½ tb | artesunate ½ tb | artesunate ½ tb |
| 6 bilood | artesunate ½ tb<br>SP ½ tb | artesunate ½ tb | artesunate ½ tb |

**Usheeg ardayda:**
Qor dhammaan xogta adiga oo adeegsanaya foomka wax qorista

Safia waa ilmo 6bilood jirta. Ilmhani waxa uu lahaa qalal habeenkii, waa adoodda in ay wax cabto, si aan caadi ahayna uma hurdaysna.
**Sooc Safia**

Safia ma qufacayso, malaha shuban. Waa qandhaysantahay.
**Sooc Safia**

*Intaa kadib waydii ardayda:*
*U dir safiya Ispidaal ama xarun caafimaadh.*
*Sidee u soocdeen ilmahan?*
*Sidee u dawaynaysaan ilmahan?*

## Layli 21: Safia

**Biyo sonkor ama malab leh:**
Qor dhammaan xogta adiga oo adeegsanaya foomka wax qorista.

Safia waa ilmo 6bilood jirta. Ilmhani waxa uu lahaa qalal habeenkii, waa adoodda in ay wax cabto, si aan caadi ahayna uma hurdaysna.
**Sooc Safia.**

### Jawaabta layliga 21: Safia

Safia waxay u baahan tahay in la gudbiyto: JIRRO XUMAD DARAN LEH
Safia wax waa cabi kartaa si aan caadi ahayna uma hurdayssan kumana adka soo toosku, sida daraadeed waxa lagu daawaynayaa kiniin artesunate ½ maalin kasta muddo 3 cisho ah iyo ½ z.

- Biyo sonkor ama malab leh.
- Ku dawee rectal artesunate subosto oo noqoneysa daaweynta hore intan isbilalka la geyn.

## "SANDUUQ 11 V" SII MILAN SONKOR AMA MALABLEH

SII DAREERE SONKOR LEH AMA MALAB ILMA KASTA OO LOO SOOCAY IN UU QABO:
**JIRRO XUMADEED OO AAD U DARAN, JIRRO AAD U DARAN, AMA OOFWAREEN DARAN.**

- Haddii ilmuhu wax cabi karo, u diyaari koob biyo ah oo aad ugu dartay mulgacad sonkor ah, si wacan u walaaq ka kabina ilmaha.
- Haddii ilmaha naaska la siiyo isna uu jaqi karo, u sheeg hooyada in ay ilmaha jaqsiiso inta u badan ee uu qaadan karo.
- Haddii ilmuhu naaska jaqayo hase ahaatee aanu nuuqi karin haatan, waxse liqi karo, sii ½ koob caano naaska laga maalay ah (naaska hoyada).
- Haddii aanay caano jirin, sii ½ koob dareere sonkor leh ah.

## "SANDUUQ 11 V" SII DAREERE LEH SONKOR AMA MALAB

**U sheeg ardayda:**
Sii dareere leh sonkor ama malab, haddii la heli karo, ilmaha qaba
- JIRRO XUMAD DARAN LEH
- OOF WAREEN DARAN
- JIRRO AAD U DARAN si looga hortago in sonkorta dhiigu hoos u dhacdo.

**Tababaraha:**
U akhri oo u sharax waxa ku qoran SANDUUQ 10V intaa kadibna tusaalee ardayda.

# QAYBTA IV:

*WAXA LOO ADEEGSADO QIIMAYNTA IMTIXAANKA U DAMBEEYA EE ACT*

## Layli 22: Halima

**Usheega ardayda:**
Layligani waa kii u dambeeyey. Waxa uu taabanayaa dhamaan ciwaanadii xiriirka lalahaa qiimaynta, soocista iyo daawaaynta ee aad soo baratay intii tababarkani socday. Imtixaankan, fahamkaaga ayaa lgu qiimayn doonaa. Waxa aad adeegsan doontaa Buugga Diiwanka si aad u qorto dhammaan xogta aan kusiin doono. Waxa laguu waydiiyay waa in aad qiimayso, soocdo, daawayso lana socoto Halima hooyadeedna aad talo siiso.

Waxa aan kuu akhriyi hadba hal xog, si aan kuusiiyo waqti ku filan in aad ku qorto foomamk wax lagu kaydiyo

**Ogaysiin ku socota Tababarha:** bilaw in aad u khrido xaaladda.
(magaca xaafadda waxa loo badali karaa hadba halka tababarku ka socdo).

Halima is 36 months old. She's coming from ............. Halima had convulsions two days ago. She is able to drink and is alert.

**1. Sooc Halima**
(ku calaamadi buuggaaga diwaanka)
Halima waa qufacaysay muddo 4 cisho ah.

**2. Sooc Halima.**
(ku calaamadi foomka kaydka)
Halima has diarrhea.
She has sunken eyes and the skin pinch goes back very slowly.

**3. Sooc Halima**
(ku calaamadi foomkaaga keydka).
Xummad ayay lahayd laba cisho.

**4. Sooc Halima.**
(ku calaamadi foomka keydka).

**5.How you will treat the child?**
(hubi foomkaaga kaydka si aad u hubiso in aad siinayso daawadii saxa ahayd si waafaqsan soocista loo sameeyey).

**6. Halima ma u baahantahay in cusbitaal loo diro?**
(ku calaamadi foomkaaga keydka).

## Jawaabta layliga 22: Halima

Soocista Halima  iyo daawaynteedu waa sidan soo socota:

**SOOCISTA IYO DAAWAYNTA**

1. **Jirro Aad u Daran.**
2. **Shuban leh Fuuqbax DAran.**

- ORS 2000 lixda saacadood ee u horaysa.
- Zinc kiniin ah 1xabbo maalin kasta muddo 10 cisho ah  (ka hor inta aan lasiin kiniin zinc ah ilmaha qaba Fuuqbaxa darani waxa uu u baahanyahay in uu sugo muddo lix saacadood ah).

3. **Jirro xumad daran leh**
Amoxicillin 250 mg. 2 tbs;. Rectal artesunate 2 suppositories as pre - referral treatment.

4. **Cusbitaal u diris**

- Ilmaha xaaladdiisu aad ay u daran tahay waana in cusbitaal loo diro si dhakhso ah.

5. **Kala tali hooyada cusbitaalka aad u dirayso**, sii milan ORS ah oo ku filan ilmaha, xaddiga u horeeya ee  Artesunate/SP ah.

**Referral**

- The child is very severe and must be referred immediately.
**Advise the mother on Referral**
Referral/Back Form and on return back from the hospital.